JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

HINDISE-SHARCIYEEDKA WAX-KA-BADDELKA QEYBTA 6AAD EE SHARCIGA IIBKA QARANKA

Table of Contents

QAYBTA 6AAD
HABRAACA MAAREYNTA QANDARAASYADA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

CUTUBKA 1AAD
BAAXADDA SHARCIGA

Qodobka 108aad
Magaca iyo Nidaamka Lambarrada ee Qodobbada Sharcigan

1. Sharcigan waxaa loogu yeerayaa "Sharciga Waxka-bedelka Qaybta Lixaad ee Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016".

2. Sharcigani waxa uu ka kooban yahay dib-u-eegis baaxad weyn iyo balaarin ku aadan Qaybta Lixaad ee Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016, sidaa awgeed nidaamka lambarada Qaybta Lixaad ee ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016, dib u habayn ayaa lagu sameeyay, iyadoo lasiiyay lambaro cusub. Haddaba, iyadoo oo aan waxba loo dhibayn nidaamka lambarada ee Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016, Sharcigan waxaa loo tixgelinayaa inuu qayb kayahay Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016, uuna beddelay Qaybta Lixaad ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

Qodobka 109aad
Ujeedooyinka Sharcigan

1. Ujeedooyinka Sharcigani waa:
   a) inuu sameeyo hannaan dhammaystiran oo daboolaya bilaaw-ilaa-dhamaad baahiyaha la xiriira habraaca maareynta Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, oo ay ka midyihiin doorashada (identification), diyaarinta, hirgelinta iyo maaraynta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   b) inuu abuuro hay'adaha ugu muhiimsan ee ugu xilsaaran Dowladda, xulashada, diyaarinta, hirgelinta iyo maaraynta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   c) inuu qeexo habraacyada Hay'adaha Gaarka Loo-leeyahay ay kaga qayb-qaadan karaan maalgelinta, dhismaha, horumarinta, hawlgallinta ama dayactirka kaabayaasha dhaqaalaha ama mashaariicda horumarinta iyada oo loo marayo Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   d) inuu dejiyo habraac hufan oo mashaariicda lagu dooranaayo iyo habraacyo cadcad oo lagu kala soo xulanaayo Qandaraas Usoo-tartamayaasha si loo dhiirigeliyo maalgashiga ka imaanaya Hay'adaha Gaarka Loo-leeyahay; iyo
   e) inuu hirgeliyo nidaamyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah iyo habraacyada ugu habboon ee ansixinta (clear approval processes), si loo horumariyo awooddaha

hay'adaha Dowladda si loo xaqiijiyo koritaanka iyo qaangaarnimada Habraaca Maaraynta Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 110aad
Baaxadda iyo Arrimaha Lagu-dhaqaayo Sharcigan

1. Sharcigani waxa uu dejinayaa xeerarka iyo habraacyada diyaarinta, xulashada (procurement) iyo kuwa Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) ay isticmaalayaan si ay u hirgeliyaan Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

2. Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa oo lagu dhaqayaa dhammaan mashaariicda iyo hawlaha hoos yimaada Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, waana in si gaar ah loogu dabaqaa:
   a) Hirgelinta iyo diyaarinta hawlaha daruuriga u ah mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn kuwaan soo socda:
      i. qiimaynta soo-jeedinta mashaariicda si loo go'aamiyo in ay ku habboon yihiin in lagu hirgeliyo qaab Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah;
      ii. doorashada (identification) iyo qiimaynta (appraisal) mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah:
      iii. diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska(Tender Documents);
      iv. daabacaada iyo shaacinta casumaadyada lagu wargelinaayo Qandaraas Usoo-tartamayaasha iyo qiimaynta Jawaabaha Codsiyada Soo-gudbinta Soojeedimaha;
      v. habraaca iyo shuruudaha ansixinta iyo saxiixidda Qandaraaska Mashruuca; iyo
      vi. fulinta, korjoogtaynta iyo la socodka Qandaraaska Mashruuca.

   b) Dhammaan Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) ee fulinaaya, ka qayb-qaadanaya, ama samaynaaya xulitaano (procuring) la xiriira Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; iyo
   c) Dhammaan Hay'adaha Gaarka Loo-leeyahay ee ka qaybqaadanaya Tartan Qandaraas iyo/ ama ka qaybqaadanaya fulinta Qandaraas Mashruuc.

3. Haddii heshiisyo hagaaya soo saarista khayraadka dabiiciga ah ee xaddidan (non-renewable) oo lagula jiro Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay aan loo aqoonsan inay yihiin kuwa hoos imaanaya nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah (PPP), waxaa waajib ah in habraaca bixinta heshiisyadaas/qandaraasyadaas loo fuliyaa qaab waafaqsan mabaadi'da Sharcigan, waana in loo bixiyaa heshiisyadaas si tartan furan ah. Wasiirka ayaa soo saaraya xeer-nidaamiye lagu caddeeynaayo habka loogu dabaqaayo Sharcigan bixinta heshiisyada hagaaya soo saarista khayraadka dabiiciga ah ee xaddidan

(non-renewable), iyo sida la'isku waafajinaayo Sharcigan iyo shuruucda lagu maamulo qodista khayraadka dabiiciga ah.

4. Dhammaan mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah oo ay tahay in loo fuliyo si waafaqsan Sharcigan waa inay iska-kaashadaan, walibana ay korjoogteeyan Wasaaradda, Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariica (Procuring Entities), Waaxda Farsamada iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), iyada oo mid kastaa raacayo waajibaadkiisa gaarka ah ee ku xusan Sharcigan.

5. Haddii Sharcigani ka hor yimaado qodobbada heshiisyo ama xeerarka iibka ee deeq-bixiye ama hay'ad bixinaysa taageero maaliyadeed oo Dowladdu la gashay heshiis, waxaa la qaadanayaa qodobbada iyo shuruudaha heshiiskaas Dowladdu gashay. Habraaca xulashada ee ku saabsan arrimaha kale ee aan ku jirin heshiiskaas, waxaa lagu dhagayaa Qodobbada Sharcigan.

Qodobka 111^{aad}
Qeexitaanno

Haddii aan si kale loogu qeexin qodob kale oo Sharcigan katirsan, ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor goran:

1. "**Sarkaal Idman**" waa sarkaalka mas'uulka ka ah hay'adda Dowladda, kaas oo lagu magacaabo habka qorista saraakiisha Dowladda. .

2. "**La awoodi karo**" macneheedu waa:
   a) in balanqaadyada maaliyadeed ee ku qoran Qandaraaska Mashruuca oo ay galayso Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay yihiin kuwa Dowladdu kasoo bixi karto, walibana aysan ku kalifayn Dowladda ama Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) culays maaliyadeed oo aan maangal ahayn, kaas oo laga soo bixi karo iyadoo la isticmaalaayo lacagaha:
      i. lagu qoondeeyay miisaaniyadda dhaqan-galka ah ee Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity); iyo
      ii. loogu qoondayn doono Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) kutalagalka miisaaniyadda mustaqbalka;

   b) in kharashaadka ku baxaaya dhammaystirka kaabaha dhaqaale ama bixinta adeegga aysan ku kalifayn culays maaliyadeed oo aan maangal ahayn dadwaynaha isticmaalaya kaabaha dhaqaale ama adeegga; iyo

c) in baahida maaliyadeed ee mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah lagu maarayn karo miisaaniyadda Dowladda ee muddada gaaban, dhexe iyo tan fog (inter-temporal budget).

3. "**Hantidhawraha Guud**" waxa loola jeedaa Hanti-dhawraha Guud ee loo magacaabay si waafaqsan Sharciga Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ee 2023.

4. "**Qandaraas Usoo-tartame**" waa shaqsi ama dalad kasta oo ka geyb qaadanaysa tartanka qandaraaska.

5. "**Tartanka Ku-salaysan Wadahadalka (Competitive Dialogue)**" macnihiisu waa mid ka mid hababka dhif iyo naadirka ah ee ka midka hababka tartanka qandaraaska, kaas oo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay marka kowaad ku martiqaado tartamayaasha qandaraaska inay la galaan wadahal Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), iyada oo ujeedadu tahay in la abuuro hal ama in ka badan oo kamid ah xeeladaha farsamo, sharci iyo/ama maaliyadeed oo ku habboon bixinta mashaariicda adag ama aan caadiga ahayn, xeeladahaas oo saldhig u noqon doonta shuruudaha laga rabo in lagu sii kala xusho tartamayaasha kasoo gudbay xulashada kowaad (prequalified bidders) kuwaas oo laga dalbanaayo inay soo gudbiyaan dukimintayadooda tartanka ce maaliyadeed iyo farsamo.

6. "**Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca (Concept Note)**": waxaa loola jeedaa warbixin qeexaysa fikradda ka danbeeysa mashruuca, oo ay ku jiraan ujeedooyinka, habraaca qiimeynta tartamayaasha, natiijooyinka la filayo iyo miisaaniyada, sida lagu faahfaahiyay Qodobka 155 oo ka hadlayaa Nuxurka Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

7. "**Tartamayaal Dalladaysan (Consortium)**" macneheedu waa koox ka kooban shakhsiyaad leh shakhsiyad khaanuuni ah kuwaa oo si rasmi ah ugu heshiiyay inay si wadajir ah uga qaybqaataan mashruuc iyo/ama geeddi-socodka tartanka qandaraaska, iyagoo isticmaalaya hal magac oo mideeynaaya ujeeddooyinkooda ku aadan mashruuca ama tartanka qandaraaska. Tartamayaasha Dalladaysan waxay isku abaabuli karaan iyagoo isticmaalaya dallad aan diiwangashnayn (unincorporated consortium) ama dallad sharci ahaan la diiwaangeliyay ama shuraako ahaan.

8. "**Nidaamka Gorgortanka Tooska ah (Directly Negotiated Process)**" waxaa loola jeedaa nidaam qandaraas gelid kaasoo bilaabma marka la helo Soo-jeedin Aan La-dalban (Unsolicited Proposal), iyadoo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay si toos ah ugala xaajoonayso Qandaraaska Mashruuc hay'adda gaarka loo leeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta Aan Ladalban, iyada oo aan

la shaacin in loo soo tartamo qandaraaska. Marka la maraayo nidaamkaan waxaa shuruud ah in loo hoggaansamo Qodobka 145 ee Sharcigan.

9. "**Warbixinta Qiimeynta (Evaluation Report)**" waxaa loola jeedaa mid kamida, hadba sida markaa loo baahdo, Codsiga Soo-gudbinta Qiimaha (RFQ) ama Codsiga Soo-gudbinta Soo-jeedinta (RFP).

10. **"Caddeynta Muujinaysa Rabitaan (EOI)"** waxaa loola jeedaa caddeynta muujinaysa rabitaanka ka qayb-qaadaashada mashruuc taas ee uu soo gudbiyo Qandaraas Usoo-tartame isagoo ka jawaabaya Codsiga Soo-gudbinta Caddeyn Muujinaysa Rabitaan (REOI).

11. **"Dammaanadda Qandaraaska (Bid Security)"** waxaa loola jeedaa dammaanad banki baxshay ama nooc kale oo dammaanad ah oo uu soo gudbiyay Qandaraas Usoo tartame, taas oo la socota dukumintiga usoo tantanka qandaraaska, taas oo loogu talagalay in lagu xaqiijiyo ama lagu sugo waajibaadka saaranka Qandaraas Usoo-tartamaha, oo ay ku jirto waajibaadka qandaraas gelisia, haddii tartankiisa la aqbalo.

12. "**Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca (Pre-Feasibility Study)**" waa daraasad (aan loo baahnayn mar walba) loo sameeyo si loo baaro qaar ka mid ah arrimaha muhiimka ah ee mashruuc la soo jeediyay. Arrimahan waxa ka mid noqon kara hubinta suurtagalnimada farsamo ama deegaan ee mashruuca, qiimaynta dhagaalaha ama maamulkiisa, iyo sidoo kale falanqaynta arrimaha kale ee muhiimka u ah Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca (Procuring Entity), ka hor inta aan la go'aansan in la fuliyo Daraasadda Buuxda ee Suurtagalnimada Mashruuca.

13. "**Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca (Feasibility Study)**" waa daraasad sahan faahfaahsan oo loo sameeyo si loo qiimeeyo in Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaag** uu yahay mid macquul ah oo la hirgelin karo, iyadoo laga eegayo dhinacyada farsamo, dhaqaale, sharci, bulsho, iyo deegaan. Daraasaddu waxay sidoo kale sahminaysaa sida mashruucu ula qabsan karo khataraha ka iman kara isbeddelka cimilada iyo tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee la qabsiga isbeddelka cimilada, iyo sidoo kale in mashruucu ku habboon yahay in loo fuliyo tyadoo la adeegsanayo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga**.

14. "**Ansixinta Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca (Feasibility Study Approval)**" waxaa loola jeeda ansixinta ay soo saaraan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), kaasoo u ogolanayaa Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) in ay bilowdo diyaarinta wajiga tartanaka qandaraaska.

15. "**Warbixinta Ugu-dambeys ee Khataraha Mashruuca (Final Project Risk Report)**" waxaa laga wadaa warbixin uu diyaariyay Guddiga Mashruuca taas oo lasoo saaro marka ladhameeyo gorgortanka qandaraaska ee lagula jiray Qandaraas Usoo-tartame ama cid kale ee soo gudbisay Soo-jeedin Aan La-dalban. Warbixintaan ayaa larabaa inay ka koobnaato dhammaan shuruudaha qandaraaska ee laga wada gorgotamay, nuqul ka mid ah Qandaraaska Mashruuca ee ugu dambeeyay, nuqul kamida Qandaraaska Mashruuca oo leh raadraaca muujinaya isbedellada lagu sameeyay, xog kooban oo ku saabsan isbedellada lagu sameeyay Qandaraaska Mashruuca iyo xog kooban oo kusaabsan Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Markaa Taagan (Fiscal Commitments) iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustaqbalka Imaan-kara (Contingent Liabilities) ee lasoo jeediyay in Dowladdu dusha saarato. Eeg Qodobka 160-BB ee Sharcigan.

16. **"Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Markaa Taagan (Fiscal Commitments) iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustagbalka Imaan-kara (Contingent Liabilities)"** waxaa loola kala jeedaa waajibaadyada lacag bixineed oo ay tahay in lasameeyo haddii uu dhaqangalo qandaraaska Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah iyo waajibaadyada lacag bixineed ee mustaqbalka imaan-kara, oo bixintooda, xilliga bixintooda iyo inta la bixinaayo ay ku xiran yihiin dhacdooyin mustaqbalka imaan kara, kuwaa oo ka baxsan awoodda Dowladda.

17. **"Ogeysiiska Guud Ee Fursada Maal-gashi (General Notice of Investment Opportunity)"** waxaa loola jeedaa ogeysiiska fursadaha maalgashi oo ay tahay in ay daabacdo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ka hor inta aan si rasmi ah loo shaacin Dukumintiyada Xulushada Qandaraas Usoo-tartamayaasha ee Horudhaca ah (Pre-Qualification Documents) ama Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP). Ogeysiiskaan waa inuu ka koobnaada sharaxaad kooban oo ku saabsan ujeedka Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay ka leedahay mashruuca macluumaad ku saabsan mashruuca iyo sharraxaad kooban oo ku saabsan waqtiga la doonayo in lagu soo gabagabeeyo hawlaha tartanka qandaraaska. Eeg Qodobka 160-M ee Sharcigan.

18. "**Guddiga Iskudhafka Wasiirada (Inter-Ministerial Committee)**" waxaa loola jeedaa Guddiga Isku Dhafka ah ee Wasiiradda, ee lagu dhisay Qodobka 123 ee Sharcigan.

19. **"Casuumidda Qandaraas Usoo-tartamidda (Invitation to Bid)"** waxa loola jeedaa ogaysiiska la xiriira Codsiga Soo-gudbinta Soo-jeedin (RFP) kaas oo si toos ah loo shaaciyay ama si gaar ah loogu diray Qandaraas Usoo-tartamayaal ay soo xulatay

Hay’adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity). Casuumadan ayaa ka kooban habraaca Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP), isagoona ku casuumaya Qandaraas Usoo-tartamayaasha inay kasoo jawaaban Codsiga Soo- gudbinta Soojeedinta (RFP), walibana ku wargelinaya sida ay ku heli karaan Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP). Eeg Qodobka 160-X ee Sharcigan.

20. **"Lifaaqa Ballanqaadyada Maaliyadeed (Financial Commitment Addendum)"** waxaa loola jeedaa dukumeentiga loo diyaariyay si waafaqsan Qodobka 160-D (3) ee Sharcigan.

21. **"Guddiga Madax-bannaan ee Dib-u-eegista libka Dowladda (Independent Procurement Review Panel)"** waxaa loola jeedaa Guddiga Madax-bannaan ee Dib-u-eegista ibka Dowladda ee loo aasaasay si waafaqsan Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

22. “**Casuumidda Ka-qaybgalka Xulashada Horudhaca ah (Invitation to Pre-Qualify)"** waxaa loola jeeda ogeysiiska Casuumidda Ka-qaybgalka Xulashada Horudhaca ah kaas oo si guud loo shaaciyay ama si gaar ah loogu diray koox cayiman oo Qandaraas Usoo-tartamayaal ah oo ay soo xulatay Hay’adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), kaas oo soo koobaya xogta mashruuca, ku casuumaya tartamayaasha inay ka qayb qaataan xulashada horudhaca ah, walibana u sheegaya sida loo heli karo Dukumentiyada Xulashada Horudhaca ah. Eeg Qodobka 160-P ee Sharcigaan.

23. **"Qiimaynta Suuga (Market Sounding)"** waxaa loola jeeda wada-hadal lala yeesho hay'adaha gaarka loo leeyahay kaas oo Hay’adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay ku qiimaynayso suurtagalnimada mashruuca ay danayneeyso, iyadoo ujeedadu tahay in la tijaabiyo rabitaanka iyo awoodda hay'adaha gaarka loo leeyahay ay ku maarayn karaan khataraha iyo mas'uuliyadaha laga wareejinayo, kuwaa oo ka wareegi doona Dowladda, iyadoo gaar ahaan la go'aaminaayo:
    a) Awoodda Farsamo (capability): hay'adaha gaarka loo leeyahay (ha ahaadaan kuwa keli keli ah ama kuwa dalladaysan) ma leeyihiin awooda farsamo oo ay ugu bixi karaan mashruuca;
    b) Awoodda Baaxadeed (capacity): hay'adaha gaarka loo leeyahay ee suuqa kujira ma leeyihiin awood ay si degdeg ah oo ballaaran ay uga soo bixi karaan waajibaadka mashruuca; iyo
    c) Bisaylka: suuqo mau bisilyahay inuu ka jawaabo baahiyaha mashruuca.

24. **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

25. “**Wasaarad**” waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda.

26. "**Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada (Open and Competitive Procurement Proceedings)**" waxaa loola jeeda Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada kaas oo Dukumentiyada Qandaraaska loo shaaciyo si guud, iyadoo Qandaraas Usoo-tartame kasta lagu casuumaayo inuu ka qayb-qaato tartanka.

27. "**Qandaraas Usoo-tartamaha La-doorbiday (Preferred Bidder)**" waxaa loola jeeda Qandaraas Usoo-tartame loo aqoonsaday inuu yahay kan ugu sarreeya kaddib marka la qiimeeyay soo jeedimaha tartamayaasha, kadibna Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) wu ansixiyay Warbixinta Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP).

28. "**Xulashada Horudhaca ah (Pre-Qualification)**" waa weji ka mid ah wejiyada Qandaraas bixinta, kaas oo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay ku soo koobayso liiska Qandaraas Usoo-tartamayaasha u qalma qandaraaska, iyada oo la raacayo shuruudaha horey loo go'aamiyay ee Xulashada Horudhaca ah.

29. "**Shuruudaha Xulashada Horudhaca ah (Pre-Qualification Criteria)**" waxa loola jeeda shuruudaha qiimeynta, kuwaas oo noqon kara kuwo sharci, farsamo, iyo/ama maaliyadeed, kuwaas oo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay u isticmaali doonto si ay u soo koobto liiska Qandaraas Usoo-tartamayaasha ka qayb-qaadan doona wejiga soo Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP).

30. "**Dukumintiyada Xulashada Horudhaca ah (Pre-Qualification Documents)**" waxaa loola jeeda dukumentiyada ay diyaarisay Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) oo kaashanaysa Guddiga Mashruuca, kuwaas oo ka kooban shuruudaha ka qaybgalka Xulashada Horudhaca ah, iyo shuruudaha ugu yar ee xulashada horudhaca ah ee larabo inay cid waliba soo buuxiso. Eeg Qodobka 160 Q ee Sharcigan.

31. "**Warbixinta Xulashada Horudhaca ah (Pre-Qualification Evaluation Report)**" waxaa loola jeeda warbixin ku saabsan qiimeynta jaawabaha ay soo direen hay'adaha gaarka loo leeyahay oo ka jawaabaya Xulashada Horudhaca. Eeg Qodobka 160-T(2) ee Sharcigan.

32. "**Jawaabaha Xulashada Horudhaca ah (Pre-Qualification Response)**" waxaa loola jeeda tiro kooban oo dukumentiyo ah oo ay Qandaraas Usoo-tartamayaasha usoo direen Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) iyagoo ka jawaabaya dukumentiyada Xulashada Horudhaca ah.

33. **"Hay'add Gaarka Loo-leeyahay"** waxaa loola jeeda cid kasta oo aan ahayn Hay'adda Dawladdeed oo leh shakhsiyad khaanuuneed ama koox mid kasta leeyahay shakhsiyad khaanuuneed kuwaa oo samaystay dallad, oo loo aasaasay si waafaqsan shuruucda Soomaaliya ama shuruucda kajirta dal kale.

34. **"Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity)**" waxaa loola jeeda hay'adda Dowladeed oo mas'uulka ka ah mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

35. **"Mashruuc (Project)"** waxaa loola jeeda naqshadeynta, maalgelinta, dhismaha, horumarinta ama ka-shaqeysiinta kaabayaal, hanti ama xarun kuwaa oo cusub ama dayactirka, casriyeynta, ballaarinta, hawlgallinta ama maaraynta kaabayaal, hanti ama xarun loogu talagalay bixinta adeegga kuwaa oo horay u jiray.

36. **"Qandaraaska Mashruuca (Project Agreement)"** waxaa loola jeedaa qandaraas, ama qandaraasyo badan, oo ay wada saxiixdeen Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) iyo Hay'add Gaar Loo-leeyahay oo loogu talagalay ka miro-dhalinta mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah. Qandaraaskaan waa inuu ka koobnaadaa dhammaan shuruudaha lagu qeexay Lifaaqa 4aad ee Sharcigan ku lifaaqan.

37. **"Guddiga libka (Procurement Committee)"** waxaa loola jeeda guddiga iibka ee loo aasaasay si waafaqsan Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

38. **"Waaxda libka (Procurement Unit)"** waxaa loola jeeda waaxda iibka ee loo aasaasay si waafaqsan Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016.

39. **"Guddiga Mashruuca (Project Committee)"** waxaa loola jeedaa Guddiga Mashruuca ee loo dhisay si waafaqsan Qodobka 132 ee Sharcigan.

40. "**Shirkadda Gaarka ah Ee Mashruuca Fulinaysa (Project Company)**" waxa loola jeedaa shirkad gaar ah ee uu dhisay Qandaraas Usoo-tartamaha ku guulaystay qandaraaska, taas oo ujeedadeedu tahay fulinta mashruuca, iyo la wareegista dhammaan xuquuqaha iyo waajibaadyada saaran Qandaraas Usoo-tartamaha ku guulaystay qandaraas Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah.

41. **"Qorshaha Xulashada Cidda Mashruuca Fulinaysa (Project Procurement Plan)"** waxaa loola jeeda gorshaha xulashada kaas oo ay diyaarisay Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) inta lagu guda jiray Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca (Feasibility Study), kaas oo ka kooban waqtiyada kama dambaysta ah ee lagu soo gabagabeeynaayo dhammaan hawlaha horudhaca ah ee

daruuriga ah xayeeysiinta tartanka qandaraaska; habka wadashaqaynta ee lagu xaqiijinaayo sida loo kaashanaayo hay'adaha kale ee Dowladda marka ay daruuriga nogoto; iyo qeexitaanka habraaca xulashada cidda fulinaysa mashruuca ee la isticmaalayo (sida tartanka furan, ama tartanka xadidan, ama halka il ah, ama gorgortanka tooska ah ama soojeedinta aan-ladalban) iyo warbixinnada kale ee lagu qeexay Qodobka 160-B ee Sharcigan.

42. "**Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca (Project Concept Approval)"** waxaa loola jeedaa ansixinta rasmiga ah ee loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 153 ee Sharcigan ee ku aadan Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

43. "**Hay'ad Dawladeed (Public Entity)**" waxa loola jeedaa hay'ad kasta oo Dowladeed oo loo qoondeeyay qoondo miisaaniyadeed, loona xilsaaray mas'uuliyadda gorshaynta iyo isticmaalka miisaaniyadaas, waxaana ka kooban kuwaan soo socda: wasaaradaha, hay'adaha, guddiyada, maamuladda, iyo shirkadaha ay leedahay Dawladda Dhexe iyo hay'add kasta oo gaar loo leeyahay ee isticmaasha lacag Dowladeed.

44. "**Soo-jeedin (Proposal)**" waxaa loola jeedaa soo jeedin nuuceedu yahay mid farsamo iyo maaliyadeed ee uu soo gudbiyay Qandaraas Usoo-tartame isagoo ka jawaabaya Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP).

45. "**Qandaraasyada Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah (Public Private Partnership)**" waxaa loola jeedaa qandaraas waqti dheer ah oo u dhexeeya Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) iyo Hay'add Gaar Loo-leeyahay, kaas oo:
   a) Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ay masuul ka noqonayso fulinta hawl Dowladeed ama bixinta adeeg Dowladeed iyadoo wakiil ka ah Hay'adda Dawladdeed ee Qandaraaska gashay;
   b) Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ay ku helayso faa'iido fulinta hawsha Dowladeed ama bixinta adeegga Dowladeed, faa'iidadaas oo noqon karta:
      i. lacag ay ka hesho Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity);
      ii. khidmad ama lacago ay Hay'adda Gaar Loo-leeyahay ka uruuriso dad-waynaha isticmaala adeegga ay bixiso; ama
      iii. faa'iido ka kooban lacag ay ka hesho Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Enity) iyo khidmad ama lacago ay ka uruuriso dad-waynaha isticmaala adeegga ay bixiso; walibana

   c) Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ay aqbalayso in ay kala soo wareegto Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), qaybaha ugu waaweyn ee khataraha mashruuca, iyadoona dusha saaranaysa mas'uuliyadda aasaasiga ah ee khatarahaas.

46. **"Codsiga Soo-gudbinta Caddeyn Muujinaysa Rabitaan (REOI)"** waxaa loola jeedaa ogaysiis ay daabacday Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), kaas oo ay ku codsanayso in Hay'adaha Gaarka Loo-leeyahay ay kasoo jawaabaan Codsiga Soo-gudbinta Caddeyn Muujinaysa Rabitaanka (REOI) ee ku aadan mashruuc markaas maanka lagu haayo oo cayiman ama mashruuc kale oo suurtagal ah.

47. **"Hay'adda Iibka Qaranka"** waxaa loola jeedaa Hay'adda libka Qaranka oo loo dhisay si waafaqsan Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

48. **"Codsiga Soo-gudbinta Soo-jeedinta (RFP)"** waxaa loola jecdaa ogaysiis ay daabacday Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), kaas oo ay ku codsanayso in Hay'adaha Gaarka Loo-leeyahay ay kusoo gudbiyaan Soojeedintooda ku aadan mashruuc markaas maanka lagu haayo oo cayiman ama mashruuc kale oo suurtagal ah. Eeg Qodobka 160-Y ee Sharcigan.

49. **"Habraaca Xulashada Tartanka Xaddidan (Restricted and Competitive Procurement Proceedings)"** waxaa loola jeeda habraac xulasho oo tartankeedu xaddidanyahay taas oo Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska(Tender Documents) lasoo saaray, balse koox Qandaraas Usoo-tartamayaal gaar ah oo keliya lagu casuumay inay tartanka ka qayb-qaatan.

50. **"Warbixinta Qiimaynta Jawaabaha Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP Evaluation Report)"** waxaa loola jeedaa warbixinta ay soo diyaariyeen Guddiga Mashruuca oo soo koobaysa natiijada giimaynta Jawaabaha Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta, oo ay ku jiraan macluumaadka ku xusan Qodobka 160-AG ee Sharcigan.

51. **"Qandaraas Usoo-tartamayaasha Liiska Gaaban Soo-galay (Shortlisted Bidder)"** waxaa loola jeedaa Qandaraas Usoo-tartame oo looso xulay inuu soo galo liiska gaaban ee tartamayaasha kadib markii lasameeyay Xulasho Horudhaca ah (Pre-Qualification), kadibna Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) uu ku dhex ansixiyay Warbixinta Qiimaynta Jawaabaha Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP Evaluation Report).

52. **"Habraaca Xulasha Halka II-kaliya ah (Sole-Source Bidding Proceedings)"** waxaa loola jeedaa habraaca xulasho, taas oo Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska(Tender Documents) lasoo saaray, balse hal Qandaraas Usoo-tartamaye

oo gaar ah oo keliya lagu casuumay inuu xulasha ka qayb-qaato, iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 145 ee Sharcigan.

53. "**La-Tashiga Daneeyayaasha (Stakeholder Consultation)**" waxaa loola jeedaa la-tashiga daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ku jiraan shakhsiyaadka, kooxaha ama bulshooyinka uu saamaynaayo, ama ay u badan tahay inuu saameeyo mashruuca la soo jeediyay ama hawalaha mashruuca, iyada oo la adeegsanayo shirar, aqoon-is- weydaarsi, waraysiyo, la-tashiyo loo maray internetka ama siyaabaha kale ee suurta-galka ah, iyada oo ujeedadu tahay uruurinta macluumaad, afkaar iyo aragtiyo kaabi kara qiimaynta mashruuca iyo sidoo kale kor u qaadista wacyiga daneeyayaasha ee ku aadan mashruuca la soo jeediyay.

54. "**Qandaraas Usoo-tartamaha Guuleystey (Successful Bidder)**" waxaa loola jeedaa Qandaraas Usoo-tartamaha La-doorbiday (Preferred Bidder) kaas oo la saxiixday Qandaraaska Mashruuca ee la ansixiyay Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), kadib marka geeddi-socodka gorgortanka soo idlaado (waa haddii gorgortan la galay).

55. "**Waaxda Farsamada**" waxaa loola jeedaa Waaxda Farsamada ee loo aas-aasay si waafaqsan Qodobka 121aad ee Sharcigan.

56. "**Habraaca Geedi-socodka Tartanka Qandaraaska (Tender)**" waxaa loola jeeda habraaca tartanka qandaraaska oo ka bilaabmaya shaacinta ama daabacaadda dukumeentiyada tartanka si Qandaraas Usoo-tartamayaashu u helaan. Habraacan ayaa ka kooban soo gudbinta iyo ka jawaabista sharaxaaddaha lasoo codsaday, qiimeynta jawaabaha ku aadan Dukumeentiyada Tartanka Qandaraaska oo ay soo gudbiyeen Qandaraas Usoo-tartamayaasha, ka gorgortanka Qandaraaska Mashruuca iyo la gelitaanka Qandaraaska Mashruuca Qandaraas Usoo-tartamaha guulaystay.

57. "**Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents)**" waxaa loola jeedaa, iyadoo ay ku xirantahay xaaladda markaas la joogo, Ogeysiiska Guud Ee Fursada Maal-gashi, Dukumintiyada Xulushada Qandaraas Usoo-tartamayaasha ee Horudhaca ah, Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP) iyo/ama qabyo-qoraalka Qandaraaska Mashruuca (Project Agreement).

58. "**La-taliyeyaasha Farsamo (Transaction Advisors)**" waa khubaro ama lataliyeyaal madax-bannaan oo ay Dowladda ama hay'ad Dowladeed u gorato si ay u bixiyaan talooyin iyo adeegyo farsamo oo khaas ah, kuwaas oo ku saabsan dhinacyada sharci, maaliyadeed, iyo dhaqaale inta lagu jiro marxaladaha kala duwan ee gorsheynta, wadaxaajoodka, iyo hirgelinta Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

59. **"Soo-jeedin An-ladalban (Unsolicited Proposal)"** waxaa loola jeedaa soo jeedimaha ku aadan mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah (Public Private Partnership) oo ay soo jeediyaan Hay'adaha Gaarka Loo-leeyahay kuwaas oo ay tahay in loo maareeyo si waafaqsan Cutubka 10aad ee Sharcigan.

60. **"Warbixinta Kooban Ee Nuxurka Mashruuca ee Soojeedimaha An-ladalban (USP Concept Note)"** waxaa loola jeedaa dukumeenti ay soo diyaarisay Hay'add Gaarka Loo-leeyahay taas oo damacsan inay soo gudbiso Soo-jeedin An-ladalban, kaas oo ka kooban dhammaan macluumaadka looga baahan yahay inay kujiraan Warbixinta Kooban Ee Nuxurka Mashruuca oo ay diyaarisay Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity).

61. **"Milkiilaha Soo-jeedinta An-ladalban (USP Proponent)"** waxaa loola jeedaa Hay'add Gaar Loo-leeyahay oo u soo gudbisay Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) Soo-jeedin An-ladalban si loo qiimeeyo.

62. **"Warbixinta Soo-jeedinta An-ladalban (Unsolicited Proposal Report)"** waxaa loola jeedaa warbixinta soo-jeedin aan la-dalban oo loo diyaariyay si waafaqsan Qodobka 160-BK (2) ee Sharcigan.

63. **"U-qalmidda Lacagta Ku-baxday (Value for Money)"** macnaheedu waa in mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah uu bulshada siiyo faa'iido saafi ah (net benefit), iyada oo la tixgelinayo dhammaan kharashaadka, qiimaha, tayada, tirada, wakhtiga iyo/ama khatarta la wareejiyay inta mashruucu noolyahay.

Qodobka 112aad
Waqtiyada Aan Sharcigan La-dabaqayn

1. Sharcigan lama dabaqaayo marka ay jiraan arrimaha soo socda:
   a) Mararka Sharcigani ka hor yimaado qodobbada iyo shuruudaha heshiisyo ama xeerarka iibka ama xulashada ee deeq-bixiye ama hay'ad maalgelin oo ay Dowladda Soomaaliya heshiis kula jirto, shuruudaha iyo qodobbada heshtiskaas ayaa la qaadanayaa; balse dhammaan arrimaha kale ee khilaafku uusan ka taagnayn, xulashada mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah waxaa loo maraaya si waafaqsan Qodobbada Sharcigan.
   b) Marka ay timaado xulashada mashaariic Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah kuwaas oo soo iibinta ama soo saarista qalabka ciidamada ama amniga qaranka ay tahay ujeedada ugu wayn ee mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah. Marka la dhagangelinaayo faqradaan, waa in loo hoggansamaa shuruudahaan:

i. Waa in Wasiirka Gaashaandhigga, ama Agaasimaha Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka, uu go'aamiyo in xulashada mashaaruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah kaas oo soo iibinta ama soo saarista qalabka ciidamada ama amniga qaranka ay tahay ujeedada ugu wayn ee mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, ay habboon tahay in loo maro habraac gaar ah. Marka go'aankaani soo baxo, Wasiirka Maaliyadda ayaa habraacyada xulashada mashaariicda ee ku xusan Sharcigan ku samayn kara isbeddellada daruuriga ah si loo gaaro ujeedooyinka gaarka ah ee mashruuca.
ii. Si loo ilaaliyo ujeedada farqada (t) ee Qodobkan, soo iibinta agabka sida agabka guud, direyska ciidamada, agabka xafiisyada iyo gaadiidka caadiga ah ee ciidamada ama hay'adaha amniga looma arkaayo inay xiriir la leeyihiin difaaca ama amniga qaranka.
iii. Wasiirka, isaga oo la tashanaya Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) iyo Waaxda Farsamada, ayuu soo saari karaa xeer-nidaamiye ama habraac gaar ah ama guud ee la xiriira xulashada mashaariicda xiriirka laleh ama saamaynta kuleh difaaca ama amniga qaranka.

Qodobka 113aad
Qandaraas Usoo-tartamayaasha Mamnuuca ah

1. Qandaraas Usoo-tartamayaal kasoo jeedo waddan gaar ah ayaa laga mamnuuci karaa inay ka qayb-qaataan hawlaha lagu dabaqo Sharcigan, haddii:
   a) sharci ama xeer Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu mamnuucayo in xiriirka ganacsi lala yeesho dalkaas; ama
   b) go'aan ka soo baxay Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay oo loo qaatay si waafaqsan Cutubka VII ee Axdiga Qaramada Midoobay oo mamnuucayo in wax macaamil ah lala yeesho dalkaas gaarka ah.

Qodobka 114aad
Xeer-nidaamiyaasha, Tilmaamaha iyo Hagayaasha Dhaqan-gelinta Sharcigan

Wasiirku waxa uu soo saarayaa dhammaan xeer-nidaamiyaasha, tilmaamaha iyo hagayaasha loo baahanyahay ee muhiimka u ah dhaqan-gelinta guud ahaan Sharcigan.

Qodobka 115aad
Ilaalinta Bulshada iyo Deegaanka Inta Lagu Jiro Hirgelinta Mashaariicda

Inta lagu jiro dhaqangelinta Sharcigan, Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) waa in ay xaqiijiyaan in mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah (Public Private Partnership projects) aanay ku jirin ama aysan isticmaalin alaabo, walxo iyo hawlo kuwaa oo hay'adaha Dowladda ee masuul ka ah caafimaadka iyo deegaanka ay u asteeyeen inay yihiin kuwo waxyeello xun ku leh dadka iyo/ama deegaanka.

Qodobka 116aad
Isticmaalka Isgaarsiinta Elegtarooniga ah Xilliga Xulashada Tartamayaasha

1. Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) waxay isticmaali karaan isgaarsiinta elegtaroonig ah marka ay daabacayaan oo ay shaacinayaan tartanka, gudbinayaan dukumeentiyada tartanka ama loo soo gudbinaayo dukumeentiyada tartanka, balse waa:
    a) inuu suganyahay amniga nidaamka isgaarsiinta elegtarooniga ah ee la isticmaalayo; iyo
    b) in nidaamka isgaarsiinta elegtarooniga ah ee la isticmaalayo uusan xaddidin fursadaha Qandaraas Usoo-tartamayaasha (Bidders) ay ku heli karaan dukumintiyada tartanka.

Qodobka 117aad
Heerarka Xirfadeed ee Loo Baahan Yahay Xilliga Xulashada Qandaraasyada Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

Shaqooyinka la xiriira xulashada Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** waa inay fuliyaan shakhsiyaad loo tababaray oo aqoon u leh nidaamyada xulashada tartamayaasha, si waafaqsan hagayaasha iyo shuruudaha xirfadeed oo ay dejiso Hay'adda Iibka Qaranka ama Wasiirku ku soo saaro hagayaal.

Qodobka 118aad
Mudnaanta Qodobbada Sharcigan

Qodobbada Sharcigan ayaa lagu dhaqmayaa marka ay khuseyso arrimaha la xiriira Qandaraasyada Iskaashiga Shaqa-wadaagga (PPP), haddii aysan ka hor imaanayn shuruucda kale ee dalka dhaqan-galka ka ah.

Qodobka 119aad
Luuqadda Dukumeentiyada Tartanka Qandaraasyada Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents) ee dhammaan tartannadda iyo xulashooyinka caalamiga ah (international procurements) waa inay ku qornaadaan Luqadda Ingiriisiga.

2. Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents) ee dhammaan tartannadda iyo xulashooyinka maxaliga ah (local procurements) waa inay ku qornaadan Luqadda Soomaaliga.

3. Wasiirku waxa uu oggolaan karaa in Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents) ee tartannadda iyo xulashooyinka maxaliga ah lagu qoro Luqadda Ingiriisiga, haddii xaalada markaas jirta awgeed loo baahanyahay sidaa.

CUTUBKA 2AAD

WAAJIBAADYADA IYO MAS'UULIYADAHA HAY'ADAHA KALA DUWAN LAGU SIIYAY SHARCIGAN DHEXDIISA MARKA AY TIMAADO NIDAAMKA QANDARAASYADA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 120aad

Xuquuqaha Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda marka ay timaado Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) taas oo doonaysa inay maalgeliso, dhisto, hawgalliso, dayactirto ama gacanta ku hayso kaabayaal dhaqaale ama bixiso adeeg dadweyne, waxay la geli kartaa qandaraas Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah Hay'ad Gaarka Loo-leeyahay.

2. Marka Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay doorato in ay qabato hawlaha fagradda kore ku xusan iyadoo adeegsanysa Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, waxaa waajib ah in la dabaqo Qodobbada Sharcigan.

3. Marka Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay go'aansato in hawl lagu fuliyo qaab Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah, waa in ay la gasho Heshiis Mashruuc oo rasmi ah (Project Agreement) Shirkadda Gaarka loo leeyahay (Private Party), si loo hirgeliyo, loona dhammeystiro mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga**.

4. Haddii ay ku habboon taha, Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) waxay u astayn kartaa gayb dhulkeeda kamid ah iyo/ama hantideeda in Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ay isticmaasho si'ay u fuliso waajibaadkeeda ku aadan mashruuc Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah. Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay waxay u isticmaali kartaa dhulka iyo/ama hantida si waafaqsan shuruudaha ay u cayinto Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca

(Procuring Entity) iyo sidoo kale shuruucda iyo xeerar kale ee dhaqan-galka ah ee haga isticmaalka hantida danta guud.

Qodobka 121aad
Waajibaadyada Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda

1. Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ayaa mas'uul ka ah gudashada hawlaha soo socda:
   a) qabanqaabinta iyo maaraynta dhammaan habraaca mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, laga bilaabo marxaladda gorshaynta iyo qiimaynta ee bilowga mashruuca, fulinta habka xulashada, qiimaynta tartamayaasha, wadaxaajoodka, saxiixidda Heshiiska Mashruuca, iyo sii wadida kormeerka joogtada ah iyo maamulka heshiiska, si loo hubiyo in mashruucu gaaro yoolalka istiraatiijiga ah ee la dejiyey;
   b) dhismaha, abaabulidda iyo guddoominta Guddiga Mashruuca;
   c) diyaarinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca (Concept Note) (ama xaqiijinta in la diyaariyo), kadibna u gudbinta Waaxda Farsamada si dib u eegis loogu sameeyo, iyo samaynta isbeddel kasta oo ku aadan Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee uu dalbado Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC);
   d) diyaarinta Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca (Feasibility Study) (ama xaqiijinta in la diyaariyo), kadibna u gudbinta Waaxda Farsamada si dib u eegis loogu sameeyo, iyo samaynta isbeddel kasta oo ku aadan Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca ee uu dalbado Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC);
   e) iyada oo gudanaysa doorkeeda Guddoominta Guddiga Mashruuca (Project Committee), diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents) (ama xaqiijinta in la diyaariyo), kadibna u gudbinta Waaxda Farsamada si dib u eegis loogu sameeyo, iyo samaynta isbeddel kasta oo ku aadan Dukumentiyada Tartanka Qandaraaska ee uu dalbado Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC);
   f) diyaarinta, daabacidda iyo/ama soo saarida hadba kuwa loo baahan yahay oo ka midka ah dukumentiyada soo socda;
      i. Ogeysiiska Guud Ee Fursada Maal-gashi (General Notice of Investment Opportunity);
      ii. Codsiga Soo-gudbinta Caddeyn Muujinaysa Rabitaanka (REOI):;
      iii. iii Dukumintiyada Xulushada Qandaraas Usoo-tartamayaasha ee Horudhaca ah (Pre-Qualification Documents); iyo
      iv. Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP).

   g) qabashada iyo ilaalinta Soo-jeedimaha iyo Jawaabaha Xulasho Horudhaca ah oo ay soo gudbiyaan Qandaraas Usoo-tartamayaasha;

h) fulinta habraaca furitaanka dukimintiyada tartannada oo ay soo gudbiyeen Qandaraas Usoo-tartamayaasha (bid opening), si waafagsan Sharcigan iyo Dukumentiyada Habraaca Geedi-socodka Tartanka Qandaraaska;
i) iyada oo gudanaysa doorkeeda kamid ahaanshaha Guddiga Mashruuca, qiimaynta Jawaabaha Xulushada Horudhaca ah iyo Soojeedimaha ay soo gudbiyeen Qandaraas Usoo-tartamayaasha, iyo diyaarinta Warbixinta Qiimaynta Jawaabaha (Evaluation Report);
j) fulinta taloooyinka ay soo jeediyaan Wasaaradda, Waaxda Farsamada iyo/ama Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ee la xiriira xulashada cidda fulinaysa Qandaraaska Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
k) la shagaynta Waaxda Farsamada iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) si loo hubiyo in habraacyada xulashada (procurement) iyo tartanka qandaraaska ay yihiin kuwo waafaqsan Qodobbada Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa; iyo
l) korjoogtaynta dhaqangelinta Qandaraaska Mashruuca iyo maaraynta qandaraaska si waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Marka ay gudanayso waajibaadkeeda ku cad farqada 1aad ee Qodobkan, Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) waa in ay warbixinno joogta ah u gudbisaa Waaxda Farsamada, waana inay sidoo kale:
a) dhaqangelisaa talooyinka Waaxda Farsamada;
b) u hoggaansantaa hab-raac kasta oo ay tahay in lagu dabaqo hannaanka fulinta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; iyo
c) kusoo gudbisaa waqti ku habboon, macluumaadkasta oo ay ka dalbato Waaxda Farsamada.

3. Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ayaa lagula xisaabtamayaa oo mas'uul ka ah tallaabo kasta oo la qaado oo ka mid ah waajibaadkiisa Sharigan lagu qeexay. Sidoo kale, mas'uuliyadda iyo la xisaabtanka uu wajahaayo Sarkaalka Idman kama wareegayso sarkaalka iyada xataa haddii uu cid kale uu u igmaday waajibaadkiisa.

Qodobka 122aad
Mas'uuliyadaha Wasaaradda Maaliyadda

1. Wasaaradda ayaa leh awoodda iyo mas'uuliyadda guud ee nidaaminta iyo korjoogtaynta mashaariica iyo Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, waxayna masuul ka tahay gudashada hawlaha soo socda:
a) mas'uuliyadda guud ee dhaqangelinta Sharcigan:

b) mas'uuliyadda guud ee diyaarinta iyo soo saarista siyaasadaha hagaya Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah,
c) dhismaha iyo maamulidda Diiwaanka Qaranka ee Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
d) dhismaha, hawlgellinta iyo maalgelinta Waaxda Farsamada;
e) noqoshada Xarunta Qaran ee bixisa macluumaadka, farsamooyinka, iyo taageerooyinka daruuriga u ah Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, iyada oo u maraysa Waaxda Farsamada;
f) bixinta tababaro lagu dhisayo awooddaha farsamo ee Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) iyo fulinta hawlaha kale ee daruuriga u ah horumarinta iyo xoojinta Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
g) kor u qaadista wacyiga dadweynaha ee ku saabsan Sharcigan iyo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
h) dib-u-eegista iyo ansixinta ama diidmada dhammaan Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Markaa Taagan (Fiscal Commitments) iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustaqbalka Imaan-kara (Contingent Liabilities) ee ka dhalan kara mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, kuwaa oo Dowladda looga baahan yahay in ay bixiso;
i) la socodka iyo korjoogtaynta Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara (Contingent Liabilities), arrimaha xisaabaadka, iyo wixii la xiriira miisaaniyadda ee ka dhasha ama ku xiran Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; wadaagista iyo gudbinta macluumaadka la xiriira arrimahan inta lagu guda jiro diyaarinta miisaaniyadda Dowladda, iyo ku darista faahfaahinta arrimahan dukumentiyada miisaaniyadda, ama u gudbinta macluumaadkan hab kasta oo kale oo sharcigu ama xeerarku oggol yihiin;
j) soo saarista hagayaal la xiriira dhaqan gelinta Sharcigan, iyo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah iyo hagayaasha kale oo loogu talagalay maaraynta Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Markaa Taagan (Fiscal Commitments) iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustaqbalka Imaan-kara (Contingent Liabilities) ee ka dhashaa mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
k) guddoominta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC); iyo
l) la socodsiinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) wixii warbixin ah oo ay soo gudbiyaan Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) si waafaqsan Qodobka 160-BH(3) ee Sharcigan ee la xiriira maaraynta qandaraasyada iyo fulinta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

2. Marka laga soo tago mas'uuliyadaha ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan, Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay, **muddo saddex (3) bilood gudahood ah ka dib dhammaadka sanad-maaliyadeed kasta, u soo gudbisaa si kala gooni ah Labada Gole ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya warbixin dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah** ee Heshiiskooda Mashruuca la saxiixay inta lagu guda jiray sanad-maaliyadeedkii dhammaaday, iyo kuwa la qorsheeyay in la bilaabo sanad-maaliyadeedka cusub.

Qodobka 123aad
Dhismaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC)

Waxaa Sharcigan lagu dhisay Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC).

Qodobka 124aad
Xubnaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

1. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) wuxuu ka kooban yahay todobada (7) xubnood oo lagu qeexay faqradda 2aad ee Qodobkan.

2. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:
   a) Wasiirka Maaliyadda (Gudoomiyaha Guddiga);
   b) Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka;
   c) Wasiirka Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha;
   d) Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
   e) Garyaqaanka Guud ee Dowladda;
   f) Laba Wasiir oo kale oo ka tirsan Xukuumadda Federaalka ee uu soo xulay Ra'iisul Wasaaraha, kuwaas oo u taagan danta guud ee dhaqaalaha Dalka qaybahiisa kala duwan ee xiriirka laleh mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee markaas la xulaayo.

3. Guddoomiyaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), oo la tashanaya xubnaha kale ee Guddiga, ayaa ku casuumi kara shirarka Guddig, khubaro ama la-taliyeyaal bixin kara talooyinka Guddigu u baahan karo.Si shaki looga fogaado, khabiirada iyo/ama lataliyayaasha la casuumay malahan wax awood codbixin ah ama xuquuq kale ee la xiriirta shaqooyinka Guddiga, waxaana loo martiqaaday oo keliya inay bixiyaan talooyinka Guddigu u baahan karo.

Qodobka 125aad
Waajibaadyada Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

1. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) waxa uu qabanayaa hawlaha soo socda:
   a) inuu siiyo Wasaaradda talooyin la xiriira siyaasadaha ama hagayaasha la xiriira diyaarinta mashaariicda, habraacyada xulashada (procurement procedures), diyaarinta dukumeentiyada tartanka iyo Qandaraasyada Mashaariicda ama talooyinka kale ee uu arko inay xaqiijin karaan in Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah loo dhagangeliyo hab waafaqsan Sharcigan.
   b) inuu dib u eegis joogta ah ku sameeyo siyaasadaha iyo nidaamyada sharci ee ku aadan Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, kadibna siiyo Wasaaradda talooyinka lagama maarmaanka ah;
   c) ansixinta dhammaan Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah oo ay gasho Dawladda Faderaalka ee Soomaaliya iyo sidoo kale ansixinta habka loo maraayo xulashada cidda fulinaysa **iyo halka laga fulinayo** qandaraasyadaan. Marka uu fulinaayo hawshaan, Guddigu wuxuu:
      i. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca (Concept Note);
      ii. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca haddii loo baahdo;
      iii. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) Daraasadaha Suurtogalnimada Mashaariicda (Feasibility Studies);
      iv. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) Dukumintiyada Xulushada Qandaraas Usoo-tartamayaasha ee Horudhaca ah (Pre-Qualification Documents) iyo Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta (RFP);
      v. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) Warbixinnada Qiimaynta Jawaabaha (Evaluation Report);
      vi. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) isbeddelada lagu sameeyo Qandaraasyada Mashaariicda (Project Agreements); iyo
      vii. dib u eegis ku sameeynaya, kadibna ansixinaya (ama diidaya) Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents); iyo

   d) inuu la wadaago hay'adaha Dawladda ee ay khusayso, xogaha iyo macluumaadka uu ka helo Wasaaradda si waafaqsan Qodobka 125(1)(dh) ee Sharcigan, si loo hubiyo in si sax ah oo joogto ah loo maamulo mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 126aad
Shirarka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

1. Shirarka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) waxa ay dhici karaan marka uu codsado Guddoomiyaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), Sarkaalka Idman ee Hay'ad Dawladeed Ee Masuul Ka ah Mashruuc (Procuring Entity) ama Agaasimaha Waaxda Farsamada. Marka shirarka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ay soo codsanayso cid aan ahayn Guddoomiyaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), waa in cidda codsanaysa shirka ay codsi qoraal ah usoo gudbisaa Guddoomiyaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC). Balse haddii shirarka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) uu soo codsado Guddoomiyaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), waa inuu si rasmi ah oo goran kula socodsiiya dhammaan xubnaha Guddiga.

2. Haddii Hay'ad Dawladeed Ee Masuul Ka ah Mashruuc (Procuring Entity) ay codsato shirka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), waa in Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) uu soo siiya ogeysiis Waaxda Farsamada.

3. Xubin ka mid ah Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) uma idman karto cid kale mas'uuliyadeeda xubinimo ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC).

Qodobka 127aad
Kooramka Shirarka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ma yeelan karo shir shago iyada oo aysan joogin Wasiirka Maaliyadda, iyo ugu yaraan saddex (3) xubnood oo kale oo ka mid ah Guddiga.

Qodobka 128aad
Go'aamada Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

1. Dhammaan go'aamada ka soo baxa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad ah.

2. Haddii ay dhacdo barbardhac dhanka cod bixinta ah, Guddoomiyaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ayaa codayn doona, iyadoo codkiisu noqon doono codka go'aan ku gaarista.

Qodobka 129aad
Dhismaha Waaxda Farsamada

1. Waxaa Sharcigan lagu dhisay Waaxda Farsamada.

2. Waaxda Farsamada waxay noqonaysaa waax katirsan Wasaaradda Maaliyadda, waxayna u shaqaynaysaa sida uu go'aamiyo Wasiirka Maaliyadda.

3. Waaxda Farsamada waa inay ka koobnaata:
   a) Agaasimaha Waaxda Farsamada ee uu magacaabay Wasiirka; iyo
   b) Shaqaalaha kale ee Wasiirku u arko inay lagama maarmaan u yihiin gudashada waajibaadyada Waaxda Farsamada ee Sharcigan lagu qeexay.

4. Wasiirku waa inay go'aamiyaa qorshaha shaqaalaysiinta shaqaalaha Waaxda Farsamada. Qorshahan shaqaalaysiinta waxaa ka mid noqon kara u xil-saaridda qaybo ka mid ah shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda in ay gutaan waajibaadyada Waaxda Farsamada.

5. Waaxda Farsamadu waa inay hawlaheeda u fulisaa si hufan, dhexdhexaad ah, oo ku saleysan caddaalad, iyadoo aan saameyn lagu yeelan ama cadaadis lagu saarin si loo gaaro natiijooyin aan ku habboonayn danaha maaliyadda guud ee Soomaaliya. Sidaa darteed, Wasaaradda looma oggola inay Waaxda Farsamada u dejiso yoolal hawleed ama tirakoobyo, kuwaasoo saameyn kara madax-bannaanida go'aamada Waaxda Farsamada.

Qodobka 130aad
Waajibaadyada Waaxda Farsamada

1. Waajibaadyada Waaxda Farsamada ee la xiriira horumarinta Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah waxaa ka mid ah:
   a) iyadoo u-hogaansamaysa tilmaamaha Wasiirka, u soo-jeedinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), siyaasadaha iyo habraacyada muhiimka u ah Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, kuwaas oo lagu xoojinaayo tayada Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities);
   b) ka caawinta hay'adaha Dowladda ee masuuliyadaha kala duwan haaya fahamka isticmaalka Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   c) diyaarinta habraacyo hufan, daahfuran, oo caddaalad ku dhisan kuwaasoo lagu maamuli karo dhammaan marxaladaha kala duwan ee mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, oo ay ka mid yihiin aqoonsiga, dib-u-eegista iyo xulashada mashaariicda, go'aaminta kuwa mudnaanta leh, diyaarintooda, qiimaynta suurtagalnimadooda, fulinta xulashadooda (procurement), hirgelintooda, kormeerka

horumarkooda, iyo hubinta in habraacyadan si isku mid ah loogu dabago mashruuc kasta;

d) bixinta taageerooyinka farsamo ee lagu fulinayo mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, oo ay ku jirto si toos ah u gacan-siinta iyo daadihinta Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities);

e) noqoshada xarun bixisa macluumaadka, farsamooyinka, iyo taageerooyinka (resource center) daruuriga u ah Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah iyo xaqiijinta dhismaha habraac daahfuran oo lagu heli karo macluumaadka habboon ee la xiriira mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; iyo

f) wacyi galinta bulshada iyo daneeyayaasha kale si kor loogu qaado fahamka ku aadan Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, oo ay ku jiraan faa'iidooyinka iyo khataraha Nidaamka.

2. Waajibaadyada Waaxda Farsamada ee la xiriira mashruuc kast ee Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah iyo Habraaca Geedi-socodka Tartanka Qandaraaska (Tender) waxaa ka mid ah:

   a) siinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) iyo Hay'adda Dawladda ee Mas'uulka ka ah Mashruuca (Procuring Entities) taageero xirfadeed oo dhameystiran oo la xiriirta arrimaha farsamada, maaliyadda, sharciga, siyaasadaha farsamo, iyo faahfaahinta lagama maarmaanka ah, iyo hagida ku saabsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa, kuwaas oo muhiim u ah hirgelinta mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee markaas gacanta lagu haayo;

   b) ka talo-bixinta iyo u soo jeedinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ansixinta ama diidmada Warbixinnada Kooban ee Nuxurka Mashaariicda (Concept Notes), Daraasaddaha Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashaariicda (Pre-Feasibility Studies), Daraasadka Suurtogalnimada Mashaariicda (Feasibility Studies), Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents), Warbixinnada Kama-dambayska ah ee Khataraha ka imaan kara Mashaariicda (Final Project Risk Reports) iyo Qandaraasyada Mashaariicda (Project Agreements) kahor inta aan la saxiixin Qandaraasyadda Mashaariicda, ha ahaadan mashaariic la xayeeysiiyay, kuwa laga gorgortamay ama kuwo dib-looga gorgortamaayo;

   c) kala shaqaynta iyo ka gacan siinta Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entity) gudashada waajibaadyadooda la xiriira wajiyada kala duwan ee tartanka qandaraaska. Waaxda Farsamadu marka ay bixinayso taageeradan, waa in ay u fulisaa taageeradeedda si guud oo daahfuran, iyadoo aan ku darin wax talo, hagitaan, ama tilmaamo farsamo oo gaar ah oo la xiriira mashruuc cayiman, kuwaas oo saamayn kara madaxbannaanida iyo dhexdhexaadnimada giimeynta dukumentiyada mashruuca;

d) siinta Guddiga Mashruuca taageerooyin xirfadeed oo dhammaystiran, kuwaas oo la xiriira arrimaha farsamada, maaliyadda, habraacyada xulashada, iyo dhinacyada sharciga, iyadoo dhammaan taageeradaas loo marinaayo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity); iyo

e) xaqiijinta in mashruuc kasta ee Iskaashi **Shaqa-wadaagga** ah loo soo doortay (identified), loo soo xulay (procured), looga heshiiyay, walibana loo fuliyo si waafaqsan qodobbada Sharcigan.

3. Wasiirku waa in uu soo saaraa tilmaamo.cad oo faahfaahsan, kuwaas oo sharaxaya sida Waaxda Farsamadu taageero wax ku ool ah ugu fidin karto Hay'adaha Dawladda ee Masuulka ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) iyo Guddiyada Mashaariicda, iyadoo si cad loo hubinayo in Waaxda Farsamadu ay sii ahaato mid madax-bannaan, aan eex lahayn, oo si hufan dib-ugu-eegta dhammaan dukumentiyada mashaariicda.

Qodobka 131aad
Waajibaadyada Dheeraadka ah ee Waaxda Farsamada

1. Waajibaadyada soo socda oo Hay'adda libka Qaranka (Public Procurement Authority) lagu siiyay Qodobka 37aad ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016, waxa fulinaya Waaxda Farsamada marka ay timaado Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah:

a) faafinta macluumaadka la xiriira Sharcigan ee ku aadan Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;

b) korjoogtaynta iyo hubinta in loo hoggaansamo Sharcigan marka ay timaado fulinta Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;

c) diyaarinta, dhiirri-gelinta, taageeridda, iyo fulinta barnaamijyada kor loogu soo qaadaayo aqoonta iyo xirfadaha la xiriira Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;

d) diyaarinta iyo soo-jeedinta meel-marinta siyaasaddaha iyo halbeegyada muhiimka u ah Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;

e) diyaarinta iyo soo saarida, dukumentiyada guud (standard documents), nidaamyada (tools) iyo dukumentiyada muunada ah (templates), si!ay gacan uga gaysato dhaqangelinta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;

f) dib-u-eegista iyo qiimeeynta waxqabadka mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, kadibna soojeedinta isbedellada loo baahanyahay:

g) diyaarinta warbixin-sannadeed Wasiirku u gudbinaayo Baarlamaanka Federaalka, taas oo ku saabsan guud ahaan waxqabadka mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee socda;

h) mar kasta oo ay lagama-maarmaan u aragto, in ay qabto kulamo ku aadan Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, taas oo la iskugu keenaayo hay'adaha Dowladda, hay'adaha gaarka loo leeyahay, qaybo kamid ah dadweynaha iyo saaxiibada caalamiga ah ee ka taageera Soomaaliya dhanka horumarka;
i) daabacista ogeeysiis sanadle ah (annual bulletin) oo ku saabsan Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, kaas oo ka kooban balse aan ku ekeyn, ogeysiisyada xulashooyinka (procurement notices), liiska shirkadaha laga mamnuucay qandaraasyada Dowladda, ogeysiisyada usoo tartamid qandaraasyada, macluumaadka ku aadan qandaraasyadda la bixiyay iyo liiska cabashooyinka iyo rafcaannada la helay iyo natiijooyinka kasoo baxay; iyo
j) ka-talo siinta Dowladda dhammaan ariimaha la xiriira Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 132aad
Dhismaha Guddiga Mashruuca

1. Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) waa in ay ugu dambayn soddon (30) maalmood ka dib marka la soo saaro Ansixinta Ugu-dambeysa ee Mashruuc (Final Project Approval) dhistaa Guddi Mashruuc, kaasoo ah Guddi ka kooban khubaro kala duwan oo loogu talagalay inuu siiyo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) taageerooyinka farsamo ee lagama maarmaanka u ah diyaarinta mashruuca iyo xulashada cidda fulinaysa mashruuca.

2. Guddiga Mashruucu waxa uu noqonayaa Guddi aan joogto ahayn (ad hoc), oo loo dhisay oo keliya mashruuca markaas hawshiisa lagu guda jiro.

3. Waajibaadka Guddiga Mashruuca waxa kamid noqanaaya:
   a) korjoogtaynta geedi-socodka qiimaynta suurtogalnimada mashruuca (appraisal) iyo habka diyaarinta Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca (Feasibility Study). Guddigu waxa uu gudanayaa waajibaadkaan haddii Guddiga Mashruuca la-dhiso ka hor inta aan la soo saarin Ansixinta Ugu-dambeysa ee Mashruuc (Final Project Approval);
   b) u diyaarinta mashruuca wajiga xulashada (procurement), taas oo ay kamid tahay diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents) iyo Qandaraasyada Mashaariicda (Project Agreements);
   c) fulinta wejiga xayeeysiinta qandaraaska (tender phase) mashruuca;
   d) giimaynta soo-jecdimaya ay soo gudbiyeen Qandaraas Usoo-tartamayaasha; iyo
   e) kala gorgortanka shuruudaha Qandaraaska Mashruuca Qandaraas Usoo-tartamaha guulaystay.

4. Guddiga Mashruuca ee loo dhisay si waafaqsan Qodobkaan 23aad waa inuu ka koobnaada:
   a) wakiilo ka socda Waaxda Farsamada ee Wasaaradda Maaliyadda;
   b) wakiilo ka socda Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity);
   c) hal wakiil (oo ah garyaqaan) oo ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda; iyo
   d) wakiilo loo magacaabay si waafaqsan farqada 5aad ee Qodobkan.

5. Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) iyo/ama Waaxda Farsamada ee Wasaaradda Maaliyadda, ayaa xilli kasta, waxay codsan kara wakiilo ka socda Wasaaraddaha ama hay'adaha kale ee Dowladda inay kusoo biiraan Guddiga Mashruuca, si ay u bixiyaan khibrad iyo aqoon farsamo oo dheeraad ah taasoo faa'iido u leh hawlaha mashruuc.

6. Waaxda Farsamada ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay hubisaa in la tixgeliyo ujeedooyinka mashruuca, marka lasoo xulaayo shakhsiyaadka ka mid noqonaaya Guddiga Mashruuca. Si ay u fuliso waajibaadkaan, Waaxda Farsamada waxay samayn kartaa giimayn dhammaystiran si ay u xaqiijiso in xubnaha Guddiga kamid noqon kara ay leeyihiin xirfadda iyo aqoonta ka jawaabi karta baahiyaha mashruuca.

7. Waajibaadyada iyo mas'uuliyadaha sida gaarka ah u saaran Waaxda Farsamada inta ay gudanayso xubinnimadeeda Guddiga Mashruuca waxaa kamid ah:
   a) korjoogtaynta diyaarinta mashruuca, iyo xulashada cidda fulinaysa mashruuca (procurement) iyo sidoo kale horumarinta tayada Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), iyadoo siinaysa khibradaha farsamo oo ay u baahantahay;
   b) hagidda iyo ka talo siinta Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) arrimaha ay ka midyihiin qaabaynta mashruuca (project structuring), diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents), xulashada cidda fulinaysa mashruuca (procurement) iyo giimaynta dukumintiyada ay soo gudbiyaan Qandaraas Usoo-tartamayaasha; iyo
   c) ka taageerista Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ka gorgortanka qandaraaska mashruuca iyo dhammeystirka qandaraaska mashruuca (deal closure).

8. Waajibaadka Xafiiska Garyaqaanka Guud inta uu gudanayo xubinnimadiisa Guddiga Mashruuca waxay ku koobantahay isku-dubaridka iyo bixinta talooyinka sharci ee la xiriira diyaarinta Qandaraaska Mashruuca.

9. Dhammaan go'aamada Guddiga Mashruuca waxaa loo tixgelinayaa inay yihiin go'aamada Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), waxaana waajib ah in loo diiwangeliyo si qoraal ah.

Qodobka 133aad

Waajibaadyada Waaxda libka Marka ay Timaado Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Waajibaadyada Waaxaha libka (Procurement Units) ee lagu qeexay Qodobka 61aad ee Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016, ee Hay'adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) marka ay timaado mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, waxay ku koobanyihiin:
   a) gorsheynta guud ee xulashada (procurement) cidda fulinaysa mashruuca:
   b) kaydinta xogta xulashada (procurement records) si waafaqsan Qodobka 31aad ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016; iyo
   c) siinta Guddiga Mashruuca adeegyada xoghaynta.

2. Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) waa inuu hubiyaa in Waaxda libka (Procurement Unit) ay joogaan shaqaale khibrad uleh Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, si ay u gudato waajibaakeeda ku xusan Qodobkan.

Qodobka 134aad

Waajibaadyada Guddiga libka Marka ay Timaado Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

Si looga fogaado wax shaki ah, Guddiga libka (Procurement Committee) ee lagu qeexay Qodobka 58aad ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016, ma yeelan doono wax shaqo ah oo la xiriira Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 135aad

Waajibaadyada Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista Qandaraasyada Marka ay Timaado Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista Qandaraasyada ce lagu dhisay Qodobka 49aad ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016, wuxu masuul ka yahay marka ay timaado Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, dib-u-eegista madaxa-banaan ee maamul ee dhammaan cabashooyinka iyo rafcaannada ay sameeyaan tartamayaasha ee ka dhanka ah go'aannada la xiriira tartanka qandaraaska iyo qandaraas bixinta, iyadoo

Guddiga Madaxa Bannaan uu gaarayo go'aankiisa kadib marka uu dhameeyo dib-u-eegistiisa.

2. Wasiirka ayaa soo saaraya hagayaal nidaamiya habka Guddigu u gudanayo hawlahooda dib-u-eegista madaxa bannaan ee la xiriira Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee ku xusan farqada koowaad ee Qodobkan.

Qodobka 136aad
Shaqaalaysiinta La-taliyayaasha Farsamo

1. Si loogu fududeeyo in Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay gudato waajibaadkeeda la xiriira mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) waxay shaqaalaysiin kartaa La-taliyayaal Farsamo oo aqoonna u leh Nidaamka Qandaraasyada **Shaqa-wadaagga** ah, si ay uga taageeraan Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) iyo Guddiga Mashruuca gudaashada waajibaadkooda la xiriira diyaarinta, xulashada (procurement), dhaqangelinta iyo maareynta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ama habraacyada loo maraayo mashaarlicdaas.

2. Qof kasta oo loo shaqaaleysiinaayo si waafaqsan ujeedooyinka farqada laad ee Qodobkan:
   a) waa inuu bixiyaa talo xirfadeed, dhinacna aan u janjeerin (objective), dhexdhexaad ah, taas oo an ku salaynayn tixgelin la xiriirta shaqaaleysiin mustaqbalka ah, iyadoo waliba marka uu bixinaayo taladaan ay waajib kutahay inuu ka fogaado danaha is-diidan ee ka imaan kara shaqooyinkiisa kale ama danaheeda kale ee shirkadeed, haddii ay tahay shirkad;
   b) waa in aan:
      i. loo dhiibin wax hawl ah oo ka hor imanaya waajibaadkiisi hore ama waajibaadka hadda saaran; iyo/ama
      ii. la shaqaaleysiin haddii uu la leeyahay xiriir ganacsi ama mid qoys, xubin kamid ah shaqaalaha Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), kaas oo si toos ah ama si dadban ugu lug leh mashruuca loo shaqaaleeysiinayo la-taliyaasha.

3. La-taliyeyaasha Farsamo waxaa loo oggol yahay inay si shagsi ah ama si foggaan arag ah uga qayb galaan kulamada Guddiga Mashruuca, islamarkaana ay taageero u fidiyaan Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) marka loo baahdo, inta lagu jiro dhammaan marxaladaha diyaarinta iyo hirgelinta mashruucyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

CUTUBKA 3AAD
MABAADI'DA GUUD IYO QAAB-DHISMEEDKA MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 137aad
Qandaraaska Mashruuca

1. Qandaraaska Mashruuca (Project Agreement) waxaa diyaarinaya Guddiga Mashruuca, waxaana ansixinaaya Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC). Qandaraaska Mashruuca (Project Agreement) waxaa lala ansixinaya Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska (Tender Documents), si waafaqsan Cutubka 6aad (Diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah) ee Sharcigan.

2. Qandaraaska Mashruuca (Project Agreement) waa inay ku jiraan ugu yaraan dhammaan shuruudaha iyo qoddobbada guud ee lagu sheegay Lifaaqa 4aad ee Sharcigan.

3. Guddiga Mashruuca waa inuu xaqiijiyaa in qabyo qoraalka Qandaraaska Mashruuca ay ku jiraan qodobbada gaarka ah ce la xiriira mashruuca hawshiisa markaas lagu Jjiro.

4. Qandaraaska Mashruuca waxaa ku jiri kara shuruudaha kale ee Waaxda Farsamada, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ama hay'adaha kale ee Dowladda ee awoodda uleh ay u afkaan lagama maarmaan sida shuruudaha ku aadan xasilloonida dhaqaale ee muddada dheer, badqabka, amniga iyo ilaalinta deegaanka, kuwaa oo lagu dabaqi karo mashruuca.

Qodobka 138aad
Muddada Qandaraaska Mashruuca

1. Hay’adaha Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashaariicda (Procuring Entities) ma geli karaan Qandaraas Mashruuc oo loogu talagalay mashruuc Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah, kaas oo muddadiisu ka badan tahay afartan (40) sano.

2. Marka la go'aaminayo muddada uu soconayo mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, Guddiga Mashruuca waa in uu tixgaliyaa arrimaha soo socda:
   a) qodobbada Sharcigan iyo sharuucda kale ee dhaqan-galka ah;
   b) mudada caadiga ah ee hoos u dhaca qiimaha (depreciation period) ee la filayo in tas-hiilaadka, kaabayaasha, iyo dhismayaasha la qorsheeyay in la dhiso, la balaariyo, la casriyeeyo, ama dib loo dayactiro si waafaqsan heshiiska, ay si tartiib tartiib ah u luminayaan giimahooda;

c) baahida Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) u qabto kaabayaasha dhaqaale ama adeegga ay helayso;
d) suurtagalnimada maaliyadeed iyo dhaqaale ee mashruuca iyo cimriga ay jiri karaan kaabayaasha dhaqaale; iyo
e) muddada ay u baahan yihiin dhinacyada gaarka ah oo qaybta ka ah mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, si ay u soo ceshadaan maalgashiga ka galay mashruuca.

3. Wasiirku waxa uu soo saari karaa tilmaamo hagaya habraaca go'aan ka gaarista muddada uu jiraayo qandaraaska mashruuc Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah.

4. Haddi Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) uu ansixiyo, muddada heshiiska mashruuca waa la kordhin karaa iyadoo is-beddel lagu sameeynaayo heshiiskii mashruuca ee asalka ah, balse waxaa shardi ah in la raaco faqradaha Qodobka 160-BI (wax ka beddelka heshiiska mashruuca), walibana la hubiyo in la hoggaansamo mabaadiida kala ah: U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability).

Qodobka 139aad
Xallinta Khilaafaadka Ka-dhashaa Heshiiska Mashruuca

1. Heshiiska mashruuca ayaa nidaaminaaya habka loo xalinaayo khilaafaadka, kaas oo noqon doona habraaca garqaadka (arbitration).

2. Haddii ay dhacdo in mashruuca, iyadoo loo eegaayo baaxaddiisa iyo aqoonta uu baahanyahay, uu dhaqan-geliyo qandaraasle caalami ah, habraaca, hay'adaha iyo mabaadiida loo maraayo xallinta khilaafaadka waxa ay noqonaayaan kuwa garqaad oo caalami ah (international arbitration), waxaana waajib ah in lagu qoro sidaa Qandaraaska Mashruuca.

Qodobka 140aad
Taageerada Dowladda ee Ku Aadan Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Si loo taageero mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, Dowladdu waxa ay siin kartaa mashruuc Iskaashiga **Shaqa-wadaag** ah, tallaabooyinka taageero ee ku habboon, balse waxaa waajib ah in loo hoggaansamo Qodobbada Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-galka ah iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Iyadoo loo hoggaansamaayo hagayaal Wasiirku soo saaro, nuucyada taageerada Dawladdu siin karto mashaariicda waxaa kamid noqon kara:

a) taageero iyo balanqaadyo maaliyadeed (financial undertakings);
b) warqad muujinaysa taageerada Dowladda ee mashruuca (letter of support);
c) warqad dammaanad-qaad maaliyadeed oo ay soo saarto hay'add maaliyadeed (letter of credit);
d) dammaanad-qaadyo (guarantees);
e) dammaanad-qaadyo daboolaya qayb kamid ah khataraha ka imaan kara mashruuc (partial risk guarantees);
f) caymis ka dhan ah khataraha siyaasadeed (political risk insurance); iyo
g) taageero kasta oo kale ee uu Wasiirku go'aamiyo, iyadoo loo hoggaansamaayo qodobbada ku shaqadaleh ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-qalka ah.

3. Haddii Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay doonayso inay siiso taageerooyin Dowladeed mashruuc Iskaashiga **Shaqa-wadaag** ah, waxaa waajib ah in Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay marka hore soo hesho oggolaanshaha Wasiirka oo qoraal ah, kahor inta aysan bixin taageerada Dowladeed. Sidaa darteed, tallaabo kasta oo taageero ah oo aanu Wasiirku qoraal ku oggolaan waa waxba kama jiraan.

Qodobka 141aad
Rahminta Hantida iyo Danaha La xiriira Mashruuca

1. lyadoo loo hoggaansamaayo xaddidaad kasta oo kujirta Qandaraaska Mashruuca, Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ee fulinaysa mashruuca waxay xaq uleedahay inay rahmi karto, marka ay u baahato, qayb kamid ah hantideeda, xuquuqdeeda ama danaheeda, oo ay kujiraan kuwa la xiriira mashruuca, si'ay u hesho maalgashiga iyo lacagta uu mashruucu u baahanyahay, oo ay kujiraan kuwa soo socda:
a) inay rahanto ama ay damaanad ahaan u isticmaasho hantida mashruuca ee guurtada ama ma guurtada ah;
b) inay rahanto ama ay damaanad ahaan u isticmaasho dayn iyo lacago ay cid kale iyada ama ay Shirkadda Gaarka ah Ee Mashruuca Fulinaysa (Project Company) ku leedahay ama dakhli kasta oo kale oo kaga soo xarooda mashruuuca;
c) inay rahanto ama ay damaanad ahaan u isticmaasho saamigeeda Shirkadda Gaarka ah Ee Mashruuca Fulinaysa (Project Company); ama
d) inay bixiso dammaanad kasta oo sharciga Soomaaliya ogol yahay.

2. Hantida danta guud, ama hantida kale, lacagaha iyo xuquuqaha daruuriga u ah bixinta adeegyada dadwaynaha looma rahmin karo, loomana isticmaali karo dammaanadaha

(security) ahaan si waafaqsan faqradda 1aad ee Qodobkaan, haddii rahmasashada iyo damaanad u isticmaalka nuucaan ah lagu mamnuucayo shuruucda Soomaaliya.

3. Si loo ilaaliyo danaha maaliyadeed ee Dawladda, ka hor inta aan lasamayn rahminta lagu sheegay faqradda 1aad ee Qodobkaan, Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay waa inay oggolaansho qoraal ah kasoo heshaa Wasiirka.

Qodobka 142aad
Tanaasulaadka iyo Dhiirigelinta Dowladdu Bixin-karto

1. Qandaraas Usoo-tartamaha Guuleystey ama Shirkadda Gaarka ah Ee Mashruuca Fulinaysa waxay xaq u yeelanaysaa wixii dhiirigelin, faa'iidooyin iyo tanaasulaad (exemptions) kuwaa oo shuruucda Soomaaliya ay bixiyaan ama lagu dabaqi karo mashruuca.

2. Dhiirigelin, faa'iidooyin iyo tanaasulaad (exemptions) kasta oo dheeraad ah oo loo baahdaa si loo taageero mashruuc waa in marka hore lagu faahfaahiyaa Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca (Feasibility Study), walibana uu ansixiyaa Wasiirka Maaliyadda, iyadoo sidoo kale loo hoggaansamaayo ansixin kasta ee uu waajibinaayo sharci Soomaaliyeed.

Qodobka 143aad
Mashriicda la Xiriira Qaybaha Kala Duwan ee Dhaqaalaha Dalka ee Hoos-yimaada Korjoogtaynta Hay'addo Kala Duwan

1. Haddii ay dhacdo in mashruuca markaas gacanta lagu haayo uu la xiriiro qaybo kala duwan ee dhaqaalaha Dalka, sidaa darteedna ay dhici karto in ka badan hal (1) hay'ad Dowladeed ay noqon karto Hay’adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity), waxaa waajib ah in Waaxda Farsamada ee Wasaaradda Maaliyadda, kadib marka ay hesho Warbixinta Kooban Ee Nuxurka Mashruuca (Concept Note), ku wargeliso hay’adda Dawladda (Procuring Entity) ce mashruuca soo jeedisay inay ogaysiiso hay'adda kale ee Dowladda ee mashruuca xiriirka dhaw laleh in mashruuc ay soo jeedisay.Haddii hay’adda Dawladda (Procuring Entity) ee mashruuca soo jeedisay ay ku guuldareysato inay ogeysiiso hay'adda kale ee Dowladda ee mashruuca xiriirka dhaw laleh si waafaqsan qaybta hore ee faqradaan, Waaxda Farsamada ayaa qaadan doonta mas'uuliyadda ogeysiinta.

2. Haddii ay dhacdo in Hay'adda kale ee Dawladdu aysan dood ka keenin xulashada mashruuca, ama haddii Hay'adda kale ee Dawladdu aanay ku bixin jawaab qoraal ah

soddon (30) maalmood gudahood kadib marka la wargeliyay, waxaa la socodsiinaya hawlaha xulashada qandaraaska mashruuca.

3. Haddii ay dhacdo in hay'adda kale ee Dawladdu ay muran ka keento in Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ee wada hawlaha xulashada mashruuca ay xaq uleedahay inay maamusho hawlaha xulashada iyo fulinta mashruuca kaligeed, Waaxda Farsamada ayaa warbixin ku aadan muranka iyo xogta la xiriirta u gudbinaysa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC), si ay go'aanka kama dambaysta ah uga gaaran hay'adda Dawladda ee noqonaysa Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka-noqonaysa Mashruuca (Procuring Entity) markaas gacanta lagu haayo.

4. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) ayaa shir ka yeelanaya muranka taagan, waxaanay ku casumayaan shirka labada Hay'adood ee Dawliga ah si ay mid walba u sharaxdo sababta ay uga masuulka tahay maamulka mashruuca. Shirka kadib, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) waxa uu soo saraaya tilmaamo lagu xallinaayo khilaafka, oo ay ku jiri karaan talo-bixinno ku aadan suurtagalnimada in labada hay'addood ay si wadajir ah u hagaan hawlaha mashruuca si waafaqsan shuruucda Dalka ee dhaqan-qalka ah ama talo-bixin ku aadan in dib-u-qaabayn lagu sameeyo mashruuca (project restructuring) si looga hortago inuu noqdo mid keeni kara in muran laba hay'ad Dowladeed.

CUTUBKA 4AAD
HABRAACYADA LA OGGOLYAHAY EE XULASHADA QANDARAASYADA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 144aad
Habraacyada Xulashada Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Dhammaan mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee hoos yimaada Sharcigan waxaa soo xulaysa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca iyada oo u mareysa mid kamid ah habraacyada xulashada ee soo socda:
   a) Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada;
   b) Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada;
   c) Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah; ama
   d) Nidaamka Gorgortanka Tooska ah.

2. Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada ayaa ah habraaca joogtada ah ee Xulashada. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay dooneyso inay isticmaasho habraac kale, waa inay caddaysaa iyadoo ku xuseysa Daraasadda

Suurtogalnimada, sababta habraaca xulashada ee gaarka ah ee aan ahayn midka joogtada uu ugu habboon yahay islamarkaana u buuxinayo shuruudaha habraaca xulashada ee lagu faahfaahiyay Sharcigan iyo xeer-nidaamiyaashiisa.

Qodobka 145aad

Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah iyo Nidaamka Gorgortanka Tooska ah

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay isticmaali kartaa oo keliya Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah ama Nidaamka Gorgortanka Tooska ah hadii ay jiraan hal ama wax ka badan oo kamid ah shuruudahan:
   a) in Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ay si gaar ah u leedahay xuquuqaha hanti-maskaxeedka (intellectual property rights) ee nidaamyada muhiimka ah ama tiknoolajiyada ee mashruucu u baahanyahay;
   b) in mashruucu u baahan yahay khibrad iyo aqoon gaar ah oo ay leedahay oo keliya Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay; ama
   c) in Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ay leedahay xuquuqda gaarka ah (exclusive rights) ee hawlaha ama adeegyada loo baahanyahay, walibana aan la heli karin cid kale oo macquul ah oo lagu baddalan karo ama la tartami karta.

2. Si loo isticmaalo Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah ama Nidaamka Gorgortanka Tooska ah, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay ku muujisaa Daraasadda Suurta-galnimada, inay jiraan hal ama wax ka badan oo kamid ah shuruudaha ku xusan Qodobkan, waana in ay oggolaansho cad ka heshaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed kahor inta aysan isticmaali habkaan xulashada.

Qodobka 146aad

Habraacyada Xulashada ee Tartanka Xaddidan iyo Tartanka Furan

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay isticmaali kartaa oo keliya Habraaca Xulashada ee Tartanka Xaddidan haddii ay jiraan hal ama wax ka badan oo kamid ah shuruudaha soo socda:
   a) in keliya dhowr Shirkadood oo Gaar Loo Leeyahay ay si gaar ah u leeyihiin xuquuqda hanti-maskaxeedka ee nidaamyada muhiimka ah ama tiknoolajiyada loogu baahan yahay mashruuca;
   b) in Mashruucu u baahan yahay khibrad iyo aqoon gaar ah, islamarkaana ay jirto caddeyn muujineysa inay jiraan dhowr Shirkadood keliya oo la yaqaanno kuwaas oo bixiya shaqooyinka ama adeegyada loo baahan yahay;
   c) in dhowr Shirkadood oo Gaar Loo Leeyahay keliya ay leeyihiin xuquuqda gaarka ah ee hawlaha ama adeegyada loo baahanyahay, walibana aan la heli karin cid kale oo macquul ah oo lagu baddali karo ama la tartami karta; ama

d) haddii ay timaaddo xaalad gaar ah oo degdeg ah, waxaase shardi ah in duruufaha sababay xaaladda degdegga ah ay ahaayeen kuwo aysan saadaalin karin Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ama kuwo kadhashay dayacaad ama dib-udhac kayimid dhanka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

2. Si loo isticmaalo Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay ku muujisaa Daraasadda Suurta-galnimada inay jiraan hal ama wax ka badan oo kamid ah shuruudaha ku xusan Qodobkan, waana in ay oggolaansho cad ka heshaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed kahor isticmaalka habkaan xulashada.

Qodobka 147aad
Wada-hadalka Furan ee Tartamayaasha Lala-yeesho

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, inta lagu guda jiro habraaca tartanka qandaraaska waxa ay wadahadal furan la yeelan kartaa tartamayaasha qandaraaska ee ku soo baxa Liiska Gaaban, haddii sidaas loogu oggolaado Daraasadda Suurtagalnimada ayna heleyso taageerada farsamo iyo hagidda Waaxda Farsamada. Ujeedka Wada-hadalka Furan waa in lagu qeexo faafaahinta ku saabsan dhinacyada farsamada ama maaliyadda ce mashruuca.

2. Marka la go'aaminaayo in loo baahan yahay Wada-hadalka Furan ee Tartamayaasha iyo in kale, waa in la qiimeeya jiritaanka shuruudahaan soo socda:
   a) in Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay si cad oo cayiman u diyaarin karto faafaahinnada farsamo, sharci ama maaliyadeed ee mashruuca iyo in kale;
   b) baahiyaha Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca lama dabooli karo iyada oo aan la isticmaalin xalalka markaas jira ama kuwa soo jireenka ah; ama
   c) qandaraaska lama bixin karo iyada oo aan wada-hadal lala yeelan tartamayaasha sababo la xiriira dabeecadda gaarka ah ee mashruuca ee dhanka sharci iyo maaliyadeed, ama khataraha ku gadaaman mashruuca oo ay wajahi karaan tartamayaasha.

3. Marxaladda koowaad ee Wada-Hadalka Furan ee Tartamayaasha:
   a) Codsiga Soo-jeedinta dhexdiisa ayaa looga dalbanayaa U-tartamayaasha Qandaraas inay soo gudbiyaan soo-jeedin farsamo oo aan waajib ahayn, sidoo kalana waxaa laga dalban karaa inay soo gudbiyaan soo jeedin maaliyadeed oo aan waajib aheyn.
   b) Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay wada hadal la yeelaneysaa (si mid mid ah) dhammaan Tartamayaasha Qandaraaska ee soo-jeedinnadooda buuxiyay shuruudaha iyadoo loogu gol leeyahay in la fahmo soo-jeedinada farsamo iyo/ama maaliyadeed, iyo inay tartamayaasha faallo ka bixiyaan

farsamooyinka la cayimay, qoondeynta khataraha, ama qodobbada heshiiska ee Heshiiska Mashruuca la soo jeediyay.

c) Dhammaan wada-hadallada lagu yeesho marxaladdan waa in loo diiwangeliyaa hab qoraal ah, waana in lagu daraa diiwaannada xulashada.

d) Dhammaan dhinacyada qaybta ka ah doodaha iyo wada-hadallada la yeesho inta lagu guda jiro Wada-hadalka Furan waa in aysan cidna la wadaagin doodaha iyo wada-hadallada la yeesho inta lagu guda jiray Wada-hadalka Furan.

4. Marxaladda labaad ee Wadahadalka Furan ee Tartamayaasha:
   a) marka ay soo dhammaato marxaladda koowaad ee Wada-hadalka Furan ee Tartamayaasha, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay:
      i. badaleli kartaa shuruudaha qiimaynta, tilmaamaha cayiman ce mashruuca, qoondeynta khataraha ama waxa ay waxkabaddal ku sameeneyn kartaa qandaraaska, si ay u ballaariso tartanka;
      ii. dib u furi kartaa Xulshada Hordhaca ah ee mashruuca; iyo
      iii. ka dalban kartaa tartamayaasha qandaraaska inay soo gudbiyaan soo jeedinno farsamo iyo maaliyadeed oo waajib ah.

5. Marka ay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doonayso inay dib u eegis iyo wax-kabeddel ku samayso Dukumentiyada Tartanka Qandaraaska si waafaqsan farqada 4(b)(i) ee Qodobkan, Hay'addu waa inay xaqiijisaa in dukumintiyadan loo gudbiyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si loo ansixiyo kahor inta aan dib loogu soo saarin Tartamayaasha.

6. Marka ay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doonayso inay dib u furto Xulashada Hordhaca ah sida ku cad faqradda 4(b)(ii) ee Qodobkan, tartame kasta waa in dib loo qiimeeyaa si loo ogaado in la aqbali karo, uuna yahay mid u qalmo ka-qaybgalka mashruuca iyadoo la raacayo Shuruudaha Xulashada Hordhaca ah.

7. Tartamaha Qandaraas ee aan doonayn in uu soo gudbiyo codsigiisa kama dambaysta ah wuxuu si qoraal ah uga bixi karaa habraaca tartanka qandaraaska.

8. Soo-jeedinnada kama dambaysta ah waxaa lagu qiimeynayaa si waafaqsan shuruudaha iyo habraacyada kujira Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee dib-u-eegista iyo wax-kabeddelka lagu sameeyay.

9. Haddii ay noqoto in la isticmaalyo habkaraaca Wada-hadalka Furan ee Tartamayaasha, tartamayaasha kasoo jawaaba marxaladda kowaad oo keliya ayaa lagu casuumayaa inay ka qayb-qaataan marxaladda labaad.

10. Looga baahna in la dabaqo shuruud soo gudbinta Dammaanadda Tartanka marka lajoogo marxaladda koowaad, balse marxaladda labaad marka lajoogo ayaa loo baahnaan karaa in la soo gudbiyo Dammaanadda Soo-jeedinta.

11. Wasiirku waxa uu soo saari karaa hagayaal lagu hirgelinaayo habraacyada Wada-hadalka Furan ee Tartamayaasha.

CUTUBKA 5AAD
QUMAYNTA SUURTOGALNIMADA MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH IYO BILAABISTA HAWLAHA LA XIRIIRA MASHAARIICDAAS

Qodobka 148aad
Soo-Jeedinta Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Soo jeedinta Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah waxaa soo gudbin kara Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ama Hay'ad Gaar Loo Leeyahay, iyadoo lasoo diyaarinayo lana soo gudbinayo Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca si waafagsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Haddii Soo-jeedinta Mashruuca ay ka timid Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxaa la dabaqayaa Qodobbada 148 illaa 160-C, si loo qiimeeyo loona billaabo mashruuca.

3. Haddii Soo-jeedinta Mashruuca ay ka timid Hay'ad Gaar Loo Leeyahay iyadoo ah Soo-jeedin Aan La-dalban, waxaa la dabaqayaa Cutubka 10aad, si loo qiimeeyo loona billaabo mashruuca.

4. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ma ambaqaadi karto tartanka qandaraaska illaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ansixiyo:
   a) Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca si waafaqsan Qodobka 153;
   b) Daraasadda Suurtagalnimada si waafaqsan Qodobka 159; iyo
   c) Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska si waafaqsan Qodobka 160-1.

Qodobka 149aad
Soo Gudbinta iyo Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ee dooneysa inay fuliso mashruuc Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah waxaa waajib ku ah inay u gudbisaa Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca Waaxda Farsamada si ay dib u eegis ugu sameeyso.

2. Waaxda Farsamada marka ay dib u eegista ku sameenayso Warbixinta Kooban ce Nuxurka Mashruuca, waa inay tixgelisaa arrimaha soo socda:
   a) in Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ay soo buuxisay dhammaan shuruudaha aasaasiga ah ee ku xusan Qodobka 155aad, iyo sidoo kale wixii shuruudo dheeraad ah ee Wasiirku ku soo saaro Xeer-nidaamiye waafaqsan Sharcigan;
   b) in mashruuca la soo-jeediyay uu yahay mid lagama maarmaan ah, leh mudnaan muuqata, isla markaana si cad oo macquul ah loo soo bandhigay, iyadoo si faahfaahsan loo muujinayo cidda ka faa'iideysan doonta, ujeeddooyinka mashruuca, wax-soo-saarka laga filayo, iyo natiijooyinka iyo saamaynta laga rajeynayo;
   c) in mashruucu yahay mid hoos imaanayo qeexidda Iskaashi **Shaqa-wadaag** ee lagu sheegay Sharcigan;
   d) in mashruuca lagu sheegay Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca:
      i. wu yahay mid ku habboon in loo fuliyo iyadoo la isticmaalaayo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
      ii. uu yahay mid soo jiidan kara ka-qaybgalka maalgashadayaal ama shirkaddo gaarka loo leeyahay:
      iii. uu xaqiijin karo mabaad'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability), isla markaana uu yahay mid dhaqaale ahaan xasillloon muddada dheer; iyo
   e) in Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca ay leedahay xirfada, shaqaalaha, awood dhaqaale, iyo karti maamul oo ku filan, si ay si hufan oo qorsheysan u diyaarsato, u maamusho, una fuliso mashruuca.

3. Waaxda Farsamada waxa ay ku talineysaa in la diido oo aan la ansixin Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee aan soo buuxin shuruudaha ku xusan Qodobkan. Intaa waaa dheer, iyadoo aan ka dalban oggolaansho rasmi ah Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, Waaxda Farsamadu waxa ay dib ugu celin kartaa Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca, Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca, haddii warbixintaasi aanay buuxin shuruudaha lagama-maarmaanka u ah qiimeynta dhammaystiran ee loo baahanyahay.

Qodobka 150aad
Talo Soo Jeedinta Waaxda Farsamada ee Ku Aadan Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca

1. Kadib dib u eegista Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca, Waaxda Farsamada waa inay ogaysiis qoraal ah u dirtaa Wasiirka iyadoo ka codsaneysa in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu dib u eegistii ugu dambeysay ku sameeyo Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

2. Ogeysiiska Waaxda Farsamada waa in ay ku jiraan:
   a) nuqul kamid ah Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca; iyo
   b) warbixin kooban oo geexaysa talo-soo-jeedinta Waaxda Farsamada ee ku aaddan in la ansixiyo ama la diido Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca, kaas oo tilmaamaaya asbaabta lagu saleeyay talooyinkaas.

3. Wasiirku waa inuu dhammaan ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada si waafaqsan Qodobkan, u gudbiyaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, si ay dib u eegis ugu sameeyaan Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca. Wasiirku ma qiimayn karo, go'aanna kuma gaari karo ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada ee la xiriira Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca kahor inta uusan u gudbin Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib ugu eegaan, ugana dhiibtaan go'aankooda.

Qodobka 151aad
Dib-u-eegista Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca

1. Marka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu dib u eegista ku sameynaayo Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca waxa uu tixgelinayaa arrimaha soo socda:
   a) talooyinka Waaxda Farsamada;
   b) inay jirto baahi loo qabo mashruuca iyo in kale;
   c) saamaynta mashruuca ku yeelan karo aagga dhaqaale ee uu ka hawlgalaayo (sector) ama gobolka laga fulinaayo ama guud ahaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, haddii mashruucu yahay heer qaran;
   d) habraaca kala hormarinta mashaariicda la soo gudbiyay iyadoo la eegayo dhaqaalaha ama taageerada Dawladda ce kooban ee loo heli fulinta mashaariicda noocan ah; iyo
   e) suurtogalnimada farsamo iyo maaliyadeed ee mashruuca.

Qodobka 152aad
Diidmada Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca

1. Haddii Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu diido Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee mashruuc gaar ah, Guddiga waa inuu si qoraal ahaan ku ogeysiiyaa go'aankiisa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, isagoo nuqul kamid ah ogeysiiska siinaya Waaxda Farsamada iyo Wasiirka, isagoo tilaamaya asbaabta uu ku diiday.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxay dib u soo gudbin kartaa Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee mashruuc gaarka ah, waxaase shardi ah

in Hay'addu ay waxkabaddal ku sameyso Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca, kaasoo xallinaaya asbaabtii lagu diiday markii hore.

3. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca ay doonayso inay dib u soo gudbiso Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee wax laga baddelay, waa inay usoo gudbisaa si waafaqsan Qodobka 149, waana in soo gudbintan loola tacaamulaa sida soo gudbin cusub ee Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

Qodobka 153[aad]
Soo Saarista Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca

1. Marka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ansixiyo Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee mashruuc gaar ah, Wasiirku ayaa u xilsaaran inuu si aan daahis lahayn usoo saaro ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

2. Waxa Mamnuue ah in la bilaabo wax haw! ah oo la xiriirta Mashruuc Iskaashi **Shaqa-wadaag** ah, oo ay ku jiraan Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca ama Daraasadda Buuxda ee Suurtagalnimada Mashruuca, ilaa iyo inta si rasmi ah loogu soo saarayo Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee mashruuca la qorsheynayo.

3. Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca waxa loola jeedaa qoraal oggolaansho ah oo uu soo saaro Wasiirka, kaas oo fasaxaya bilaabista hawlaha lagama maarmaanka u ah sii-wadista qiimaynta mashruuca, iyadoo shuruudu tahay in maalgelinta loo baahan yahay ee muhiimka u ah qiimayntaas ay diyaar tahay.

4. Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca kama dhigna ansixinta kama dambaysta ah ee lagu daahfurayo Tartanka Qandaraaska ama diyaarinta hirgelinta mashruuca. Sidaa darteed, marka la helo Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca, waxaa la bilaabayaa dhaqan-gelinta tallaabooyinka xiga ce ku xusan Qodobka 156aad ee Sharcigan.

5. Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waxa ay billaabi kartaa oo keliya Tartanka Qandaraaska mashruuca marka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu soo saaro Ansixinta Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca iyo Ansixinta Dukumentiyada Tartanka Qandaraaska, si waafaqsan Qodobbada 160-A iyo 160-I ee Sharcigan.

Qodobka 154aad
Liiska Qaran ee Mashaariicda Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Wasiirku waa inuu abuuraa, islamarkaana maamulaa liiska sida guud looga heli karo mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah oo ay ku jiraan dhammaan mashaariicda laga soo saaray Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

2. Liiska Qaran ee Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah waa in ay ku jiraan ugu yaraan, macluumaadka soo socda ee mashruuc kasta:
   a) magaca Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah mashruuca;
   b) goobta mashruuca laga fulinayo ee la soo jeediyay;
   c) sharaxaad kooban oo ku saabsan mashruuca;
   d) qiimaha raasamaalka ama maalgashiga ee la filayo inay ku baxdo mashruuca; iyo
   e) jadwalka ama wagtiga la filayo in mashruuca lagu dhameystiro.

3. Wasiirka ayaa soo saarayaa hagayaasha ku habboon habsami u socodka iyo ka sal-gaarista ujeedooyinka Liiska Qaran ee Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 155aad
Nuxurka ay Ka Kooban Tahay Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca

1. Warbixinta -Kooban ee Nuxurka Mashruuca waa in ay ku jiraan ugu yaraan macluumaadkan:
   a) sharaxaad ku saabsan Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca iyo sababta mashruuca la soo jeediyay u hoos imaanayo;
   b) sharaxaad ku aadan mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee la soo jeediyay, oo ay ku jiraan:
      i. dhinaca dhaqaalaha Dalka ee uu ku saabsan yahay iyo nooca mashruuca;
      ii. in mashruuca lasoo jeediyay uu ka koobanyahay arrimaha kala ah naqshadaynta, dhisidda, lawareegista, hawlgelinta, hagaajinta ama dib usoo wareejinta;
      iii. goobta lasoo jeediyay in mashruuca laga fuliyo;
      iv. liiska hantida Dawladda ee mashruucu u baahan karo; iyo
      v. muddada la soo jeediyay inuu socdo Heshiiska Mashruuca;

   c) qiimaynta hordhaca ah ee baahida dadweyne ee mashruuca loo qabo, oo ay ku jiraan sharaxaad ku aadan faa'iidooyinka bulsho ee mashruuca iyo sida uu ula jaanqaadaayo Qorshaha Horumarinta Qaranka;
   d) qiimaynta horudhaca ah ee suurtogalnimada dhaqaale ee mashruuca, oo ay kujiraan in mashruuca la awoodi karo, iyo falanqaynta ku saabsan dhaqaalaha iyo juhdiga galaaya mashruuca iyo faa'iidooyinka kasoo baxaaya;

e) sharaxaad farsamo oo horudhaca ah oo mashruuca ku saabsan, oo ay ku jiraan kuwo muujinaaya shuruudaha la xiriira in mashruuca looga baahan yahay in lagu xiro kaabayaal dhaqaale ama adeegyo kale oo horay ujiray,
f) dulmar horudhac ah oo ku saabsan suurtogalnimada sharci ee mashruuca, iyo saameyntiisa bulshada, isbeddelka cimilada iyo deegaanka iyo istaraatiijiyada qiimeyntooda oo faahfaahsan;
g) qiimayn horudhac ah oo ku saabsan sababta uu mashruucu u xaqiijin karo mabda'a U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo sababta loogu doortay in loo fuliyo iyadoo la isticmaalaayo nidaamka Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
h) qiimaynta hordhaca ah ee khataraha mashruuca; iyo
i) macluumaad iyo xog kasta ee kale ee Wasiirku ku jideeyo Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 156aad
Diyaarinta Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca iyo Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waa inay diyaarisaa ama dalbataa in la diyaariyo Daraasada Suurtogalnimada Mashruuca (taas oo ay ku jirto Qorshaha Xulashada Mashruuca), si loo giimeeyo in mashruuca la soo jeediyay uu yahay mid farsamo ahaan, sharci ahaan, bulsho ahaan, deegaan ahaan, dhaqaale ahaan iyo ganacsi ahaanba socon kara, oo suurtagal ah, isla markaana uu yahay mid dhaqaale ahaan xasillloon muddada dheer.

2. Daraasadda Hordhaca ah ce Suurtagalnimada Mashruuca waxaa lagu samayn karaa mashruuc haddii Hay'adda Dawladda ee Mas'uulka ka ah Mashruuca ay go'aansato in ay muhiim tahay in la sameeyo, ka hor inta aan la bilaabin Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca. Sidoo kale, daraasaddan hordhaca ah waa la samayn karaa haddii Hay'adda Dawladda ee Mas'uulka ka ah Mashruuca ay go'aansato, si loo qiimeeyo xulashooyin kala duwan ee la xiriira mashruuca, sida kuwa la xiriira arrimaha farsamada, dhaqaalaha, sharciga, bulshada, iyo deegaanka.

3. Marka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay hesho Ansixinta Wasiirka ee Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca si waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa, waxa ay diyaarinaysa Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca ama Daraasada Suurtagalnimada Mashruuca (ama waxa ay ka dalbaneysaa Hay'adda Gaarka Loo Leeyahay inay soo diyaariso Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca ama Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca haddii

mashruucu yahay mid ka dhashay Soo-jeedin Aan La-dalban), waxa ayna u gudbineysaa Waaxda Farsamada si ay dib ugu eegis ugu sameeyso.

Qodobka 157aad

Shuruudaha ay Adeegsanayso Waaxda Farsamada Marka ay Wado Dib-u-eegista Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca ama Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca

1. Marka Waaxda Farsamada ay dib u eegista ku sameynayso Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca ama Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca, waxa ay tixgelinaysaa arrimaha soo socda:
   a) in mashruuca lagu sheegay Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca ama Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca:
      i. uu ku habboon yahay in loo fuliyo iyadoo la isticmaalayo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; iyo
      ii. wu xaqiijinayo mabaad'da kala ah: U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability), iyada oo aan la gelayn khatar maaliyadeed oo aan la aqbali karin;

   b) in mashruuca laga hadlayo uu hoos imaanayo qeexidda Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee lagu sheegay Sharcigan,
   c) in shuruudaha Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah, Nidaamka Gorgortanka Tooska ah, ama Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada la soo buuxiyey, marka lasoo jeediyay in mashruuca lagu soo xulaayo habraacyadaan; iyo
   d) in Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca ay si cad u qeexeyso ama u tilmaamayso dhammaan shuruudaha looga baahan yahay si waafaqsan Qodobka 160-B.

2. Waaxda Farsamada waxa ay ku talineysaa in la diido Daraasadaha Suurtagalnimada Mashaariicda marka:
   a) aysan si cad u qeexeyn ama u tilmaameyn dhammaan shuruudaha looga baahan yahay inay ku jiraan Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca ee ku taxan Qodobka 160-B (illaa si maangal ah loo sababeeyo in shuruudo cayiman oo laga tagay aan lagu dabaqi karin mashruuca markaas laga hadlayo);
   b) aysan u hoggaansameyn Sharcigan iyo shuruucda kale ee dhaqan-galka ah ce arrimahaan ee xiriirka laleh;
   c) ay tilmaamayaan in mashruucu aanu farsamo ahaan, dhaqaale ahaan ama sharci ahaan socon karin, oo uusan suurtagal ahayn;
   d) ay tilmaamayaan in mashruucu uusan u badaneyn inuu soo jiito maalgashadayaasha gaarka ah ama uusan heli karin maalgelin gaar loo leeyahay;

e) ay tilmaamayaan in mashruucu uusan ku habboonayn deegaanka, oo ay ku jiraan walaacyada la xiriira isbeddelka cimilada;
f) ay tilmaamayaan in mashruucu aanu ku haboonayn in la fuliyo ityadoo la isticmaalayo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
g) ay tilmaamayaan in mashruucu aanu u badnayn inuu xaqiijiyo mabaadi'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability); iyo/ama
h) ay ku jirto habraac xulasho oo aan buuxineyn shuruudaha lagu xusay Cutubka 4aad (Hababka La Oggolyahay ee Xulashada Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah).

3. Marka la qiimaynaayo, oo dib loo eegayo Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca, Waaxda Farsamada waxa ay tixgelinaysaa:
a) in baahiyaha farsamo ee mashruuca si fiican loo fahmay, walibana masawir buuxa laga baxshay;
b) in shuruudaha sharci ee dhinacyada mashruuca laga rabo inay u hoggaansamaan si fiican loo fahmay, walibana masawir buuxa laga baxshay;
c) saamaynta bulsho, dhaqaale iyo deegaan (oo ay ku jirto cimilada) ee mashruuca;
d) in mashruucu yahay mid U-qalma Lacagta Lagu Bixinayo, marka lala barbar dhigo nidaamyada kale ee fulinta mashaariicda ee aan isticmaalin Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, si waafaqsan hagayaasha uu soo saaraay Wasiirka;
e) in mashruucu yahay mid ay Awoodi Karto Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca iyo/ama bulshada isticmaali doonta adeegyada mashruuca. Haddii mashruucu yahay mid khidmadda adeegyada si toos ah looga qaadi doono bulshada, waxaa waajib ah in la sameeyo qiimayn faahfaahsan oo ku aadan awoodda iyo diyaar ahaanshaha bulshadu inay bixiyaan khidmadaha adeegyada mashruuca, iyadoo la raacayo hagayaasha uu soo saaray Wasiirka,
f) maalgelin ama taageero kasta oo looga baahan yahay Dawladda, oo ay ku jiraan Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Markaa Taagan (Fiscal Commitments) iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustaqbalka Imaan-kara (Contingent Liabilities);
g) khataraha suurtagalka ah ee ay Dawladdu qaadanayso;
h) in kharashaadka la soo jeediyay iyo jadwalka mashruuca ay yihiin kuwo macquul ah oo laga guul gaari karo:
i) awoodda hay'addeed ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay uleedahay diyaarinta, xulista, dhaqan-gelinta, iyo kormeeridda maashruuca iyo sidoo kale u hoggaansamidda waajibaadkeeda ku xusan Qandaraaska Mashruuca iyo dukuminti kasta oo kale ee la xiriira; iyo

j) haddii mashruucu yahay mid kadhashay Soo-jeedin Aan La-dalban, in mashruuca si toos ah loogala xaajoon karo Hay'adda Gaarka Loo leeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban, ama in loo baahan yahay in mashruuca la marsiiyo habraaca tartanka furan ee qandaraasyada.

4. Marka ay qiimaynayso Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca, Waaxda Farsamada waxay la tashan kartaa daneeyayaasha ku haboon, iyadoo sidoo kale tixgelinaysa arrimaha kale ee muhiimka u ah mashruuca, si ay u soo saarto talo-bixin hufan, kana madax-bannaan eex.

5. Waaxda Farsamadu, iyadoo aan ka dalban oggolaansho rasmi ah Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxa ay dib ugu celin kartaa Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca, Daraasaddaha Suurtagalnimada Mashaariicda, haddii daraasaddahaasi aanay buuxin shuruudaha lagama-maarmaanka u ah qiimeynta dhammaystiran ee loo baahanyahay.

Qodobka 158aad

Talo-soo-jeedinta Waaxda Farsamada ee ku aadan Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca

1. Kadib dib-u-eegista Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca, Waaxda Farsamada waxa ay ogaysiis qoraal ah u direysaa Wasiirka, iyadoo ka codsaneysa in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu kulmo si'uu dib-u-eegistii ugu dambeysay ugu sameeyo Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca.

2. Ogeysiiska Waaxda Farsamada waa in ay ku jiraan:
   a) nuqul kamid ah Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca; iyo
   b) warbixin kooban oo qeexaysa talo-soo-jeedinta Waaxda Farsamada ee ku aaddan in la ansixiyo ama la diido Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca, taasoo sidoo kale tilmaameysa asbaabta lagu saleeyay taladaas.

3. Wasiirku waa inuu shir isugu yeeraa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib u eegis ugu sameeyaan Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca. Wasiirku ma qiimayn karo, go'aanna kuma gaari karo ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada ee la xiriira Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca kahor inta uusan u gudbin Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, si ay dib ugu eegaan ugana dhiibtaan go'aankooda.

Qodobka 159aad
Shirka Ansixinta Mashruuca ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

1. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu isugu imaanayaa shir uu kaga hadlayo Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee la soo jeediyay muddo hal (1) bil gudaheed laga bilaabo taariikhda la helo ogaysiiska Waaxda Farsamada si waafaqsan Qodobka 158.

2. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu shirka ku casuumayaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca si ay u soo bandhigto mashruuca iyo natiijada Daraasada Suurta-galnimada Mashruuca, si gaar ah, Hay'adda waxaa looga baahan yahay inay muujiso in mashruuca lasoo-jeediyay:
   a) farsamo ahaan, maaliyad ahaan iyo sharci ahaanba uu socon karo;
   b) ku habboon yahay in la fuliyo iyadoo la isticmaalaayo Nidaamka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; iyo
   c) uu xaqiijinayo mabaadida kala ah: U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability).

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu sidoo kale shirka ku casuumayaa Waaxda Farsamada si ay u soo bandhigto talo soo jeedinteeda ku aaddan mashruuca, waana inay si cad u faahfaahisaa nuxurka warbixineeda kooban iyo sababeynta talooyinka ay usoo gudbisay Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

4. Wasiirku isaga oo gudanaaya xilkiisa Wasiirnimo, oo aan gudanayn doorka xubinnimadiisa ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxa uu si gaar ah masuul uga yahay dib u eegista iyo ansixinta Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustagbalka Imaan-kara ee ku saabsan mashruuca. Si looga fogaado shaki, Wasiirku waxa uu xaq u leeyahay kuwo lamıd ah xuquuqaadka iyo waajibaadyada xubnaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed marka ay timaado arrimaha kale ee hoos yimaada waajibaadka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

5. Marka dib u eegista lagu sameynayo Daraasada Suurtagalnimada Mashruuca, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inuu tixgeliyo arrimaha soo socda:
   a) in mashruucu soo buuxinayo shuruudaha aasaasiga ah ku xusan Qodobka 157aad ee Sharcigan;
   b) talooyinka Waaxda Farsamada;
   c) haddii Qorshaha Xulashada Mashruuca uusan cayimin isticmaalka Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada, in habraacyada kale ee xulashada ee la isticmaalaayo loo sababeeyay si waafaqsan Qodobka 145 ama Qodobka 146 ee Sharcigan;

d) sida mashruucu ula jaanqaadaayo qorshaha horumarinta qaranka, iyo sida uu ula mudnaan egyahay, ama uga mudnaan-sareeyo ama uga muhiim san yahay, marka lala barbar dhigo, barnaamijyada iyo mashaariicda kale ee Dowladda;
e) Sharciga iyo Xeer-nidaamiyaasha Maamulka Maaliyadda Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
f) Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee ku aadan mashruuca, marka Wasiirku usoo jeediyo; iyo
g) ujeeddooyinka siyaasadaha kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee xiriirka laleh mashruuca.

6. Wasiirka, isaga oo gayb ka ah Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxaa loogu baahan yahay inuu si cad dib u eegis ugu sameeyo, isagoo isticmaalaya hagayaasha ku habboon ee uu ujeedkaas usoo saaro, islamarkaana uu ansixiyo:
   a) tallaabooyinka taageerada Dawladda ah ee la soo jeediyay in lagu taageero mashruuca;
   b) Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee ku aadan mashruuca; iyo
   c) in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca.

7. Shirka kadib, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu haystaa ugu badnaan hal (1) bil si ay u ansixiyo ama u diido Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca. Inta lagu jiro muddadaas, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu la tashan karaa daneenayayaasha kale ee Dawladda kuwaas oo ay kamid yihiin, balse aan ku ekayn hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ee ku habboon, si uu macluumaad ku filan uga helo go'aankiisa guud ee ansixinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca iyo mashruuca markaas miiska saaran.

8. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa in aysan ansixin Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca illaa uu Wasiirku si cad oo qoraal ah u ansixiyo tallaabooyinka taageerada Dawladda ee la soo jeediyay ee lagu taageeraayo mashruuca, Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee ku saabsan mashruuca iyo sidoo kale in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca.

Qodobka 160aad
Diidmada Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Daraasada Suurtagalnimada Mashruuca

1. Haddii Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu diido Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca ama Wasiirku uusan si cad u ansixin arrimaha ku xusan faqradda (8) ee

Qodobka 159, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed wuxuu si qoraal ah ogeysiiska diidmada ugu gudbinayaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca, isagoo nuqul kamid ahna siinaaya Waaxda Farsamada iyo Wasiirka.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxay dib u soo gudbin kartaa Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca, haddii mashruuca su'aasha ka taagantahay si weyn dib u habayn loogu sameeyay, si wax looga qabto tabashooyinka Gudiga Isku-dhafka Wasaaradeed ama haddii duruufaha mashruuca ay is beddeleen, iyadoo go'aan ka gaarista in mashruuca si weyn dib u habayn loogu sameeyay iyo in duruufaha mashruuca is beddeleen iyo in kale ay leedahay Waaxda Farsamada.

3. Kadib marka Waaxda Farsamada go'aamiso in mashruuca dib-u-habayn wayn lagu sameeyay ama in duruufaha mashruucu ay is beddeleen, ayaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxay dib u soo gudbin kartaa Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca si waafaqsan habraaca gudbinta ee lagu xusan Sharcigan, iyada oo soo raacsiinaysa Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca ee sidoo kale dib-u-eegista iyo waxkabaddelka lagu sameeyay.

Qodobka 160-A
Soo Saarista Ansixinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca

1. Marka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu amsixiyo Daraasadda Suurtagalnimada, waxa uu ansixintiisa ku wargelinayaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ee soo jeedisay mashruuca, waxa uuna nuqul kamid ah ansixinta siinayaa Waaxda Farsamada iyo Wasiirka. Ansixinta noocan ah waa in lagu gudbiyaa si qoraal ah, waana in si cad loogu sheegaa habraaca xulashada ee la ansixiyay ee loo maraayo xulashada cidda fulinaysa mashruuca.

2. Ansixinta Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca waxa ay ka dhigan tahay oggolaansho qoran oo lagu oggolaanayo in mashruuca la dardar geliyo, waxa ayna xaq u siineysaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca inay billowdo diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ma bilaabi karto diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah illaa ay ka hesho Ansixinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca ee uu soo saaro Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si waafaqsan Qodobkaan.

4. Gudiga Isku-dhafka Wasaaradeed oo keliya ayaa leh mas'uuliyadda iyo awoodda 5oo saarista Ansixinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca. Ansixinta Daraasada

Suurtogalnimada Mashruuca waxaa la samayn karaa oo keliya haddii Wasiirku horay u soo saaray Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

Qodobka 160-B
Nuxurka Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca

1. Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca waa inay ka koobnaataa:
   a) faahfaahin ku saabsan sifooyinka muhiimka ah ee mashruuca la soo jeediyay;
   b) sharaxaad ku saabsan faa'iidooyinka istiraatijiyadeed iyo wax-qabad ee mashruuca la soo jeediyay, marka la eego ujeedooyinkiisa;
   c) sharaxaad cayiman oo ku saabsan:
      i. marka laga hadlayo wax-qabadka mashruuca, nooca wax-qabadkaas iyo heerka ay wax-qabadkaas ay qabaneyso Hay'adda Gaarka Loo Leeyahay;
      ii. halbeegyada naqshadeynta iyo qaabaynta mashruuca ee la soo jeediyay iyo sharaxaad faahfaahsan ee ku aadan natiijooyinka cayiman ee mashruuca laga filaayo;
      iii. marka laga hadlayo isticmaalka hantida Dawladda ee mashruuca, hantidaas Dowladda ee mashruucu isticmaalaayo iyo nuucyada isticmaalka iyo ilaa xadka hantidaas la isticmaalaayo;
      iv. marka ay dhacdo in Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay siinayso mashruuca balanqaadyo maaliyadeed, in la muujiyo in Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay awoodi karto inay kasoo baxdo balanqaadyadaas maaliyadeed oo ay mashruuca siinayso; iyo
      v. marka ay dhacdo in Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay dusha saaranayso Waajibaadyo Maaliyadeed oo Mustaqbalka Imaan-ka ama bixinta tallaabooyinka kale ee taageera Dawladdeed ah kuwaas oo kamid ah soojeedinta mashruuca, in la qeexo dabeecadda waajibaadkaas mustaqbalka imaan kara ama tallaabooyinka taageerada Dawladdeed iyo wax kasta oo saameyn ku yeelan kara mabaadiida kala ah: U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La Awoodi Karo (Affordability) mashruuca.

   d) soo-jeedinnada ku aadan kala qoondeynta khataraha dhaqaale, farsamo iyo hawleed ee u dhinacyada;
   e) muujinta sida mabda'a U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) mashruuca loo gaaraayo;
   f) qiyaasta kharashaadka ku baxaaya mashruuca,
   g) nidaamka Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ee la soo jeediyay;
   h) hirgelinta mashruuca iyo qorshaha hawlgelinta;

i) talo-bixin ku saabsan sida mashruucu farsamo ahaan iyo dhaqaale ahaan u yahay mid suurtagal ah;
j) warbixinta qiimeynta ku aadan saameynta deegaanka iyo bulshada;
k) faahfaahinta natiijadii ka soo baxday La-tashiyada Daneeyayaasha ama Indha-indhaynta Suuga ee la sameeyay marka lagu guda jiray diyaarinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca;
l) habka muwaadiniinta Soomaaliyeed uga dheefayaan uguna qayb-qaadanayaan mashaariicda;
m) Qorshaha Xulashada Mashruuca, oo ay ku jiraan faahfaahinta soo socota:
   i. qoondeynta mas'uuliyadaha iyo wagqtiyada kama dambaysta ah ee dhammaan hawlaha daruuriga ah ee kahoreeya inta aan la bilaabin mashruuca, oo ay ku jiraan shaqaaleysiinta la taliyayaasha (haddii loo baahdo) si ay uga tala bixiyaan geeddi socodka Tartanka Qandaraaska;
   ii. hababka lagu xaqiijinaayo wada-shageynta lala yeelanaayo hay'adaha kale ee Dawladda marka loo baahdo;
   iii. faahfaahinta la-tashiyada daneeyayaasha iyo/ama indha-indhaynta suuqa ee la sameynayo;
   iv. habraaca xulashada ee la isticmaali doono, haddii ay ahaan laheyd tartan furan, tartan xaddidan, tartanka ku saleysan halka il-keliya, ama in la isticmaalo soo-jeedinta aan la dalban, waana in la tilmaamaa sababta habkaas xulashada ee gaarka ah uu ugu habboon yahay iyo sida uu u buuxinayo shuruudaha Sharcigan;
   v. taariikhaha la soo jeediyay Caddeynta Muujinta Rabitaanka (haddii la dabaqaayo), Ogeysiinta Guud ee Fursadaha Maalgashiga, Codsiga Xulashada (haddii la dabaqaayo) Codsiga Soo-jeedinta, iyo qiimeeynta, gorgortanka iyo dhammaan hababka kale oo ay ka dhalanaayso bixinta Heshiiska Mashruuca; iyo

n) macluumaad kasta oo kale oo lagu taageerayo Daraasadda Suurtogalnimada Mashruuca, ama Wasiirku ku dejiyo Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

2. Wasiirku wuxuu Xeerar-nidaamiye ku soo saarayaa nuxurka Daraasadda Hordhaca ah ee Suurtagalnimada Mashruuca, iyo shuruudaha dheeraadka ah ee lagu qiimeynayo, haddii nuxurkaas ama shuruudahaas aan si cad loogu cayimin Sharcigan.

Qodobka 160-C
Indha-indhaynta Suugqa iyo La-tashiga Daneeyayaasha

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waxa ay samayn kartaa La-tashiyada Daneeyayaasha Dadweynaha ama hababka indha-indhaynta suuga waqti kasta, inta lagu

guda jiro geedi-socodka xulashada cidda fulmaysa mashuruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

2. Qorshaha Xulashada Mashruucu waa inuu ku jiraa jadwalka la-tashiyada daneeyayaasha ama indha-indhaynta suuga, haddii loo baahanyahay in la sameeyo hawlahaas.

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxa uu soo saari kara Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca oo ku xiran shuruud dalbanaysa in la sameeyo la-tashiyada daneeyayaasha ee mashruuc gaarka ah ee uu warbixintiisa ansixiyay.

4. Wasiirku waxa uu soo saari karaa hagayaal tilmaamaya habraaca loo maraayo indha-indhaynta suuqa iyo latashiyada daneeyayaasha, si loo hirgeliyo Qodobkan.

CUTUBKA 6AAD
DIYAARINTA DUKUMINTIYADA TARTANKA QANDARAASYADA MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 160-D
Diyaarinta iyo U-gudbinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska iyo Heshiiska Mashruuca Waaxda Farsamada

1. Kahor inta aan la billaabin Tartanka Qandaraaska, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah mashruuca, oo kaashanaysa Guddiga Mashruuca waa inay diyaariyaan Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, kadibna waana inay u gudbiyaan Waaxda Farsamada si ay dib u eegis ugu sameeyso.

2. Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska waxaa loola jeedaa:
   a) marka Habraaca Xulashada Hordhaca ah la isticmaalayo:
      i. Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah;
      ii. Codsiga Soo-jeedinta; iyo
      iii. qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca.

   b) marka Codsiga Soo-jeedinta oo keliya la isticmaalayo:
      i. Codsiga Soo-jeedinta oo keliya; iyo
      ii. qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca.

   c) marka Mashruuca lagu bixinayo Nidaamka Gorgortanka Tooska ah, qabyo-qoraalka Heshtiska Mashruuca oo keliya.

3. Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska waa in la soo raaciyaa Lifaaqa Ballanqaadyada Maaliyadeed, oo ay ku jiraan:

a) warbixin kooban oo ku saabsan khataraha waawayn ee mashruuca iyo dhammaan khataraha maaliyadeed ee ku xusan Heshiiska Mashruuca ee dusha loo saaray Dawladda;
b) warbixin kooban oo ku saabsan Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustagbalka Imaan-kara ee saaran Dawladda sida ku cad Heshiiska Mashruuca.

Qodobka 160-E
Dib-u-eegista Waaxda Farsamada ee Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska

1. Waaxda Farsamada waxa ay soo jeedin kartaa in la diido Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaaska:
   a) haddii ay jebinayso qodobbada Sharcigan ama/iyo Xeer-nidaamiyaashiisa;
   b) haddii aysan si cad u tilmaameyn, usoo buuxinayn ama u qeexeyn dhammaan shuruudaha looga baahan yahay inay ku jiraan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee lagu sheegay Cutubka 7aad (Habraaca Tartanka Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah) iyo Cutubka 8aad (Shuruudaha Guud ee Xulashada Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah); iyo sidoo kale Lifaaqa Ballanqaadyada Maaliyadeed ee ku xusan Qodobka 160-D(3) iyo qabyo qoraalka Heshiiska Mashruuca ee ku xusan Cutubka 3aad (Mabaadi'da Guud iyo Qaab-dhismeedka Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah); ama
   c) haddii aysan la jaan qaadeyn Daraasada Suurtagalnimada Mashruuca ee la ansixiyay.

Qodobka 160-F
Talo Soo Jeedinta Waaxda Farsamada ee Ku Aadan Dukumeentiyada Tartanka Qandaraaska

1. Kadib dib u eegista Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, Waaxda Farsamada waxa ay ogaysiis qoraal ah u direysaa Wasiirka iyadoo ka codsaneysa inuu shir isugu yeero Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, si'ay dib u eegista kama dambaysta ah ugu sameeyaan Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

2. Ogeysiiska Waaxda Farsamada waa in ay ku jiraan:
   a) nugul kamid ah Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska;
   b) Lifaaqa Ballanqaadyada Maaliyadeed; iyo
   c) warbixin kooban oo tilmaameysa talo-soo-jeedinta Waaxda Farsamada ee ku aaddan in la ansixiyo ama la diido Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, taaso xusaysa asbaabta lagu saleeyay taladaas.

3. Wasiirku waa inuu shir isugu yeeraa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib u eegis ugu sameeyaan Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska. Wasiirku ma qiimayn karo, go'aanna kuma gaari karo ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada ee la xiriira Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska kahor inta uusan u gudbin Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, si ay dib ugu eegaan go'aanna ugu gaaraan.

Qodobka 160-G

Shirka Ansixinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

1. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu isugu imaanayaa shir dib loogu eegayo laguna ansixinayo Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska muddo hal (1) bil gudaheed laga bilaabo taariikhda la helo ogaysiiska Waaxda Farsamada si waafaqsan Qodobka 160-F ee Sharcigan.

2. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu shirka ku casuumayaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca si ay u soo bandhigto Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska. Hay'adda waxaa looga baahan yahay inay muujiso in Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska:
   a) ay la jaan qaadayaan Daraasada Suurtagalnimada Mashruuca ee la ansixiyay; iyo
   b) ay buuxinayaan shuruudaha looga baahan yahay inay ku jiraan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee ku xusan Cutubka 7aad (Habraaca Tartanka Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah) iyo Cutubka 8aad (Shuruudaha Guud ee Xulashada Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah), iyo sidoo kale qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca ee ku xusan Qodobka 137 (Qandaraaska Mashruuca) iyo Lifaaqa 4aad.

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu sidoo kale shirka ku casuumayaa Waaxda Farsamada si ay u soo bandhigaan talo soo jeedintooda ku aaddan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, waana inay si cad u faahfaahiyaan nuxurka warbixintooda kooban iyo sababeynta talooyinka ay bixiyeen.

4. Marka ay dib-u-eegista ku sameynayaan Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inuu tixgeliyo arrimaha soo socda:
   a) talooyinka Waaxda Farsamada; iyo
   b) in Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ay ku jiraan dhammaan macluumaadka looga baahan yahay si waafaqsan Sharcigan, ayna sidoo kale waafaqsan tahay shuruudaha Cutubka 7aad (Habraaca Tartanka Qandaraasyada

Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah) iyo Cutubka 8aad (Shuruudaha Guud ce Xulashada Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah).

5. Wasiirka, isaga oo gudanaaya waajibaadkiisa kamid ahaanshaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxaa loogu baahan yahay inuu si cad dib-u-eegis ugu sameeyo lifaaqa Ballanqaadka Maaliyadeed, isagoo isticmaalaya hagayaasha ku habboon ee uu ujeedkaas usoo saaro, islamarkaana uu ansixiyo:
   a) tallaabooyinka taageerada Dawladda ee la soo jeediyay in lagu taageero mashruuca;
   b) Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee ku aadan mashruuca; iyo
   c) in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca.

6. Wasiirka isaga oo gudanaaya xilkiisa Wasiirnimo, oo aan gudanayn doorka xubinnimadiisa ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxa uu si gaar ah masuul uga yahay dib-u-eegista iyo ansixinta Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustagbalka Imaan-kara ee ku saabsan mashruuca. Si looga fogaado shaki, Wasiirku waxa uu xaq u leeyahay kuwo lamid ah xuquuqaadka iyo waajibaadyada xubnaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed marka ay timaado arrimaha kale ee hoos yimaada waajibaadka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

7. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa in aysan ansixin Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska illaa uu Wasiirka si cad u ansixiyo tallaabooyinka taageerada Dawladda ee la soo jeediyay in lagu taageero mashruuca, Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee ku aadan mashruuca iyo in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca.

8. Shirka kadib, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu haystaa ugu badnaan hal (1) bil si uu u ansixiyo ama u diido Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska. Inta lagu jiro muddadaas, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu la tashan karaa daneenayayaasha kale ee habboon oo ay kamid yihiin, balse aan ku ekayn, hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, ama Dawladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Qodobka 160-H
Diidmada Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska

1. Haddii Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu diido Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ama Wasiirka uusan si cad u ansixin arrimaha ku xusan faqradda (7) ee Qodobka 160-G, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu si qoraal ah ku soo

saarayaa ogeysiiska diidmada isagoo u diraya Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah mashruuca, nuqul kamid ahna siinaya Waaxda Farsamada iyo Wasiirka. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inuu si cad u qeexaa asbaabta uu u cuskaday diidmada, waana inuu soo jeediyaa talooyin ama dalbadaa in waxkabeddel lagu sameeyo Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

2. Kadib diidmadan, Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doonayso inay sii waddo hawlaha Tartanka Qandaraaska, waa inay dib u hagaajin ku samaysaaa Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska iyadoo tixgelineysa faallooyinka iyo tallooyinka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waana inay, muddo hal (1) bil gudaheed laga bilaabo taariikhda ogeysiiska diidmada, dib usoo dirtaa iyadoo raacaysa habraacii hore oo ay kusoo gudbisay xirmada.

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu diidi karaa oo keliya Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska:
   a) marka aysan si cad u tilmaameyn ama u geexeyn shuruudaha looga baahan yahay inay ku jiraan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee ku xusan Cutubka 7aad (Habraaca Tartanka Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah) iyo Cutubka 8aad (Shuruudaha Guud ee Xulashada Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah), iyo sidoo kale qabyo qoraalka Heshiiska Mashruuca ee ku xusan Qodobka 137 iyo Lifaaqa 4aad;
   b) marka aysan la jaanqaadeyn Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca ee la ansixiyay;
   c) marka aysan u hoggaansanayn Qodobbada Sharcigan ama/iyo Xeer-nidaamiyaashiisa;
   d) marka xirmada uu kujiro qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca oo ay ku jiraan waajibaadyo keenaya in mashruucu buuxinin mabaadi'da kala ah U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca ama Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee horay loo ansixiyay; ama
   e) marka ay ka kooban yihiin Waajibaadyado Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyado Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee aanu Wasiirku aqbalin.

Qodobka 160-I
Ansixinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska

1. Haddii Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ansixiyo qabyo qoraalka Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska si waafagsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa, waxa uu ansixintiisa ogeysiis qoraal ah ugu gudbinayaa Hay'adda

Dawladda ee Masuulka ka ah mashruuca, isagoo nuqul kamid ahna siinaya Waaxda Farsamada iyo Wasiirka. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska u soo saaraysaa si waafaqsan habraaca lagu qeexay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee la ansixiyay iyo Sharcigan.

2. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed isaga oo wakiil ka ah Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca kadib Ansixinta Heshiiska Mashruuca, waxa uu ogeysiinayaa Garyaqaanka Guud, si uu u diiwangashto xogtaas..

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ma ansixin karo Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ama qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca illaa uu horay usoo saaray Ansixinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca si waafaqsan Qodobka 160-A ee Sharcigan.

CUTUBKA 7AAD
HABRAACA TARTANKA QANDARAASYADA MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 160-J
Heerarka Tartanka Qandaraaska

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay isticmaali kartaa hal ama wax ka badan ama wadajirka heerarka/marxaladaha tartanka qandaraaska ee soo socda si ay usoo xulato cidda fulinaysa mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah:
   a) Marxaladda Caddeynta Muujinta Rabitaanka:
      i. Muujinta Rabitaanka waa marxaladda koowaad ee ikhtiyaariga ah oo aan waajibka ahayn ee mashruuc kasta.
      ii. Codsiga Caddeynta Muujinta Rabitaanka ayay u isticmaali kartaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca si ay u ogaato rabitaanka suuqa ee mashruuca/fursada iyo si ay u go'aamiso in Hay'adaha Gaarka Loo Leeyahay ay leeyihiin awoodda maaliyadeed iyo farsamo oo ay ku qaban karaan mashruuca laga hadlayo, kahor inta aysan daahfurin Tartanka Qandaraaska ee rasmiga ah.

   b) Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga:
      i. Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga waa heerka koowaad ee waajibka ah ee dhammaan mashaariicda lagu bixinayo habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada, waxa ayna Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca u adeegsaneysaa si ay dadweynaha u ogeysiiso in mashruuc la bixinayo, waxa ayna ku sheegeysaa ogeysiiska faafaahin kooban oo ku saabsan mashruuca iyo nooca xulashada.

ii. Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga waa in la faafiyaa kahor Xulashada Hordhaca ah (haddii la dabaqaayo) iyo kahor Codsiga Soo-jeedinta.
iii. Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga loogama baahna Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada; Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah iyo Nidaamka Gorgortanka Tooska ah.

c) Xulashada Hordhaca ah:
   i. Xulashada Hordhaca ah waa heer/marxalad ikhtiyaari ah oo aan waajib ahayn oo loogu talagalay in lagu soo xulo liis kooban oo ah U-Tartamayaasha Qandaraas ee ugu mudan.
   ii. Mashruuc kasta waa in lagu sameeyaa qiimeyn ku aaddan in loo baahan yahay Xulasho Hordhac ah iyo in kale, iyadoo la tixgelinayo miisaanka iyo baaxadda mashruuca iyo tirada tartamayaasha isku soo sharixi kara.
   iii. Ujeedada Xulashada Hordhaca ah waa in lagu reebo tartamayaasha qandaraas ee aan laheyn awoodda farsamo iyo maaliyadeed oo ay ku fulin karaan mashruuca laga hadlayo.
   iv. Haddii heerka Xulashada Hordhaca ah la isticmaalayo, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay diyaarineysaa Casuumadda Xulashada Hordhaca ah, iyo Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah si waafaqsan Qodobbada 160-N ilaa 160-R.
   v. Tartamayaasha soo buuxiya shuruudaha u qalmidda ee lagu sheegay dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah oo keliya ayaa lagu casuumayaa inay ka qaybqaataan Codsiga Soo-jeedinta.

d) Codsiga Soo-jeedinta:
   i. Codsiga Soo-jeedinta waa heerka ugu dambeeya ee Tartanka Qandaraaska, waxa ayna u isticmaaleysaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca si ay tartamayaasha iyo hadii la isticmaalay Xulashada Hordhaca, tartamayaasha ka soo gudbay heerka Xulashada Hordhaca ah uga dalbato inay u soo gudbiyaan soo-jeedintooda farsamo iyo maaliyadeed.
   ii. Marxaladda Codsiga Soo-jeedinta waa waajib, waxaana la istcimaali karaa keligeed ama kadib heerka Xulashada Hordhaca ah.
   iii. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay u diyaarisaa Casuumadda Qandaraas Usoo-tartamidda iyo Codsiga Soo-jeedinta si waafaqsan Qodobkal60-W ilaa Qodobka 160-Z ee Sharcigan.

Qodobka 160-K
Tartanka Qandaraaska - Guud Ahaan

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay diyaarisaa islamarkaana ay faafisaa Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska si waafaqsan Cutubkan 7aad.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ma soo saari karto wax Dukuminti Tartan Qandaraas ah, iyada oo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uusan ansixin xirmada dhammeystiran ee Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska si waafaqsan Qodobka 160-I ee Sharcigan.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay waqti kasta faafin kartaa Cadeynta Muujinta Rabitaanka, balse had iyo jeer waxa ay ku xiran tahay oo waajib ah in ay Hay'addu heshay Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca.

Qodobka 160-L
Codsiga Caddeynta Muujinta Rabitaanka

1. Iyadoo la raacayo faqradda (3) ee Qodobka 160-K, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay waqti kasta (iyadoo aan waajib ku aheyn), si furan ama si casuumaad gaar ah, ugu yeeri kartaa Hay'adaha Gaarka Loo Leeyahay inay soo gudbiyaan Caddeynta Muujinta Rabitaanka si ay ugu qeyb qaataan mashruuca laga hadlayo.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay dooran kartaa in Caddeynta Muujinta Rabitaanka ay ku darto Daraasadda Suurta-galnimada Mashruuca, waxa ayna u isticmaali kartaa jawaabaha kasoo baxaa qaabeynta mashruuca iyo diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

3. Codsiga Caddeynta Muujinta Rabitaanka waa inuu ka koobnaadaa:
   a) sharaxaad ku aadan adeegyada, waxqabadka iyo natiijooyinka ay u baahan tahay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca iyo qaabka loo bixinaayo;
   b) warbixin kooban oo ku saabsan habraaca xulashada ee la soo jeediyay; iyo
   c) qaabka iyo goobta lagu soo gudbinayo dukumintiyada Caddeynta Muujinta Rabitaanka, iyadoo waqti ku filan loo siinayo tartamayaasha qandaraaska ee danaynaaya si ay u diyaariyaan una soo gudbiyaan Caddeyntooda Muujinta Rabitaankooda.

Qodobka 160-M
Ogeysiiska Guud ee Fursadda Maalgashiga

1. Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga waa in laga faafiyaa dhammaan mashaariicda lagu xulanayo Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada kahor intaan la shaacin Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah (haddii la dabaqaayo habraacan) iyo Codsiga Soo-jeedinta.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ma billaabi karto mana faafin karto Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga illaa:
   a) laga helo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed Ansixinta Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca si waafaqsan Qodobka 160-A:; iyo
   b) laga helo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed Ansixinta Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah (haddii la dabaqaayo habraacan) iyo Codsiga Soo-jeedinta.

3. Ogaysiiska Guud ee Fursadda Maalgashiga waa inuu ka koobnaadaa waxyaabaha soo socda:
   a) sharraxaad kooban oo ku saabsan ujeedka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ee billaabista Tartanka Qandaraaska ee mashruuca;
   b) macluumaadka ku saabsan mashruuca;
   c) sharraxaad kooban oo ku saabsan jadwalka-waqtiga la soo jeediyay ee xulashada lagu dhammeeynaayo; iyo
   d) macluumaad kasta oo kale oo ay u baahan tahay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

4. Si loo faafiyo Ogeysiiska Guud ee Fursada Maalgashiga, waxyaabaha soo socda ayaa la dabaqayaa:
   a) in faafinta lagu sameeyo warbaahinta sida:
      i. warbaahinta Qaranka;
      ii. warbaahin caalami ah (haddii ay tahay in la isticmaalo) oo la aqoonsanyahay;
      iii. bogga internetka ee Wasaaradda; iyo
      iv. bogga internetka ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

   b) ogeysiiska waa in lagu faafiyaa ugu yaraan laba (2) kamid ah warbaahinta kor lagu xusay.

Qodobka 160-N
Xulashada Hordhaca ah - Guud Ahaan

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay (iyadoo aan waajib ku aheyn) sameyn kartaa Xulashada Hordhaca ah iyo soo saarista liiska gaaban ee tartamayaasha qandaraaska iyadoo maraysa Xulashada Hordhaca ah.

2. Ujeeddada Xulashada Hordhaca ah ayaa ah in la hubiyo in Tartamayaasha Qandaraas ee leh awoodda farsamo, maaliyadeed, iyo sharci oo ay ku fulin karaan mashruuca lagu casuumo inay soo gudbiyaan Soo-jeedintooda.

3. Marka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca dooneyso inay si hordhac ah u kala xulato tartamayaasha soona saarto liiska gaaban ee tartamayaasha u-qalma, waxa ay si furan u shaacin kartaa Casuumadda Xulashada Hordhaca ah ama waxay ku diri kartaa casuumaad gaar ah si waafaqsan Qodobka 160-S.

Qodobka 160-O
Habraaca Xulashada Hordhaca ah

1. Marka Xulashada Hordhaca ah la isticmaalayo, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay dhaqangelineysaa habraaca soo socda si waafaqsan halbeegyada iyo shuruudaha ku xusan Sharcigan:
   a) waxa ay si guud u shaacinaysa ama si gaar ah ugu casuumaysaa tartamayaasha danaynaaya, Casuumadda Xulashada Hordhaca ah si waafaqsan Qodobka 160-S;
   b) waxa ay la wadaagaysa Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah tartamayaasha danaynaaya;
   c) waxa ay ka jawaabeysaa su'aalaha ay soo waydiiyaan Tartamayaasha Qandaraaska inta lagu jiro habraaca Xulashada Hordhaca ah;
   d) waxa ay uruurinaysa, islamarkaana ilaalineysaa Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah oo ay soo gudbiyaan Tartamayaasha;
   e) waxa ay guddoominaysaa Guddiga Mashruuca, waxa ayna qiimeynaysaa Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah iyadoo kaashanaysa Guddiga Mashruuca;
   f) iyadoo ay weheliso Guddiga Mashruuca, waxa ay diyaarineysaa liiska tartamayaasha qandaraas ee ku soo baxay liiska gaaban iyo Warbixinta Qiimeynta Tartamayaasha;
   g) waxa ay ka dalbaneysaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ansixinta liiska tartamayaasha qandaraas ee ku soo baxay liiska gaaban iyo Warbixinta Qiimeynta Tartamayaasha; iyo
   h) waxa ay Casuumaadda Qandaraas U-soo Tartamidda u direysaa tartamayaasha qandaraas ee ku soo baxay liiska gaaban ce la ansixiyay.

Qodobka 160-P
Nuxurka Casuumadda Xulashada Hordhaca ah

1. Casuumadda Xulashada Hordhaca ah waa inay ugu yaraan ku jiraan arrimahan:
   a) magaca iyo ciwaanka goobta ay ku taalo Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca;
   b) macluumaadka ku saabsan mashruuca;
   c) sharraxaad kooban oo ku saabsan jadwalka-waqti ee la soo jeediyay in lagu dhammeeyo xulashada;
   d) sharaxaad kooban oo ku saabsan habka tartanka qandaraaska, iyo sida lagu helayo dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah (haddii la isticmaalaayo habraacan):
   e) goobta, qaabka iyo waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta jawaabaha Xulashada Hordhaca ah;
   f) macluumaad kasta oo kale oo ay u baahato Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca; iyo
   g) arrimaha kale ee lagu qeexo Xeer-nidaamiyaasha Sharcigan.

Qodobka 160-Q
Nuxurka Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah

1. Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah waa in ay ku jiraan, ugu yaraan, arrimahan:
   a) shuruudaha hagaaya soo saarista Xulashada Hordhaca ah;
   b) ujeedada soo saarista Xulashada Hordhaca ah;
   c) dulmar ku saabsan waxyaabaha ku jira Xulashada Hordhaca ah;
   d) macluumaadka ku saabsan mashruuca;
   e) sharaxaad kooban oo ku saabsan habraaca Tartanka Qandaraaska;
   f) tilmaamaha diyaarinta iyo soo-gudbinta Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah;
   g) shuruudaha Xulashada Hordhaca ah, gaar ahaan shuruudaha farsamo iyo maaliyadeed ee ugu yar ee loogu baahan yahay Tartamayaasha, iyo miisaanka ay leedahay shuruud kasta ee la cayimay inta lagu Jiro qiimeynta;
   h) habraaca qiimaynta; iyo
   i) macluumaad kasta oo kale oo ay u baahan tahay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

Qodobka 160-R
Shuruudaha Qiimaynta - Xulashada Hordhaca ah

1. Marka la sameynayo Xulashada Horudhac ah, kala saaridda Tartamayaasha ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waxaa lagu saleynayaa awoodda sharci, farsamo iyo maaliyadeed ee Tartamayaasha.

2. Marka la fulinaayo habraacyada Xulashada Horudhaca ah, shuruudaha qiimayntu waa inay ku jiraan ugu yaraan kuwan soo socda:
   a) waayo-aragnimada gaarka ah ee tartamahu u leeyahay mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   b) liiska mashaariicda nuuc ahaan iyo baaxad ahaan lamidka ah mashruuca hawshiisa lagu jiro ee uu horay ufuliyay u tartamaha qandaraaska/ tartamayaasha dalladaysan ama shaqaalahiisa;
   c) awoodda maaliyadeed ee u tartamaha qandaraaska/tartamayaasha Dalladaysan iyo/ama awoodda uu ku heli karo maalgelin isaga ka baxsan si uu u fuliyo mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   d) awoodda sharci ee u tartamaha qandaraaska/tartamayaasha Dalladaysan uu ku fulin karo hawlaha mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, iyo awooddiisa sharci ee uu ku geli karo Heshiiska Mashruuca;
   e) awoodda farsamo ee u tartamaha qandaraaska/tartamayaasha Dalladaysan uu ku fulin karo hawlaha mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah; iyo
   f) xirfadaha maamul ee u tartamaha qandaraaska/tartamayaasha Dalladaysan u leeyahay maaraynta mashaariicda lamidka ah midka xulashadiisa lagu jiro.

Qodobka 160-S
Faafinta Habraacyada Xulashada Horudhaca ah

1. Marka la sameynayo Xulashada Horudhac ah, waxyaabaha soo socda ayaa la dabaqi doonaa marka la faafinaayo Casuumidda Ka-qaybgalka Xulashada Horudhaca ah:

   a) marka la fulinaayo Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada, faafinta Casuumidda Ka-qaybgalka Xulashada Horudhaca ah waa in lagu sameeyaa warbaahinta sida:
      i. warbaahinta Qaranka;
      ii. warbaahin caalami ah (haddii ay tahay in la isticmaalo) oo la aqoonsanyahay;
      iii. bogga internetka ee Wasaaradda; iyo
      iv. bogga internetka ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

   b) Marka la fulinaayo Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada iyo Habraaca Xulashada Halka II-kaliya ah, Casuumidda Ka-qaybgalka Xulashada Horudhaca ah waa in la siiyaa dhammaan shirkadaha ay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca u asteeysay inay ka qaybgalaan tartanka qandaraaska.

Qodobka 160-T
Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah

1. Guddiga Mashruucu waa inuu u giimeeyaa jawaabaha Xulashada Hordhaca ah oo ay soo gudbiyaan tartamayaasha si waafaqsan Sharcigan, Xeer-nidaamiyaashiisa iyo shuruudaha giimaynta ee lagu xusay Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah.

2. Guddiga Mashruucu waa inuu diyaariyaa Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah, waana in ay ku jirtaan arrimaha soo socda:
   a) warbixin kooban oo ku saabsan heerka ay jawaabaha tartamayaasha ee ku aadan Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah ay la jaanqaadayaan shuruudaha lagu xusay Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah;
   b) warbixin kooban oo ku saabsan habraaca loo maray Xulashada Hordhaca ah iyo natiijada kasoo baxday qiimaynta;
   c) liiska tartamayaasha la diiday ee aan buuxin shuruudaha' Xulashada Hordhaca ah iyo sababta ama asbaata loo diiday; iyo
   d) liiska tartamayaasha ku soo baxay Xulashada Hordhaca ah, kuwaas oo soo buuxiyey shuruudaha Xulashada Hordhaca ah, ayna tahay inay u gudbaan heerka Soo-gudbinta Soo-jeedinnada.

3. Guddiga Mashruucu waa inay ku soo dhamaystiraan qiimaynta iyo Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah ugu dambayn sodon (30) maalmood gudahood laga bilaabo waqtiga la soo xiro tartanka. Haddii waqti dheeraad ah loo baahan yahay si loo xaqiijiyo in si buuxda loo qiimeeyo jawaabaha Xulashada Hordhaca ah, gaar ahaan mararka khibrad gaar ah loogu baahan yahay qiimeynta, Guddiga Mashruucu waxa uu kordhisan karaa wagtiga loogu talagalay in lagu dhameeyo qiimaynta, laguna diyaariyo Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca. Muddo-kordhinta ay Guddigu samaynayaan waa in aanay ka badan soddon (30) maalmood oo dheeraad ah oo ka baxsan muddada sodonka maalmood ah ee ka bilaabanaysa xiritaanka tartanka, marka laga reebo haddii muddo kale oo intaas kabadan loo baahanyahay duruufo gaar ah awgeed, iyadoo ay shardi tahay in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ansixiyo muddo kororkaas dheeraadka ah.

4. Guddiga Mashruucu waa inuu xagiijiyaa in la soo xulo oo keliya tartamayaasha leh awoodda maaliyadeed oo ay ku fuliyaan mashruuca, waayo-aragnimada ku habboon fulinta mashaariicda noocan ah, iyo aqoonta kale ee la xiriirta fulinta mashruuca.

5. Guddiga Mashruucu waa inuu hubiyaa, iyadoo lagu dabaqaayo hadba xaaladaha ku habboon, in dhammaan macluumaadka waajibka ah oo ay soo gudbiyeen Tartamayaasha lasoo raaciyay laguna xoojiyay caddaymo la taaban karo.

6. Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah waa inay saxiixaan dhammaan xubnaha Guddiga Mashruuca.

7. Haddii ay dhacdo in xubin kamid ah Guddiga Mashruuca uu ku qanci weydo natiijada Warbixinta Qiimaynta, xubintaasi waa inay ku caddeysaa diidmadeeda Warbixinta Qiimaynta, islamarkaana ay sheegtaa asbaab maangal ah oo ay ku diiddan tahay natiijada Warbixinta Qiimaynta. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ayaa qiimeyn ku sameyn kara aragtida xubinta Guddiga ee diidan natiijada Warbixinta Qiimaynta si waafaqsan Xeer-nidaamiye loo soo saaray si waafaqsan Sharcigan.

Qodobka 160-U
Ansixinta Tartamayaasha Kasoo Gudbay Xulashada Hordhaca ah

1. Marka la soo gabagabeeyo, Guddiga Mashruucu waxa uu Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah u gudbinayaa Guddiga isku-dhafka Wasaaradeed si ay u ansixiyaan, isagoo nuqul kamid ah siinayaa Waaxda Farsamada.

2. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, oo kaashanaaya Waaxda Farsamada, waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah si'uu u hubiyo in Guddiga Mashruuca ay qiimeynta jawaabaha tartamayaasha u sameeyeen si waafaqsan shuruudaha Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah iyo Sharcigan.

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu diidi karaa oo keliya Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah marka:
   a) Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah aysan si cad u muujinayn dhammaan shuruudihii loogu baahnaa inay ku jiraan Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca, sida ku cad faqradda 2aad ee Qodobkan; ama
   b) Guddiga Mashruucu uu hareer maro ama uusan dabaqin habraaca qiimaynta ee lagu sheegay Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah.

4. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu haystaa hal (1) bil si uu u ansixiyo ama u diido Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah. Ansixinta ama diidmada Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa in si qoraal ah loogu gudbiyaa Madaxa Guddiga Mashruuca, iyadoo nuqul kamid ahna la siinayo Waaxda Farsamada.

5. Haddii Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah la diido, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inuu si cad u qeexaa sababta diidmada. Diidmadaas kadib, Guddiga Mashruucu waa in uu dib u giimeeyaa Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah isaga oo tixgalinaya wixii faallooyin ah ee uu ka bixiyay Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed

waana inuu dib ugu diraa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si uu u ansixiyo, isagoo nuqul kamid ah siinayaa Waaxda Farsamada.

6. Marka habraaca Xulashada Hordhaca ah la isticmaalo, Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca looma oggola inay faafiso Codsiga Soo-jeedinta ilaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ka ansixinaayo Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah si waafaqsan Qodobkaan.

Qodobka 160-V
Tartan Ka Reebid

1. Qandaraas U-tartame waxaa lagu reebayaa heerka Xulashada Hordhaca ah haddii Qandaraas Usoo-tartamahaas:
   a) uu ku guuldareysto inuu soo buuxiyo mid kamid ah shuruudaha Xulashada Hordhaca ah ee lagu qeexay Codsiga Xulashada Hordhaca ah;
   b) uu soo gudbiyo macluumaad been-abuur ah, khaldan ama aan dhammaystirnayn;
   c) uu ku lug yeesho dhagar, khiyaano ama fal kasta oo musuqmaasuq ama daacad-darro ah ee uu uga gol-leeyahay inuu ku helo faa'iido aan caddaalad aheyn taas oo wu uga badin karo tartamayaasha kale ee kula jira tartanka; ama
   d) ku xadgudbo Qodobbada Sharcigan, Xeer-nidaamiyaashiisa ama sharci kasta oo dhaqan-gal ah si uu u helo faa'iido aan cadaalad ahayn taas oo uu uga badin karo tartamayaasha kale ee kula jira tartanka.

2. U-tartamaha Qandaraaska ee loo reebay si waafaqsan farqada (1) ee Qodobkan waa in lagu ogeysiiyaa qoraal ahaan kahor inta aan la billaabin heerka xiga ee soo-gudbinta Codsiga Soo-jeedinta. Ogeysiiska qoraalka ah iyo Warbixinta Qiimaynta waa in lagu sheegaa sidoo kale asbaabta U-tartamaha Qandaraaska looga reebay tartanka.

Qodobka 160-W
Habraaca Codsiga Soo-jeedinta

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay dabaqdo habraaca soo socda si ay usoo saarto, una maareyso Habraaca Codsiga Soo-jeedinta:
   a) waa inay faafisa, walibana u dirtaa Casuumadda Qandaraas U-tartamidda, Qandaraas U-tartamayaasha danaynaaya iyo kuwa kasoo gudbay Xulashada Horudhaca ah si waafaqsan Qodobka 160-T ee Sharcigan;
   b) waa inay diyaarisaa, lana wadaagtaa Dukumintiyada Codsiga Soo-jeedinta, Qandaraas U-tartamayaasha danaynaaya mashruuca iyo kuwa kasoo gudbay heerka Xulashada Hordhaca ah;

c) waa inay ku casuumtaa Qandaraas U-tartamayaasha danaynaaya iyo kuwa kasoo gudbay xulashada horudhaca ah inay faallooyin iyo afkaar ka bixiyaan Codsiga Soo-jeedinta, iyo qodobbada qabyo-qoraalka Heshiisyada Mashruuca;
d) waa inay ka-jawaabtaa su'aalaha ka yimaada Qandaraas U-tartamayaasha inta lagu jiro habraaca xulashada;
e) waa inay martigelisaa shirka hordhaca u ah tartanka (haddii ay ku habboon tahay);
f) waa inay magacaawdaa Guddiga Mashruuca si waafaqsan Qodobka 132 ee Sharcigan;
g) waa inay qabataa, walibana ilaalisaa dhammaan Soo-jeedinnada la soo gudbiyo;
h) waa inay shir-guddoomisaa Guddiga Mashruuca, iyadoo la-qiimeynaysa Guddiga Mashruuca jawaabaha ay soo gudbiyaan Qandaraas U-tartamayaasha:;
i) waa inay kasoo heshaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ansixinta Warbixinta Qiimaynta Codsiyada Soo-jeedinta (RFP Evaluation Report);
j) waa inay ogeysiis u dirtaa, oo ay wargelisaa Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday;
k) waa inay shir-guddoomisaa Guddiga Mashruuca, lana xaajootaa Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday;
l) waa inay kasoo heshaa Guddiga isku-dhafka Wasaaradeed ansixinta kama dambaysta ah ee qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca; walibana
m) waa inay la gashaa Heshiiska Mashruuca Qandaraas U-tartamaha Guulaystay.

Qodobka 160-X
Nuxurka - Casuumadda Qandaraas U-tartamidda

1. Casuumadda Qandaraas U-tartamidda waa ogaysiis qoran oo loogu gudbaayo heerka xiga ee soo-gudbinta Codsiga Soo-jeedinta kaas oo ay tahay inay faafiso Hay'ada Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, waxa uuna soo koobayaa habraaca Codsiga Soo-jeedinta, isagoona ku casuumayaa Qandaraas U-tartamayaasha inay ka qaybqaataan soo-gudbinta Codsiga Soo-jeedinta, iyadoo sidoo kalana uu ku wargelinayo Qandaraas U-tartamayaasha sida ay ku heli karaan dukumintiyada Codsiga Soo-jeedinta.

2. Casuumadda Qandaraas U-tartamidda waa inay ka koobnaataa, ugu yaraan, arrimahan:
   a) magaca iyo cinwaanka goobta ay kutaalo Hay'ada Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca;
   b) macluumaadka ku saabsan mashruuca;
   c) sharaxaad kooban oo ku saabsan waqtiga loo qoondeeyay tartanka;
   d) sharaxaad kooban oo ku saabsan habraaca tartanka, iyo sida lagu heli karo Codsiga Soo-jeedinta;
   e) goobta iyo waqtiga kama dambaysta ah ee lagu soo gudbinayo jawaabaha Codsiga Soo-jeedinta; iyo

f) macluumaad kasta oo kale oo ay u baahan tahay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca; iyo
g) arrimaha kale ee lagu tilmaamo Xeer-nidaamiyaasha Sharcigan.

Qodobka 160-Y
Nuxurka - Codsiga Soo-jeedinta

1. Codsiga Soo-jeedinta waa inuu ka koobnaadaa, ugu yaraan, arrimahan soo socda:
   a) macluumaadka mashruuca, oo ay ku jiraan waxyaabaha soo socda:
      i. xogta ku aadan sida Mashruuca kuasoo bilaawday iyo waxa uu yahay;
      ii. ujeedooyinka Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
      iii. sharaxaadda mashruuca oo ay ku jiraan shuruudaha farsamo iyo maaliyadeed ee looga baahan yahay inay soo buuxiyaan Qandaraas U-tartamayaasha;
      iv. sharaxaad ku saabsan heerka adeegyada loo baahanyahay, halbeegyada waxqabadka iyo shuruudaha kale ee lagama maarmaanka u ah oo ay ku jiraan badqabka, amniga iyo ilaalinta deegaanka; iyo
      v. Heshiiska Mashruuca oo ay ku jiraan shuruudaha aan laga gorgortami karin;

   b) tilmaamaha ay raacayaan Qandaraas U-tartamayaasha, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:
      i. tilmaamaha loo raacayo diyaarinta iyo soo gudbinta Soo-jeedinta, oo ay ku jiraan:
         A. waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta Soo-jeedinta;
         B. xilliga, iyo goobta lagu furaayo dukumintiyada tartanka oo ay soo gudbiyeen Qandaraas U-tartamayaasha;
         C. haddii la oggol yahay in si elektaroonig ah loo soo gudbiyo Soo-jeedinta iyo inkale; iyo
         D. haddii habraaca wada-hadalka furan ee tartamayaasha lala-yeesho la dabaqi doono;
      ii. shuruudaha, habraaca iyo maamulka su'aalaha ay soo gudbiyaan Qandaraas U-tartamayaasha;
      iii. tilmaamaha ku saabsan shirarka tartanka kahoreeya, haddii laqabanaayo shirkaas;
      iv. habraaca loo raacayo habka Wada-Xaajoodka Tartanka (haddii la isticmaalayo);
      v. shuruudaha ay soo buuxineyaan Tartamayaasha Dalladaysan iyo isbeddellada loo oggol yahay in lagu sameeyo Dalladaas;
      vi. muddada loo baahan yahay inay sii jirto Soo-jeedinta Tartamayaasho soo gudbiyeen;
      vii. ogaysiiska xaddidaadaha ku aadan danaha is-diidan iyo xeerarka ka-hortagga khiyaanada iyo musuqmaasuqa;

viii. in la tixgelinayo soo jeedimo kale ee farsamo oo aan ahayn kuwa la dalbaday ama isbeddelo dhanka heshiisyada, iyo sida loo qiimeyn doono isbeddelaas dhanka farsamo iyo heshiis;
ix. qaabka ay Tartamayaashu u dalbanayaan dib-u-eegista falalka, fal la'aanta iyo go'aamada ka soo baxa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca;
x. arrimaha ku saabsan qiimaha oo ay tahay in si faahfaansan loo cayimo, nooca lacagta ama lacagaha loo adeegsan karo Soo-jeedinta maaliyadeed, iyo lacagta iyo sarifka lacagaha loo isticmaalayo isbarbardhigga Soo-jeedinta; iyo
xi. arrimaha kale ee lagu sheegay Xeer-nidaamiyahaasha, hagayaasha ama dukumintiga tartanka caadiga ah ama foomamka ay soo saarto Waaxda Farsamada.

c) shuruudaha qiimaynta, oo larabo inay kujiraan waxyaabaha soo socda:
   i. shuruudaha ugu yar ee larabo Tartamayaasho inay soo buuxiyaan haddii aan la isticmaalin habraaca Xulashada Horudhaca ah;
   ii. shuruudaha loo isticmaalayo in lagu qiimeeyo Tartamayaasha, iyo miisaanka ay leedahay shuruud kasta oo la cayimay inta lagu guda jiro qiimaynta; iyo
   iii. habraaca loo marayo qiimaynta; iyo

d) foomamka, oo ay ku jiraan kuwaan soo socda:
   i. foomka dammaanadda Tartanka Qandaraaska iyo dammaanad-qaadka fulinta mashruuca haddii Tartame ku guulaysto (haddii loo baahanyahay);
   ii. foomamka soo-jeedinta farsamada;
   iii. foomamka Soo-jeedinta maaliyadeed; iyo
   iv. dhammaan foomamka lagama maarmaanka u ah diyaarinta Soo-jeedinta.

Qodobka 160-Z
Shuruudaha Qiimaynta - Codsiga Soo-jeedinta

1. Marka la joogo qiimaynta Codsiga Soo-jeedinta, shuruudaha qiimaynta waa in ay ku jiraan ugu yaraan kuwaan soo socda:
   a) awoodda farsamo, oo ay ku jiraan khibradda iyo awoodda shago iyo maamul ee lagu fulinayo mashruuca;
   b) wax ku'oolnimada habraacyada iyo hababka la soo jeediyay in loo adeegsanaayo fulinta mashruuca;
   c) soo-jeedinta maaliyadeed, iyadoo gaar ahaan laga eegaayo heeka ay macquulka tahay oo laga bixi karo, iyo sida ay u dabooleyso dhinacyada mashruuca oo dhan marka loo eego soo-jeedinta farsamada, iyo suurtagalnimada in dhaqan-gelin karo qorshaha maalgelinta;

d) awoodda Qandaraas U-tartamaha u leeyahay inuu u fuliyo mashruuca si waafaqsan qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca ee ku jira Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska; iyo
e) arrin kasta ama macluumaad kasta ay Waaxda Farsamada iyo/ama Guddiga Isku-dhafka ee Wasaaradeed u arkaan inay ku habboon tahay in lagu daro shuruudaha qiimaynt Soojeedimaha ay soo gudbiyaan Qandaraas U-tartamayaasha.

Qodobka 160-AA
Faafinta Casuumadda Qandaraas U-tartamidda

1. Haddii la adeegsado marxaladda Xulashada Hordhaca ah, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay la wadaagtaa Casuumada Qandaraas U-tartamidda tartamayaasha kasoo gudbay Xulashada Horudhaca ah oo keliya ee lagu soo saaray liiska Warbixinta Qiimaynta Xulashada Hordhaca ah oo ay ansixiyeen Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

2. Haddii aan la isticmaalin marxaladda Xulashada Hordhaca ah, habraaca soo socda ayaa lagu dabaqi doonaa faafinta Casuumada Qandaraas U-tartamidda:
   a) Marka la isticmaalaayo Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada, faafinta Casuumadda Qandaraas U-tartamidda waa in lagu baahiyaa ugu yaraan laba kamid ah warbaahinta oo ay kamid yihiin:
      i. warbaahinta Qaranka;
      ii. warbaahin caalami ah (haddii ay tahay in la isticmaalo) oo la aqoonsanyahay;
      iii. bogga internetka ee Wasaaradda; iyo
      iv. bogga internetka ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

   b) Marka la isticmaalaayo Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada iyo Habraaca Xulashada Halka Il-kaliya ah, Casuumadda Qandaraas U-tartamidda waa in la siityaa dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha ay Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca u asteeysay inay ka qeybgalaan tartanka.

Qodobka 160-AB
Shirka Hordhaca U Ah Tartanka Qandaraaska

1. Haddii ay lagama maarmaan tahay, waxaa la agaasimayaa shir hordhac u ah tartanka si fursad loogu siiyo Tartamayaasha inay soo bandhigaan su'aalahooda una helaan macluumaad dheeri ah oo ku saabsan shuruudaha Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ama u fahmaan arrimaha ku xusan Codsiga Soo-jeedinta.

2. Taariikhda, waqtiga iyo goobta lagu qabanayo shirka hordhaca u ah Tartanka Qandaraaska waxaa lagu qeexayaa Codsiga Soo-jeedinta, waana in xilliga la qabanaayo uusan ka yaraan afar iyo toban (14) maalmood kadib marka la shaaciyo Casuumadda Qandaraas U-tartamidda.

Qodobka 160-AC
Soo Gudbinta Soo-jeedimaha

1. Qandaraas U-tartamuha waa inuu usoo dhammeystiraa, una soo gudbiyaa Soo-Jeedinta si waafaqsan shuruudaha ku xusan Codsiga Soo-Jeedinta.

2. Qandaraas U-tartamayaashu waa inay soo gudbiyaan soo-jeedinno kala duwan oo kala ah mid farsamo iyo mid maaliyadeed ah sida ku cad Codsiga Soo-jeedinta.

3. Dhammaan Soo-jeedinnada la soo gudbiyo kadib waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta waa la diidayaa, oo waxaa loo soo celinayaa Qandaraas U-tartamaha soo gudbiyay iyada oo aan la furin.

Qodobka 160-AD
Muddada Soo-jeedimuhu Ansax Yihiin oo Ay Jiraayaan

1. Soo jeedintu waxa ay a jireysaa, oo ay ansax ahaanaysaa muddada lagu sheegay Codsiga Soo-jeedinta.

2. Waxkabeddelka ama ka laabashada Soo-jeedinta inta lagu guda jiro muddada uu socda Tartanka Qandaraas waxa ay keeneysaa in Qandaraas U-tartamaha lagala wareego dammaanadda Tartanka Qandaraaska (haddii dammaanada nuucaan ah la isticmaalaayay).

3. Muddada jiritaanka Soo-jeedinta waxaa lagu kordhin karaa oo keliya haddii Qandaraas U-tartamaha ay khusayso uu oggolaado. Haddii Qandaraas U-tartamuhu aqbalo kordhinta muddada jiritaanka Soo-jeedinta, waa inuu sidoo kale waqti lamid ah u kordhiyaa Dammaanadda Tartanka Qandaraaska, haddii ay lagama maarmaan tahay.

Qodobka 160-AE
Furitaanka Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska

1. Guddiga Mashruuca waxa uu dhammaan Soo-jeedinnada ku furayaa waqtiga iyo goobta lagu sheegay Codsiga Soo-Jeedinta.

2. Guddiga Mashruuca waa inuu ku furaa Soo jeedinnada sida ugu dhaqsaha badan, oo aan ka badnayn ugu dambeyn hal (1) todoobaad kadib waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta Soo-jeedimaha.

3. Guddiga Mashruuca waa inuu ku casuumaa xubnaha Waaxda Farsamada furitaanka Soo-jeedinnada isaga oo u diraya ogeysiis qoraal ah, kaas oo tilmaamaya waqtiga, goobta iyo taariikhda Soo-jeedinnada la furayo.

4. Waaxda Farsamada waa inay ka soo qayb-gashaa furitaanka Soo-jeedinnada, balse, haddii ay dhacdo in Waaxda Farsamada aysan ka soo qayb-galin inkastoo lagu casuumay, taasi ma joojinayso mana xayirayso furitaanka Soo-jeedinnada.

5. Guddiga Mashruucu waxa uu ku casuumi karaa Qandaraas U-tartamayaasha inay ka soo qaybgalaan furitaanka Soo-jeedinnada, balse tani ma ahan mid khasab ama waajib ah. Habraaca ku saabsan furitaanka dukumintiyada Tartanka Qandaraaska iyo ka qaybgalka Qandaraas U-tartamayaasha soo gudbiyay Soo-jeedinnada waxaa lagu qeexayaa Codsiga Soo-jeedinta.

6. Magaca Qandaraas U-tartame kasta, iyo in dukumintiyada Tartanka Qandaraasku wataan Damaanadda Tartanka iyo in kale, haddii loo baahan yahay, iyo dukumintiyada kale ee muhiimka ah ee raacsan dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee lasoo gudbiyay waa in cod sare lagu akhriyaa lana diiwaan geliyaa, iyadoo nuqul kamid ah diiwaankaan la siin karo Qandaraas U-tartame haddii uu soo codsado.

7. Wax go'aan ah oo ku saabsan ka reebidda Qandaraas U-tartame Tartanka Qandaraaska ama diidmada Soo-jeedin lama qaadan karo ama laguma dhawaaqi karo inta lagu jiro fadhiga furitaanka Soo-jeedinnada.

8. Furitaanka Soo-jeedinnada kadib iyo ilaa go'aanka horudhaca ah lagu wargelinayo Qandaraas U-tartamayaasha, waxaa mamnuuc ah in Qandaraas U-tartame wax xiriir ah la sameeyo Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ama isku dayo inuu si uun saamayn ugu yeesho baarista iyo qiimaynta lagu sameeynaayo Soo-jeedinnada.

Qodobka 160-AF
Habraaca Qiimaynta - Soo Jeedimaha

1. Guddiga Mashruucu waa inuu u qiimeeyaa Soo-jeedin kasta si waafaqsan Sharcigan, Xeer-nidaamiyaashiisa iyo habraaca lagu sheegay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, iyadoo marwalba ay waajib tahay in loo hoggaansamo habraaca ku qoran Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa, haddii ay is khilaafaan habraaca ku qoran

Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska iyo habraacayada ku qoran Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Guddiga Mashruucu waa inuu ugu horreyn eegaa Soo-jeedinnada si uu u go'aamiyo in ay si buuxda u dhammaystiran yihiin iyo in kale, isaga oo eegaya arrimaha soo socda:
   a) in Soo-jeedinnadu ay ka koobanyihiin dhammaan qaybaha waajibka ah sida ku cad Codsiga Soo-jeedinta (kuwaas oo si waafi ah usoo buuxinaaya shuruudaha loogu baahan yahay);
   b) in Soo-jeedinnada la soo raaciyay dukumintiyada sharci ahaan loogu baahan yahay iyo in Dammaanadda Tartanka; iyo/ama
   c) in Soo-jeedinnadu ay si lataaban karo oo wayn uga leexdeen qaabkii laga filaayay iyo inay ka koobanyihiin shuruudo ama qaybo kamid ah Soo-jeedinnada ay maqanyihiin ama laga soo tagay.

3. Soo-jeedinnada aan buuxin shuruudaha ku xusan faqrada 2aad ee Qodobkaan waa la diidayaa, waxaana laga saarayaa qiimaynta iyo isbarbardhiga dheeraadka ah.

4. Haddii Habraaca Xulashada Horudhaca ah la adeegsaday, Soo-jeedin kasta oo ay soo gudbiso cid aan ku jirin liiska-gaaban ee Qandaraas U-tartamayaasha waa la diidayaa waxaana laga saarayaa qiimeynta iyo tartanka.

5. Guddiga Mashruucu waxa uu intaas kadib qiimeynayaa Soo-jeedinnada farsamo iyo maaliyadeed ee aan la reebin ama la diidin iyadoo loo hoggaansamaayo faqradaha (3) iyo (4) ee Qodobkan, si waafaqsan shuruudaha iyo habraac lagu sheegay Codsiga Soo-jeedinta.

6. Hay’adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay ka dalban kartaa Qandaraas U-tartame kasta caddeynta ama macluumaadka ay u baahantahay, si ay ugu adeegsato qiimaynta. Haddii ay lagama maarmaan noqoto in lala xiriiro Qandaraas U-tartamaha, xiriirka waa in lagu sameeyaa qoraal, kaas oo noqon kara mid loo diro qaab elektaroonig ah, waxaana saxiixaya Guddoomiyaha Guddiga Mashruuca.

7. Haddii qalad xisaabeed uu kujiro Soo-jeedinta, qaladkaas waa in la saxo lana ogeysiiyo Qandaraas U-tartamaha ay khuseyso. Haddii Qandaraas U-tartamaha uu diido inuu aqbalo sixidda, Soo-jeedintiisa waa la diidayaa, waxaana lagala wareegayaa Dammaanadda Tartanka. Haddii ay kala duwanaadaan tirooyinka iyo erayada, xaddiga tirada ee eray ahaanta u qoran ayaa la qaadanayaa haddii uusan kala duwanaanshuhu ka iman godka lagu qoray dhibicda jajab-tobanlaha ah (decimal point), iyadoo markii qaladkaas oo kale uu dhaco la saxaayo qaladka, walibana la Ogeysiinaayo Qandaraas U-tartamaha ay khuseyso.

8. Guddiga Mashruuca waa inay giimaynta ku soo gabagabeeyaan lixdan (60) maalmood gudahooda, laga bilaabo furitaanka Soo-jeedinnada. Haddii waqti dheeraad ah loo baahan yahay si loo xaqiijiyo in si buuxda loo qiimeeyo Soo-jeedinnada, gaar ahaan mararka khibrad gaar ah ay u baahantahay qiimeynta, Guddiga Mashruucu waxa uu kordhisan karaa waqtiga loogu talagalay in lagu dhameeyo qiimaynta Soo-jeedinnada. Muddo-kordhinta ay Guddigu samaynayaan waa in aanay ka badan soddon (30) maalmood oo dheeraad ah oo ka baxsan muddada lixdanka (60) maalmood ah oo ka bilaabmaysa furitaanka Soo-jeedinnada, marka laga reebo haddii muddo kale oo intaas kabadan loo baahanyahay duruufo gaar ah awgeed, iyadoo ay shardi tahay in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ansixiyo muddo kororkaas dheeraadka ah.

9. Guddiga Mashruuca waa inuu soo diyaariyo gqiimaynta kadib, Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada (RFP Evaluation Report) taaso ku dhisaan natiijooyinka kasoo baxay qiimaynta ay sameeyeen.

10. Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada waa inay saxiixaan dhammaan xubnaha Guddiga Mashruuca.

11. Marka la soo gabagabeeyo, Guddiga Mashruuca waa inuu u gudbiyaa Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada (RFP) Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay u ansixiyaan si waafaqsan habraacyada ku xusan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

Qodobka 160-AG
Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada

1. Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada waa in ay ka koobnaataa ugu yaraan arrimahan:
   a) warbixin ku saabsan sida loogu soo jawaabay Codsiga Soo-jeedinta tyada oo lagu saleynayo shuruudaha lagu sheegay Soo-jeedinnada;
   b) shuruudaha loo adeegsaday in lagu giimeeyo Soo-jeedinnada;
   c) faahfaahin ku aadan arrimaha ku jira Soo-jeedinnada oo Hay'adda Dawladda Ee Masuulka Ka ah Mashruuca (Procuring Entity) ay tartamayaasha ka dalbatay in la soo caddeeyo iyo jawaabaha laga soo bixiyay; iyo xaqiijin ku aadan in dhammaan faahfaahinnadaas loo soo bixiyay si waafaqsan habraaca ku xusan Qodobka 160-AL;
   d) natiijooyinka qiimaynta farsamada;
   e) natiijooyinka qiimaynta maaliyadeed;
   f) magaca Qandaraas U-tartamaha leh buundada guud ee ugu sarreysa (si waafaqsan shuruudaha giimaynta ee lagu sheegay Codsiga Soo-jecdinta); iyo
   g) magaca Qandaraas U-tartamaha leh buundada guud ee labaad ee ugu sarreysa (si waafaqsan shuruudaha qiimaynta ee lagu sheegay Codsiga Soo-jeedinta).

2. Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinta waa inay saxiixaan dhammaan xubnaha Guddiga Mashruuca.

3. Haddii ay dhacdo in xubin kamid ah Guddiga Mashruuca uu ku qanci waayo natiijada Warbixinta Qiimaynta, Xubintaasi waa inay ku caddeysaa diidmadeeda Warbixinta Qiimaynta islamarkaana xustaa asbaab maangal ah oo ay ku diiddan tahay natiijada Warbixinta Qiimaynta Soojeedinnada. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ayaa giimayn ku sameyn kara aragtida xubinta Guddiga Mashruuca ee diidan si waafagsan Xeer-nidaamiyaasha Sharcigan.

Qodobka 160-AH
Ansixinta Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada

1. Marka lasoo gabagabeeyo diyaarintiisa, Guddiga Mashruucu waxa uu Warbixinta Qiimeynta Codsiga Soo-jeedinnada iyo magaca Qandaraas U-tartamaha La Doorbidaayo u gudbinayaa Guddiga isku-dhafka Wasaaradeed si ay u ansixiyaan, isagoo sidoo kale nuqul kamid ah siinayaa Waaxda Farsamada.

2. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed oo kaashanaaya Waaxda Farsamada ayaa dib-u-eegis ku sameeynayaa Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada, waxa uuna hubinayaa:
   a) in dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha kasoo gudbay marxaladda Xulashada Horudhaca ah lagu casuumay ka qeyb qaadashada marxaladda soo gudbinta Soo-jeedinnada;
   b) in Qandaraas U-tartamaha heysta buundada ugu sarreysa loo aqoonsaday Qandaraas U-tartamaha La Doorbidayo;
   c) in Guddiga Mashruucu dabaqay habraaca qiimaynta ee lagu xusay Codsiga Soo-jeedinta; iyo
   d) in qiimeynta loo fuliyay si waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

3. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, kadib marka uu dib-u-eegista ku sameeyo Warbixinta Qiimeynta Codsiga Soo-jeedinta, waxa uu samayn karaa mid kamid ah tallaabooyinka soo socda:
   a) waxa uu ansixin karaa warbixinta;
   b) waxa uu diidi karaa warbixinta;
   c) waxa uu ka dalban karaa Guddiga Mashruuca faafaahin ku aadan sida Guddiga Mashruucu wu qaatay go'aan gaar ah oo la xiriira qiimaynta, haddii faafaahinta iyo caddeynta noocan ahi ay lagama maarmaan tahay; iyo/ama

d) waxa uu ka dalban karaa Guddiga Mashruuca inuu wax-kabaddallo yar yar ku sameeyo warbixinta haddii ay jiraan qaladaad yaryar oo muuqda sida mid qoraaleed ama mid xisaabeed.

4. Marka la ansixiyo Warbixinta Qiimeynta Codsiga Soo-jeedinta, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu si qoraal ah ugu wargalinayaa go'aankiisa Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca, waxa uuna nuqul kamid ah siinayaa Waaxda Farsamada. Kadib Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca ayaa ku wargalinaysa Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday anisixinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

5. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu diidi karaa oo keliya Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada marka:
   a) Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada aysan si cad u dabaqayn ama aysan ugu hoggaansanayn dhammaan shuruudaha loogu baahan yahay inay kujiraan sida ku cad Qodobka 160-AG; ama
   b) Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada aan laga helin mid kasta oo kamid ah shuruudaha lagu xusay faqradda 160-AG (1).

6. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu haystaa hal (1) bil si wu u ansixiyo ama u diido Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada. Ansixinta ama diidmadda Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa in si qoraal ah loogu gudbiyaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, iyadoo nuqul kamid ahna la siinayo Waaxda Farsamada.

7. Haddii Warbixinta Qiimaynta Codsiga Soo-jeedinnada la diido, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inuu si cad u qeexaa sababta diidmada. Go'aanka diidmada kadib, Guddiga Mashruucu waa inuu dib u qiimeeyaa Codsiga Soo-jeedinnada isaga oo tixgalinaya wixii faallooyin ah ee uu soo bixiyay Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waana inuu dib ugu soo diraa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si uu u ansixiyo, isagoo nuqul kamid ah siinaaya Waaxda Farsamada.

8. Haddii Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed u baahdo macluumaad dheeri ah oo ku saabsan giimeynta si uu u gaaro go'aankiisa, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu kordhisan karaa muddada go'aan gaarista. Haddii ay dhacdo in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu kordhiyo muddada go'aan gaarista, Guddigu waxa uu ogeysiinaya Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, isagoo nuqul kamid ahna siinaya Waaxda Farsamada.

9. Guddiga Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inuusan:

a) wax-kabadal ku samayn Warbixinta Qiimeynta, gaar ahaan, qaybta ku aadan talo-soo jeedinta qandaraas-bixinta; ama
b) diidin Warbixinta Qiimeynta iyada oo uusan xusin wax asbaab ah.

Qodobka 160-AI
Habraaca Hubaalinta

1. Kahor inta aan Warbixinta Qiimaynta Codsiyada Soo-jeedinnada (RFP) loo gudbin Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, islamarkaana iyada oo ay qayb ka tahay habraaca qiimeynta, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay hubaalin xaqiijinayd ku sameysaa Qandaraas U-tartamaha Qandaraas La Doorbiday. Haddii Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday ku dhaco hubaalinta, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay u gudubtaa Qandaraas U-tartamaha ku xiga ee heysta buundada labaad ee ugu sarreysa, kuna sameysaa hubaalin.

2. Heerka hubaalinta waxaa go'aaminaya Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, balse ugu yaraan waa in ay ku jiraan hubinta arrimahan soo socda:
   a) awoodda sharci ee Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday u leeyahay inu galo Heshiiska Mashruuca;
   b) sugnaanta xogta shakhsiyaadka matalaya Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday;
   c) haddii Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday uu yahay Tartamayaal Dalladaysan, caddaynta in mid kasta oo kamid ah xubnaha Dallada uusan sharcigu ka reeben inuu ka qayb-qaato tartanka; iyo
   d) xaqiijinta sheegashooyinka awoodda farsamo iyo maaliyadeed ee uu sameeyay Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, haddii ay u aragto inay ku habboon tahay, waxa ay hawlgelin kartaa khubaro madax-bannaan si ay u sameeyaan hubaalinta.

4. U hoggaansami la'aanta shuruudaha hubaalinta waxay keenaysaa in Qandaraas U-tartamaha aan u hoggaansamin shuruudaha hubaalinta laga saaro Tartanka Qandaraaska.

Qodobka 160-AJ
Dhawrista Xogta iyo Macluumaadka Qiimaynta Tartanka

Macluumaadka la xiriira Soo-jeedinnada ama Qiimaynta Soo-jeedinnada waa qarsoodi, mana bixin karo qof kasta oo ku lug Ieh hannaanka baarista, qiimaynta, ama isbarbardhiga Soo-jeedinnada.

CUTUBKA 8AAD
SHURUUDAHA GUUD EE XULASHADA QANDARAASYADA MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 160-AK
Tartamayaasha Dalladaysan

1. Hay'ad Gaar Looleeyahay ee rabta inay ka qayb-qaadato Tartanka Qandaraaska, waxay uga qayb-qaadan kartaa Tartanka Qandaraaska iyadoo qayb ka ah Tartamayaal Dalladaysan oo ka kooban Hay'ado Gaar Looleeyahay oo isku tagay.

2. Tartamayaasha Dalladaysan waa in xubin kamid ah xubnahooda u magacaabaan hoggaanka Dallada, si uu ugu matalo la macaamilka Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca.

3. Dallada waxaa loo qiimeynayaa si waafaqsan shuruudaha qiimaynta ee lagu sheegay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

4. Xubin kamid ah Tartamayaasha Dalladaysan kama qayb geli karto wax ka badan hal Dallad.

5. Ku soo biiris kasta, ama isbeddel kasta oo lagu sameynayo xubnaha Dalladda waa inay si qoraal ah ku ansixisaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca.

6. Haddii Dalladu doonayso inay isbaddel ku sameeyso xubnaha Dalladda ka mid ah waa inay soo gudbisaa dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah oo ay ku jiraan balse aan ku ekayn, awoodda iyo kartida xubnaha cusub, sababta isbeddelka ka danbeeysa, iyo sharaxaad ku saabsan sida Dalladu weli usii buuxin karto shuruudaha u-qalmidda ee ku qeexan Dukumintiyada Xulushada Qandaraas Usoo-tartamayaasha ee Horudhaca ah iyo Codsiga Soo-gudbinta Soojeedinta, iyo sidoo kale sida ay uga sii jawaabi karto shuruudaha ku jira Dukumentiyada kale ee Tartanka Qandaraaska.

7. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay ansixisaa oo keliya xubinta cusub ee Dallada kusoo biiraysa marka Dalladu caddayso in Dalladu ay sii ahaan karto, kadib marka xubinta cusub kusoo biirto, mid sii buuxin karta shuruudaha qiimaynta ee lagu sheegay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

Qodobka 160-AL
Su'aalaha Kayimaada Tartamayaasha

1. Qandaraas U-tartamayaashu waxa ay usoo gudbin karaan Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca codsiyo ay ku dalbanayaan in loo kala caddeeyo iyo in faallo looga bixiyo arrimo kujira Codsiga Soo-jeedinta iyo/ama Heshiiska Mashruuca, iyadoo raacaya shuruudaha ku xusan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

2. Iyadoo loo hoggaansamaayo farqadaha (3) ilaa (5) ee Qodobkan, Hay'ada Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay ka jawaabi doontaa codstyada kala-caddeynta ay soo iyo su'aalaha ay soo gudbiyaan Qandaraas U-tartamayaasha, si waafaqsan shuruudaha ku xusan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

3. Dhammaan jawaabaha kala-caddeynta iyo weydiimaha waa in lagu gudbiyaa qoraal ahaan.

4. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay jawaabaha la wadaagtaa dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha, iyada oo aan la shaacin cidda uu yahay Qandaraas U-tartamaha soo gudbiyay su'aalaha.

5. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, haddii ay u baahan tahay waqti ay kaga soo jawaab celiso su'aalaha Qandaraas U-tartamayaasha ama waxkabaddal ugu sameyso Dukumintiyada Tartanka, waxay kordhin kartaa waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta Soo-jeedinnada ama jawaabaha Xulashada Hordhaca ah.

Qodobka 160-AM
Wax-ka-beddelka Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska

1. Xilli kasta kahor inta aan la gaarin waqtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay Qandaraas U-tartamayaasha, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, sabab kastaba ha keentee, waxay si iskeed ah ama iyada oo ka jawaabeysa codsi kala-caddayn oo uu soo gudbiyay Qandaraas U-tartame, wax-ka-beddel ama dib-u-eegis ku samayn kartaa Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, oo ay ku jiraan Heshiiska Mashruuca, iyadoo wax-kabeddelka la wadaagaysa dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha.

2. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doonayso inay dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel ku samayso Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska si waafaqsan farqada (1) ee Qodobkan, waa in ay xaqiijisaa in dukumeentiyada wax laga beddelay ay u hogaansamaan dhammaan shuruudaha Sharcigan, isla markaana Waaxda Farsamadu

waa in ay dib u eegis ku sameeysaa dukumeentiyada wax laga beddelay oo ay xaqiijisaa in arrintani ay sidaas tahay.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay hubisaa in dukumeentiyada wax laga beddelay, oo ay xaqiijisay Waaxda Farsamadu, loo gudbiyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay u ansixiyaan, waxaana waajib ah inay hesho ansixinta Guddiga ka hor inta aan loo gudbin Qandaraas U-tartamayaasha.

Qodobka 160-AN
Xulashada Loo Maro Habka Elektarooniga ah

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waxa ay isticmaali kartaa hababka xulashada ee elektarooniga ah, sida iimaylka, kulammada foggaan arraga ah (video conferencing), madallada tartanka online-ka ah, internetka ama teknoolojiyadaha kale ee macluumaadka wadaagista iyo isgaarsiinta, si ay u daabacdo Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, ama u maarayso habraaca Tartanka Qandaraaska, ama ula xiriirto Qandaraas U-tartamayaasha.

2. Iyadoon lasamaynayn wax xaddidaad ah, hababka xulashada ee elegtarooniga ah waxaa loo isticmaali karaa:
   a) faafinta ogeysiisyada;
   b) soo-gudbinta iyo furitaanka Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska;
   c) habraaca qiimaynta;
   d) ka jawaabista su'aalaha iyo weydiimaha Qandaraas U-tartamayaasha;
   e) is-dhaafsiga dukumintiyada;
   f) wada-xiriirka guud inta lagu guda jiro geeddi-socodka Tartanka Qandaraaska iyo gorgortanka; iyo
   g) faafinta shuruucda, xeerarka, tilmaamaha iyo hagayaasha.

Qodobka 160-AO
Habraaca Soo-gudbinta

1. Soo-jeedinnada ay soo gudbinayaan Qandaraas U-tartamayaasha waxa lasoo gudbin karaa iyagoo daabacan ama iyagoo qaab elektaroonig ah, iyadoo marwalba la raacaayo habraaca lagu tilmaamay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

2. Haddii loo baahan yahay in Soo-jeedinnada loo soo gudbiyo qaab daabacan, Dukumintiyada Tartanka Qandaraasku waa inay oggolaadaan in soo gudbinta Soo-jeedinnada ama jawaabaha Xulashada Hordhaca ah loo keeni karo si shakhsi ah ama

boosto ahaan, iyada oo midka ufudud ama uu rabo uu dooranayo Qandaraas U-tartamaha.

3. Marka la isticmaalayo hababka elegtarooniga ah, waa in la ilaaliyaa sir ahanshaha iyo badqabka Soo-jeedinnada iyo jawaabaha Xulashada Hordhaca ah, oo ay ku jirto in laga taxadaro in aysan cidna furin ama akhrin ilaa dhammaadka waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta, sida lagu sheegay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

Qodobka 160-AP
Waqtiga Kama Dambeysta Ah ee Soo Gudbinta

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay dejisaa waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta Soo-jeedinnada iyo Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah iyadoo maanka ku haysa in Qandaraas U-tartamayaasho u helaan waqtiga ku filan diyaarintooda iyo soo gudbintooda, iyada oo laga duulayo in la ballaariyo tartanka.

2. Waqtiga loogu talagalay diyaarinta jawaabaha iyo Soo-jeedinnada waa inuu noqdaa mid ka tarjumaya baahiyaha mashruuca loo tartamaayo, lana siiyaa Qandaraas U-tartamayaasha waqti ku filan oo ay ugu baaraan dagaan, kuna diyaariyaan Jawaabo iyo/ama Soo-jeedinno dhammaystiran.

3. Dukumintiyada Tartanka Qandaraasku waa inay u oggolaadaan waqti aan ka yareyn:
   a) saddex (3) toddobaad diyaarinta Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah; iyo
   b) lix (6) toddobaad diyaarinta Soo-jeedinnada (Proposals) Tartanka Qandaraaska.

Qodobka 160-AQ
Bixinta Dukumeentiyada Tartanka Qandaraaska

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay si degdeg ah oo aan takoor lahayn ugu dirtaa dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha ka soo jawaabaya Casuumadda Xulashada Hordhaca ah iyo Codsiga Soo-jeedinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay ka qaadi kartaa Qandaraas U-tartamayaasha khidmad lacageed kooban, si ay u helaan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

Qodobka 160-AR
Habraaca Qiimaynta

1. Qiimaynta Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah iyo Soo-jeedinnada waxaa fulinaya Guddiga Mashruuca.

2. Guddiga Mashruucu waa inuu hubiyaa in dhammaan macluumaadka waajibka ah oo ay soo gudbinayeen Qandaraas U-tartamayaasha la soo raaciyay caddeymo xoojinaya ama xaqiijinaaya dhab ahaanshahooda.

Qodobka 160-AS
Sugnaanta Shuruudaha Qiimaynta

1. Waa inaan Qiimeynta loo adeegsan wax shuruud ah oo aan ku xusnayn Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee la siiyay Qandaraas U-tartamayaasha.

2. Iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 160-AV ee Sharcigan, Hay’adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca iyo Guddiga Mashruuca midna ma beddeli karo shuruudaha giimaynta kadib marka lasoo gudbiyo Soo-jeedinnada ama Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah.

Qodobka 160-AT
Shuruudaha Muunadda Ah

Wasiirku waxa uu soo saari karaa hagayaal ku aadan qaabeynta iyo dhismaha shuruudaha qiimaynta si uu u hago Hay’adaha Dawladda ee Masuulka ka ah Mashaariicda iyo Guddiyada Mashariicda marka ay timaado heerarka kala duwan ee lakala xiriira diyaarinta habraaca tartanka, xulashada iyo qiimaynta mashaariicda.

Qodobka 160-AU
Shuruudaha Mamnuuca Ah ee Aan Loo Adeegsan Karin Qiimaynta

1. Shuruudaha lagu dhex adeegsanayo Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee lagu xulanaayo Qandaraas U-tartamayaasha waa in aanay, heer kastaba ku jirin, mid kamid ah kuwan soo socda:
   a) shuruud aan ka tarjumeyn yoolasha iyo mabaadi'da tartanka ee lagu sheegay Sharcigan iyo/ama Xeer-nidaamiyaashiisa;
   b) shuruud aan macno ahaan ahayn mid xiriir laleh wax-qabadka iyo wax-soosaarka Mashruuca, islamarkaana aan gacan ka geesanayn in la gaaro ujeedooyinka Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;

c) shuruud mugdi ku jiro oo fasiraaddeedu ahayn mid si guud laiskula fahmi karo (subjective);
d) shuruud aan caddaalad ku dhisneyn ee u xaglinaysa Qandaraas U-tartame gaar ah, taasoo xadgudub ku ah mabaadi'da tartanka ee Sharcigan iyo/ama Xeer-nidaamiyaashisa lagu sheegay; ama
e) shuruud dhiirigelinaysa musuqmaasuga dhammaan ama qayb ahaan Tartanka Qandaraaska Mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 160-AV
Soo-gudbinta Hal Soo-jeedin ama Soo-jeedinno aan Dhameystirneyn

1. Haddii ay dhacdo in la soo gudbiyo oo keliya hal (1) Soo-jeedin ama haddii Soo-jeedinnada kale noqdaan kuwo aan ansax ahayn sababo la xiriira inay jabiyeen ama aysan u hoggaansamin shuruudaha ka-qaybgalka Tartanka Qandaraaska ee ku xusan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, Guddiga Mashruucu waxa uu diyaarinayaa Warbixinta Qiimaynta waxa uuna u gudbinayaa Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, iyada oo uu raacinayo talo-soo-jeedino ay kamid yihiin kuwan soo socda:
   a) in lagu sii wado Tartanka Qandaraaska hal (1) Qandaraas U-tartame oo keliya, iyadoo la qeexayo khataraha ka dhalan kara sidaas;
   b) in waxkabaddel lagu sameeyo Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska islamarkaana dib loola wadaago Qandaraas U-tartamayaasha Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee waxkabaddelka lagu sameeyay;
   c) in la joojiyo habraaca Tartanka Qandaraaska ee markaas socda gebi ahaantiisba, oo mar labaad si cusub loo bilaabo habraaca Tartanka Qandaraaska; ama
   d) in la joojiyo habraaca Tartanka Qandaraaska gebi ahaantiisba.

Qodobka 160-AW
Dammaanada Tartanka

1. Codsiga Soo-jeedinnada waxa uu ka dalban karaa Qandaraas U-tartameyaasha inay soo gudbiyaan Dammaanadda Tartanka Qandaraaska.

2. Shuruudda lagu xusay faqradda (1) ee Qodobkan waa in lagu dabaqaa dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha.

3. Dammaanadda Tartanka Qandaraaska waxaa lala wareegi karaa oo keliya haddii:
   a) Qandaraas U-tartamahu waxkabaddelo ama ka noqdo Soo-jeedinta kadib waqtiga kama dambaysta ah ce soo-gudbinta Soo-jeedinnada iyo inta lagu jiro muddada jiritaanka Soo-jeedinta oo larabo inay ansax ahaato (period of validity);

b) Qandaraas U-tartamahu diido inuu aqbalo sixidda qalad-xisaabeed ama qaladaadka kale ee yaryar ee ka muuqda Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee uu;
c) Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday ku guuldarreysto inuu saxiixo Heshiiska Mashruuc si waafaqsan shuruudaha ku xusan Codsiga Soo-jeedinta;
d) Qandaraas U-tartamayaasha ku lug yeeshaan musuqmaasuq, khiyaano, qasbid ama hab-dhaqan wadajir ah oo si toos ah u horseedaya in Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay awoodi wayso inay dhammaystirto habraaca Tartanka Qandaraaska; ama
e) Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday ku guuldarreysto inuu keeno Dammaanadad Fulinta Qandaraaska, haddii loogu baahan yahay inuu keeno dammaanad nuucaas ah si wafaaqsan shuruudaha Codsiga Soo-jeedinta.

4. Dammaanadda Tartanka waa inay ahaataa qaabka lagu sheegay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

Qodobka 160-AX
Joojinta Tartanka

1. Iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda (2) ee Qodobkan, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay joojin kartaa Tartanka, ama waxa ay diidi kartaa dhammaan Jawaabaha Xulashada Hordhaca ah ama Soo-jeedinnada loo soo gudbiyay xilli kasta kahor inta aan la saxiixin Heshiiska Mashruuca, marka ay jiraan xaaladaha soo socda:
   a) haddii ay meesha ka baxdo baahida mashruuca ama haddii duruufuhu si weyn isu beddelaan;
   b) haddii uu isbeddel weyn ku yimaado arrimaha farsamo ee loo baahan yahay, baaxadda mashruuca, shuruudaha tartanka, shuruudaha heshiiska, ama faafaahinno kale, taas oo lagama maarmaan ka dhigaysa in dib loo soo billaabo habraaca Tartanka Qandaraaska;
   c) haddii aysan jirin cid soo gudbisay dukumintiyo tartan oo si sax ah u soo buuxinaya shuruudaha Tartanka Qandaraaska;
   d) haddii la helo caddaymo muujinaya musuqmaasuq, khiyaano, qasbid, ama wax-is-daba-marin;
   e) haddii soo-jeedinnada maaliyadeed aysan buuxineyn mabaad'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) mashruuca iyo in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca;
   f) haddii loo arko in joojinta ay dan u tahay amniga Qaranka; iyo/ama
   g) haddii ay si iskeed ah u go'aamiso Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ma joojin karto Tartanka Qandaraaska iyada oo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uusan ansixin joojinta.

3. Joojinta ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan waa in si qoraal ah lagu ogeysiiyaa dhammaan Qandaraas U-tartamayaasha iyada oo lagu caddeynayo ogeysiiska asbaabta loo cuskaday joojinta.

4. Kadib joojinta Tartanka Qandaraaska, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay Dammaanadda Tartanka u celisaa Qandaraas U-tartamahayaasha.

5. Marka laga reebo iyadoo loo hoggaansamaayo faqradda (4) ee Qodobkan, Qandaraas U-artamayaasha ka qayb-qaadanaayay Tartanka Qandaraas ee la joojiyay xaq uma yeelanayaan in magdhow laga siiyo wixii khasaare ah ee ka dhashay joojinta Tartanka Qandaraaska.

CUTUBKA 9AAD
TALAABOOYINKA XIGA QUMEYNTA TARTANKA QANDARAASKA KADDIB

Qodobka 160-AY
Wada-xaajoodka

1. Guddiga Mashruuca ayaa u xilsaaran inuu la xaajoodo Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday.

2. Madaxa Guddiga Mashruuca ayaa hogaaminaya, walibana iskudubaridaya wada-xaajoodka Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca iyo/ama Waaxda Farsamada waxa ay waqti kasta, ka codsan karaan wakiillo ka socda Wasaaradaha kale ama hay'adaha kale ee Dawladda inay ku soo biiraan wada-xaajoodka, si ay karti dheeraad ah, aqoon farsamo iyo/ama khibrad ugu kordhiyaan.

4. Wada-xaajoodyada waxaa lala galayaa Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday ee ku xusan warbixinta qiimaynta ay ansixiyeenn Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

5. Haddii ay guuldarreystaan wada-xaajoodyada, Guddiga Mashruuca waxa uu ku wargelinayaa arrinkaas Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ayaa oggolaan doona, haddi ay ku haboontahay, in wada-xaajood lala billaabo Qandaraas U-tartamaha xiga iyadoo lagu wadayo sida ay u kala horreeyaan Qandaraas U-tartamayaasha illaa wada xaajoodka laga soo afmeero, laguna guuleysto.

Qodobka 160-AZ
Arrimaha La Tixgelinayo Inta Lagu Guda Jiro Wada-xaajoodka

1. Wada-xaajoodka u dhexeeya Guddiga Mashruuca iyo Qandaraas U-tartamaha, marka laga soo tago arrimaha kale, waxaa ku jiri kara qodobbo farsamo, ganacsi, sharci, bulsho, deegaan, iyo dhaqaale oo khuseeya Heshiiska Mashruuca, balse wada-xaajoodka waa in aysan ku lug yeelan qodobbada iyo shuruudaha aan laga gorgortami karin ee ku xusan Dukumeentiyada Tartanka.

2. Wada-xaajoodka iyo natiijada ka soo baxdaba:
   a) waa in nuxur ahaan aysan wax ka baddalin qoondeynta khataraha ee ay dhinacyadu iskula meel dhigeen Heshiiska Mashruuca;
   b) iyadoo la raacayo faqradda (3) ee Qodobkan, waa in aysan waxba ka beddelin soo-jeedinta maaliyadeed ee uu soo gudbiyay Qandaraas U-tartamaha;
   c) waa in aysan wax ka beddelin shuruudaha lagu doortay Qandaraas U-tartamaha;
   d) waa in aysan wax ka beddelin qaab-dhismeedka maaliyadeed/ganacsi ee Mashruuca; iyo/ama
   e) waa in aysan saameyn ku yeelan shuruudaha iyo qodobbada aan laga gorgortami karin ee lagu tilmaamay Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska.

3. Sixitaanka qiimayaasha soo-jeedinnada maaliyadeed ee lagu hagaajinayo isbeddelka ku yimid sarifka lacagaha qalaad ama isbeddelka uu keenay sicir-bararka looma qaadanayo inay wax ka beddelayso soo-jeedinta maaliyadeed ee uu soo gudbiyay Qandaraas U-tartamaha.

4. Guddiga Mashruucu waa in ay wada xaajoodka u sameeyaan si waafaqsan hagayaasha uu dejiyay Wasiirka, oo ay ku jiraan hagayaasha nidaaminaaya muddada wada-xaajoodka ee Guddiga Mashruuca iyo Qandaraas U-tartamaha.

Qodobka 160-BA
Heshiiska Sir Dhawrista ah

Guddiga Mashruucu waxa uu ka dalban karaa Qandaraas U-tartamaha La Doorbiday inuu saxiixo Heshiiska Sir-Dhawrista ah ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca, si loo xaqiijiyo dhawrista macluumaadka sirta ah ee wada-xaajoodka.

Qodobka 160-BB
Bixinta Qandaraaska

1. Kadib marka lagu guuleysto wada-xaajoodyada, Guddiga Mashruuca waxa uu diyaarinayaa Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca, si loo qaabeeyo natiijada wada-xaajoodka iyo qodobbada kama dambeysta ah ee Heshiiska Mashruuca.

2. Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca waa in ay ku jiraan:
   a) soo koobid ku saabsan dhammaan qodobbada laga wada xaajooday lagana heshiiyey;
   b) nugul hordhaca (oo nadiif ah) ee qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca laga wada-xaajooday;
   c) nuqul muujinaya isbeddelada lagu sameeyay qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca ugu dambeeya ee laga wada-xaajooday, oo muujinaya isbeddelada lagu sameeyay nuqulkii hore oo ay ansixiyeen Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ayna la socoto warbixin kooban oo tilmaamaysa isbeddellada muhiimka ah ee la sameeyay; lyo
   d) qiimaynta Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara, kuwaas oo ay tahay inay Dawladdu bixiso si waafaqsan qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca ugu dambeeyay ee laga wada-xaajooday.

3. Guddiga Mashruuca waa inuu u gudbiyaa Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay u ansixiyaan isaga oo u marsiinaya Waaxda Farsamada, sida ku cad Qodobka 130 ee Sharcigan.

4. Gudida Isku-dhafka Wasaaradeed, muddo hal (1) usbuuc gudaheed marka uu helo ogaysiiska Guddiga Mashruuca, waxa uu isugu imaanayaa shir, si uu dib u eegis ugu sameeyo islamarkaana u ansixiyo ama u diido Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca, wuxuuna go'aankiisa ku soo saarayaa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.

5. Guddiga isku-dhafka Wasaaradeed waxa u yeerayaa Guddiga Mashruuca si ay shirka ugu soo bandhigaan Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca. Guddiga Mashruuca waa inuu soo koobaa waxkabeddellada lagu sameeyay Heshiiska Mashruuca, gaar ahaan haddii ay jiraan waxkabeddel lagu sameeyay Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara kuwaas oo ay bixineyso Dawladdu sida ku cad Heshiiska Mashruuca.

6. Wasiirku isaga oo gudanaaya xilkiisa Wasiirnimo, oo aan gudanayn doorka xubinnimadiisa ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxa uu si gaar ah masuul uga yahay dib u eegista iyo ansixinta waxkabeddel kasta oo lagu sameeyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustaqbalka Imaan-kara

sida ku cad Qodobka 159(6) iyo Qodobka 160-G(6) ee Sharcigan. Si looga fogaado shaki, Wasiirku waxa uu xaq u leeyahay kuwo lamid ah xuquuqaadka iyo waajibaadyada xubnaha Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed marka ay timaado arrimaha kale ee hoos yimaada waajibaadka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

7. Guddiga isku-dhafka Wasaaradeed waxa uu diidayaa Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca haddii:
   a) qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca ugu dambeeyay ee laga wada-xaajooday uu ku jiro waxkabeddel aasaasi ah oo si weyn wax uga baddalaya qaab-dhismeedka khataraha mashruuca sida ku cad Daraasadda Suurto-galnimada Mashruuca iyo Dukumentiyada Tartanka Qandaraaska;
   b) sida uu go'aamiyay Wasiirku, haddii ay Warbixinta ku jiraan Waajibaadyo Maaliyadeed oo Taagan iyo Waajibaadyo Maaliyadeed oo Mustaqbalka Imanaya kuwaas oo keeni kara in Mashruucu aanu buuxin mabaadi'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) Mashruuca iyo in La-awoodi Karo (Affordability) Mashruuca.

8. Wasiirka waxaa loogu baahan yahay, isaga oo qayb ka ah Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, inuu si cad dib u eegis ugu sameeyo una ansixiyo tallaabo kasta oo taageero Dowladeed ah oo lasoo jeediyo taasoo qayb ka ah Mashruuca, isaga oo isticmaalaya hagayaal loo dajiyay ujeedadaas.

9. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa in uu si qoraal ah ku ogeysiiyaa Guddiga Mashruuca ansixinta Warbixinta Ugu-dambeys ee Khataraha Mashruuca hal (1) bil gudaheed marka uu helo Warbixinta Ugu-dambeysa ee Khataraha Mashruuca.

10. Haddii Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu diido Warbixinta Ugu-dambeysa ee Khataraha Mashruuca, waxaa loogu baahan yahay inuu tilmaamo asbaabta uu u cuskaday diidmadiisa. Guddiga Mashruuca waa inuu dib ula furaa wada-xaajoodka Hay'adda Gaarka Looleeyahay, islamarkaana uu dib usoo billaabaa habraaca ku xusan Qodobkaan ilaa laga helayo ansixinta Warbixinta Ugu-dambeys ee Khataraha Mashruuca ee Gudiga Isku-dhafka Wasaaradeed.

Qodobka 160-BC
Ogeysiiska Bixinta Qandaraaska

Ka dib marka la ansixiyo Warbixinta Ugu-dambeys ee Khataraha Mashruuca, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay ku daabacdaa ogeysiiska bixinta qandaraaska bogga internetka ee Wasaaradda Maaliyadda, islamarkaana waa inay si rasmi ah u ogeysiisaa Qandaraas U-tartamaha Guuleystay iyo Qandaraas U-tartamayaasha aan guulaysan.

Qodobka 160-BD
Saxiixa Qandaraaska

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay la saxiixataa Heshiiska Mashruuca -Qandaraas U-tartamaha Qanadaraas, tyada uu marqaati ka yahay Wasiirka ama wakiilka uu soo idmaday, waana inay hubisaa in la buuxiyay shuruudaha ku xusan Qodobkan 160-BD, kahor inta aan la saxiixin Heshiiska.

2. Heshiiska Mashruuca waa in aan la saxiixin illaa laga helo shuruudaha soo socda:
   a) in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu ansixiyo Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca; iyo
   b) in ugu yaraan afar iyo toban (14) maalmood ay kasoo wareegtay marka ogeysiiska la siiyay Qandaraas U-tartamayaasha lana daabacay ogeeysiiska bixinta qandaraaska.

3. Heshiiska Mashruuca waxa uu dhaqan galayaa:
   a) marka ay si dhameystiran u saxiixaan:
      i. Qandaraas U-tartamaha ku guulaystay; iyo
      ii. sarkaalka idman ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, walibana uu soo buuxiyo shuruudaha kale oo sharciyeed ee ku aadan dhaqan-galka heshiisyada Dowladda; iyo
      iii. saxiixayaal kasta oo kale oo si gaar ah loogu baahan yahay laguna xusay Heshiiska Mashruuca ama shuruucda Dalka;

   b) marka si buuxda loo waafaqay ama laga tanaasulay shuruudaha hordhaca ah ee Heshiiska Mashruuca (haddii ay jiraan); iyo
   c) marka Heshiiska Mashruuca laga diiwaan geliyo Xafiiska Hanti-dhawraha Guud ee JFS, **iyada oo la tixraacayo shuruudaha ku cad Qodobka 14aad ee wax-ka-beddelka Qodobka 84aad ee Sharciga Iibka Qaranka iyo Qodobbada Sharciga Hantidhowrka Guud (Lr. 14/2023).**

4. Marka la saxiixo Heshiiska Mashruuca, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay nuqul kamid ah Heshiiska u dirtaa Guddiga Isku-dhafkaWasaaradeed, Waaxda Farsamada, Wasaaradda Maaliyadda, Garyaqaanka Guud ee Dowladda iyo Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dawladda ay khusayso.

Qodobka 160-BE
Faafinta Macluumaadka Ku-saabsan Qandaraasyada La Saxiixay

1. Marka la saxiixo Heshiiska Mashruuca, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay ugu yaraan laba warbaahin oo heer Qaran ah ku daabacdo natiijada Tartanka Qandaraas iyo macluumaadka soo socda:
   a) magaca Qandaraas U-tartamaha Guulaystay;
   b) dabeecadda mashruuca iyo Qodobbada muhiimka ah ee Heshiiska Mashruuca;
   c) kaabayaasha dhaqaale ee lagu horumarinayo ama adeegyada guud ee loo bixinaayo si waafaqsan Heshiiska;
   d) tacriifooyinka mashruuca (haddii ay jiraan);
   e) tallaabooyin kasta oo ah tageero Dowladeed oo lasiiyay mashruuca;
   f) faa'iidooyinka bulsho iyo dhaqaale ee mashruuca; iyo
   g) muddada uu soconayo mashruuca.

Qodobka 160-BF
Ku-guuldareysiga Bilaabista Mashruuca

1. Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay ee saxiixday Heshiiska Mashruuca si waafaqsan Qodobka 160-BD, waa inay ku billaawdaa hawlaha lagama maarmaanka u mashruuca muddo laba iyo toban (12) bilood gudahood ah laga bilaabo taariikhda la saxiixay Heshiiska Mashruuca.

2. Hawlaha noocan ah waxaa ka mid noqon kara, balse aan ku xaddidneyn, falanqaynta goobta mashruuca lagu salaynaayo, la wareegidda dhulka, dib u dayactirka iyo dhismaha goobta, daraasadaha suurtagalnimada, shaqada naqshadaynta, la-wareegidda iyo shagqada naqshadaynta ee xarumaha ku-meel-gaarka ah, ka helitaanka oggolaansho horudhac ah hay'adaha kala duwan ee Dowladda, la xiriirka amaah-bixiyeyaasha iyo helitaanka maalgelinta horumarinta mashruuca iyo hawlaha dhismaha.

3. Haddii Qandaraas U-tartamaha Guuleystay uu ku hirgelin waayo mashruuca laba iyo toban (12) bilood gudahood, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay xaq u leedahay inay ka baxdo Heshiiska Mashruuca iyo heshiis kasta oo kaabe ah kaas oo xaq u siinaya Qandaraas U-tartamaha Guuleystay qabashada hawlaha mashruuca. Markii xaaladan dhacdo, Qandaraas U-tartamaha Guuleystay ma sii ahaanaayo Qandaraas U-tartamaha Guuleystay, iyadoo Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruucana ay dooran karto inay dib u xayeysiiso Tartanka Qandaraaska Mashruuca si waafaqsan Sharcigan.

4. Kadib markii looga baxo Heshiiska Mashruuca si waafaqsan Qodobkan, haddii Shirkadda Mashruuca ama Qandaraas U-tartamaha Guuleystay uu bixiyay damaanadda waxqabadka (performance bonds), waa in loo soo celiyaa damaanadaas waxqabadka haddii joojinta Heshiiska Mashruuc ay sabab u tahay oo kaliya qaladka ama cillada katimid dhanka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ama hay'ad kale oo ka tirsan Dawladda.

5. Heshiiska Mashruuca waa in uu caddeeyaa in haddii Heshiiska loo joojiyo ama looga baxo si waafagqsan Qodobkan, in Shirkadda Mashruuca ama Qandaraaska U-tartamaha Guuleystay uusan xaq u laheyn magdhowga ka bixista heshiiska.

Qodobka 160-BG
Dhismaha Shirkadda Mashruuca

1. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay ka dalban kartaa Qandaraas U-tartamaha Guuleystay inuu dhiso Shirkadda Mashruuca taas oo loo diiwaan-gelinayo si waafaqsan shuruucda Soomaaliya, balse waxaa shardi ah in arrinkaas horay loogu caddeeyay Dukumintiyada Xulashada Hordhaca ah ama Codsiga Soo-jeedinta.

2. Shirkadda Mashruuca waa inay:
   a) saxiixdaa Heshiiska Mashruuca iyadoo daraf ka ah Heshiiska, haddii ay jirto lana dhisay waqtiga saxiixitaanka Heshiiska Mashruuca; ama
   b) ku biirtaa Heshiiska Mashruuca kadib marka la dhiso; ama
   c) xaqiijisaa in Heshiiska Mashruuca lagu wareejiyo marka la aasaaso, ha ahaato shuruud la fulinayo ka hor inta Heshiisku dhaqangelin, ama shuruud la fulinayo ka dib marka Heshiisku bilaabmo.

3. Hay'ad Dawli ah ayaa saami yar ku yeelan karta Shirkadda Mashruuca ee loo dhisay si waafaqsan farqadda (1), hase ahaatee, arrintaas waxay suurtagal noqon kartaa oo keliya marka oggolaansho hore looga helo Wasiirka Maaliyadda.

4. Shirkadda Mashruuca waxaa loo oggol yahay in ay wareejiso faa'idada kasoo gasha saamiyada ay ku leedahay mashruuca islamarkaana si xor lacag ugu diri karto dibadda Soomaaliya.

Qodobka 160-BH
Maareynta Qandaraaska Mashruuca Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah

1. Guddiga Mashruuca, isagoo si dhow ula shaqaynaaya Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca iyo Waaxda Farsamada, waa inuu sameecyaa qabanqaabada maareynta Qandaraaska Mashruuca oo ay kamid yihiin ugu yaraan arrimahan:
   a) hababka maareynta, oo ay ku jiraan nidaamyada hay'adeed iyo kuwa habraac ee lagula soconayo fulinta qodobbada iyo shuruudaha heshiisyada;
   b) warbixinnada maaliyadeed iyo kuwa aan maaliyadda aheyn ee loo soo gudbinaayo si xilliyaysan iyo hababka lagu xaqiijinayo warbixinnadaas;
   c) shuruudaha ilaalinta iyo dayactirka hantida, haddii ay jiraan; iyo
   d) hababka lagu maareynayo cabashooyinka dadweynaha.

2. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay kaydisaa dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira maaraynta heshiiska ee la xiriira mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidneyn, arrimo kasta ama caqabado kasta oo ku gadaaman hirgelinta mashruuca iyo la socodka waxqabadka Hay'adda Gaarka Looleeyahay.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay warbixin joogto ah siisaa Waaxda Farsamada, Wasiirka iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, iyadoo Waaxda Farsamada iyo Wasiirkuna ay xilli kasta dalban karaa in xog laga siiyo, arrin kasta oo la xiriirta hirgelinta mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

4. Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay isla markiiba ogaysiisaa Waaxda Farsamada, Wasiirka iyo Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed markasta oo la filaayo in ay dhacaan dhacdooyin saamayn xun ama waawayn ku yeelan kara qoondaynta khataraha sida ku cad Heshiiska Mashruuca, ama wax u dhimi kara fulinta hawlaha mashruuca. Dhacdooyinka noocaan ah waxaa ka mid noqon kara, balse aan ku xaddidnayn, musalafid, dacwad, beddelaadda qandaraasle-hoosaadka muhiimka ah, faragelinta deyn-bixiyahaasha ee mashruuca, musoobooyinka rabbaaniga ah, dib u gorgortanka ama soo gabagabeynta ama joojinta Qandaraaska Mashruuca.

5. Guddiga Mashruuca waa inuu la shaqeeyaa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, waana in uu bixiyaa taageerada farsamo ee lagama maarmaanka ah si loo hubiyo in Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay u gudato waajibaadkeeda maareynta Heshiiska ee ku cad Qodobka 121 (1) (g), si waafaqsan Qodobkaan.

Qodobka 160-BI
Wax-ka-beddelka Qandaraaska Mashruuca

1. Heshiiska mashruuc ee la saxiixay waxaa wax-kabeddel ku sameyn kara dhinacyada, waxaase shardi ah in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ay ansixiyaan wax ka beddelka si waafagsan shuruudaha ku xusan Qodobkan.

2. Marka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doonayso inay billawdo wada xaajoodka wax-ka-beddelka Heshiiskii Mashruuca, waa inay ogaysiisaa Waaxda Farsamada, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed iyo Wasaaradda Maaliyadda, islamarkaana ay dhistaa Guddiga Mashruuca si ay u kaabaan hannaanka wada-xaajoodka.

3. Waxkabeddel kasta oo lagu sameynayo Heshiiska Mashruuca waa inay soo diyaariyaan Guddiga Mashruuca, waana in loo gudbiyaa Waaxda Farsamada si ay dib u eegis ugu sameeyso.

4. Guddiga Mashruuca waa inuu u gudbiyaa Waaxda Farsamada arrimahan:
   a) sharaxaad qoran oo caddeyneysa sababta wax ka beddelka heshiiska loogu baahan yahay. Sharaxaaddan waa inay qeexdaa haddii codsiga wax ka beddelka uu ka yimid hay'adda Dawladda ama Shirkadda Gaarka loo leeyahay; isla markaana waa inay si faahfaahsan u tilmaamtaa waxa si dhab ah loo beddelayo, faa'iidooyinka la filayo inay hay'adda Dawladda, bulshada isticmaasha adeegga ama muwaadiniintu ka helaan, iyo sidoo kale saamaynta taban ee dhici karta haddii wax ka beddelka heshiiska aan la oggolaan;
   b) nugulka Heshiiska Mashruuca ee la soo jeediyay;
   c) nuqul Heshiiska Mashruuca ah oo muujinaya dhammaan wax ka beddelada lasoo jeediyay in lagu sameeyo Heshiiska Mashruuca marka loo eego Heshiiskii Mashruuca ee asalka ahaa (isbarbardhigga wax-ka-beddellada);
   d) warbixin kooban uu ku saabsan saamaynta waxkabeddelka la soo jeediyay ku yeelan karo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaanaya ee horay loo ansixiyay, lagana heshiisay, iyo qiimaynta mabaadi'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) Mashruuca iyo in La-awoodi Karo (Affordability) Mashruuca; iyo
   e) bayaan ku saabsan in mashruuca, haddii wax-ka-beddelka la aqbalo, uu sidiisa sii ahaanayo ama uu xaqiijin doono natiijooyin ka wanaagsan kuwii hore, marka ay timaado bulshada iyo deegaanka.

5. Kadib dib-u-eegista, Waaxda Farsamadu waa inay qoraal ahaan ogeysiis ugu dirtaa Wasiirka, iyadoo ka codsaneysa in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed (IMC) uu si kama dambays ah dib-u-eegis ugu sameeyo wax-ka-beddelka la soo jeediyay.

6. Ogeysiiska ay soo saareyso Waaxda Farsamada waa in ay ku jiraan:
   a) dhammaan macluumaadka ay dib-u-eegista ku samaysay, si waafaqsan faqrada (4) ee Qodobkan; iyo
   b) warbixin kooban oo tilmaameysa talooyinka Waaxda Farsamada ee ku aaddan in la ansixiyo ama la diido waxkabeddelka la soo jeediyay, iyadoo sheegeysa asbaabta lagu saleeyay talooyinka.

7. Wasiirku waa in uu u gudbiyaa dhammaan ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada si waafaqsan Qodobkaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib u eegis ugu sameeyaan. Wasiirku ma qiimayn karo, go'aanna kuma gaari karo ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada ee la xiriira waxkabeddelka Heshiiska Mashruuca kahor inta uusan u dirin Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib ugu eegaan una go'aamiyaan.

8. Wasiirku isaga oo gudanaaya xilkiisa Wasiirnimo, oo aan gudanayn waajibaadkiisa xubinnimo ee Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, waxa uu si keligiis ah masuul uga yahay dib u eegista iyo ansixinta waxkabeddel kasta oo lagu sameeyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed Ee Mustaqbalka Imaan-kara.

9. Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ma ansixin karo waxkabeddelka Heshiiska Mashruuca illaa uu kahubiyo islamarkaana ay u caddaato in:
   a) Heshiiska Mashruuca ee wax laga baddelay uu ahaanayo:
      i. mid u hoggaansamaya mabda'a ah U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa Mashruuca;
      ii. mid u hoggaansamaya mabda'a ah in La-awoodi Karo (Affordability) mashruuca;
      iii. mid aanay si weyn u beddelayn sida khataraha loogu qaybiyay labada dhinac sida ku xusan Heshiiska Mashruuca ee asalka ahaa;
      iv. mid ilaalinaya islamarkaana dhowraya deegaanka; iyo
      v. mid aan si weyn wax ugu baddaleyn nuxurka iyo baaxadda mashruuca sida ku cad Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca; iyo

   b) Wasiirku uu ansixyay isbeddellada lagu sameeyay Waajibaadyada Maaliyadeed ee Taagan iyo Waajibaadyada Maaliyadeed ee Mustaqbalka Imaan-kara ee ku aadan mashruuca.

10. Ansixinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed waa inay noqoto mid qoraal ah islamarkaana loo diro labada dhinac ee Heshiiska Mashruuca.

11. Kadib ansixinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee wax-kabeddelka Heshiiska Mashruuca, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay hubisaa in sida ku habboon loo saxiixo wax-kabeddelka si waafaqsan shuruudaha Qodobka 160-BD.

CUTUBKA 10AAD
SOO-JEEDINNADA AAN LA DALBAN EE MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH

Qodobka 160-BJ
Habka Billaabista Soo-Jeedimaha Aan La Dalban

1. Hay'add Gaarka Looleeyahay ayaa soo gudbin karta Soo-jeedin Aan La-dalban oo ku saabsan mashruuc Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, iyadoo soo diyaarinaysa Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La Dalban una gudbinaysa Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, si waafaqsan Sharcigan iyo Xeer-nidaamiyaashiisa.

2. Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La Dalban waa in, ugu yaraan, laga helaa dhammaan macluumaadka ku jira Qodobka 155.

3. Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca ma billaabi karto Tartanka Qandaraas ee Soo-jeedinta aan La Dalban, ilaa laga helo shuruudaha soo socda:
   a) in Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca uu soo saaro Wasiirka, si waafaqsan Qodobka 153.
   b) in Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca ay ansixiyaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, si waafaqsan Qodobka 159; iyo
   c) in Xirmada Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ay ansixiyaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, si waafaqsan Qodobka 160-1.

4. Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee aan la dalban waxaa lagu xulan kara karaa Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada, Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada, Habraaca Xulashada Halka Il-kaliya ah ama iyada oo loo marayo Habraaca Gorgortanka Tooska ah, si waafaqsan habraacyada iyo shuruudaha caadiga ah ee Sharcigan tilmaamayo.

Qodobka 160-BK
Shuruudaha Soo-jeedinta Aan La Dalban

1. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca ay hesho Soo-jeedin Aan La-dalban, way tixgelin doontaa, una gudbin doonta Soo-jeedintaas baaris iyo daraasaad horleh oo keliya marka lasoo buuxiyo dhammaan shuruudahan soo socda:
   a) waxaa lasoo dhamaystiray Habraaca Hubaalinta, si waafaqsan Qodobka 160-BL;
   b) in la soo gudbiyay Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca oo si waafi ah u dhameystiran, ayna ku jiraan dhammaan macluumaadka khuseeya ee looga baahan yahay Qodobka 155;
   c) in mashruuca laga hadlayo uu soo buuxinaayo qeexidda Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee lagu sheegay Sharcigan;
   d) in mashruuca la filayo inuu suurtogal ka nogdo dhinacyada sharciga, farsamada, dhaqaalaha, iyo maaliyadda, isla markaana la rajeynayo inuu xaqiijin karo mabaad'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) iyo in La-awoodi Karo (Affordability);
   e) in aysan jirin soo-jeedin hore oo lamid ah ama mashruuc sidaas ah oo horay loogu gudbiyay Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca ama hay'ad kale ee Dowladeed; iyo
   f) in mashruucan gaarka ah aan hore loogu qorin liiska qaran ee mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

2. Kadib dib u eegista Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca, iyadoo ay shardi tahay in la soo buuxiyo shuruudaha ku xusan Qodobka 160-BK (1) iyo inay jirto baahi loo qabo in la sii ambaqaado mashruuca la-soo jeediyay, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay diyaarineysaa Warbixinta Soo-jeedinta aan La Dalban oo ay ku jiraan:
   a) falanqaynta shuruudaha kore ee lagu taxay faqradda (1) ce Qodobkan:
   b) natiijooyinka habraaca hubaalinta ee loo fuliyay si waafaqsan Qodobka 160-BL; iyo
   c) talo-soo-jeedin ku aaddan in mashruuca loo gudbiyo heerka xiga ce qiimaynta.

3. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doonayso inay sii ambaqaaddo mashruuca, waxa ay Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La Dalban iyo Warbixinta Soo-jeedinta aan La Dalban u gudbineysaaWaaxda Farsamada.

4. Haddii Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca aysan buuxin shuruudaha ku xusan Qodobkaan iyo/ama haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca aysan

dooneyn inay sii ambaqaaddo mashruuca, waa inay Hay'addu ay si qoraal ah ku ogeysiisaa Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay go'aankeeda ku saabsan arrinkaas.

5. Hay'adda Gaarka Looleeyahay dib ayay u soo gudbin kartaa Soo-jeedintiisa aan La Dalban ee ku aaddan isla mashruucaasi, haddii mashruuca dib u habayn lagu sameeyo si wax looga qabto tabashooyinka Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, ama duruufaha mashruuca ay is beddelaan (taas oo ay go'aamineyso Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca).

Qodobka 160-BL
Habka Hubaalinta ee Ciddii Soo-gudbisa Soo-Jeedin Aan La-dalban

1. Kahor intaan la billaabin dib u eegista Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La Dalban, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa inay ka dalbataa Hay'adaha Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban inay soo gudbiso caddaynta arrimahan soo socda:
   a) inay leedahay awoodda maaliyadeed iyo/ama awoodda ay ku heli karto maalgelin si ay u fuliso mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   b) inay leedahay khibradda ku habboon oo ay ku fulin karto mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, taas oo u dhiganta miisaanka iyo culeyska mashruuca la soo jeediyay;
   c) inay leedahay awoodda farsamo oo ay ku fulin karto mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah;
   d) in aysan ka xannibin dal ama hay'ad caalami ah ka-qaybgalka fulinta mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah ee noocan ah ama lamidka ah;
   e) in aysan ku lug yeelan falal musug-maasuq, khiyaano, ama daacadarro islamarkaana loogu eedeyn Maxkamad horteeda ama lagu xukumin falal musuqmaasuq awgood;
   f) in aysan ahayn mid musalaftay ama shiiday, oo ay maxkamad sharci ah ama sarkaal garsoor aysan la wareegin maamulkeeda, ama hawliheeda ganacsi la xayirin oo aysan ku lug laheyn dacwad sharci ah oo hadda socota;
   g) inay tahay canshuur-bixiye u hoggaansama dhammaan shuruucda dalalka ay canshuurta maxalliga ah ka bixiso, iyo dalka asalka ah oo ay ka diiwaan-gashan tahay, islamarkaana aan ahayn mid aan bixin xuquuqaha shaqaale ama tabarucaadka loogu baahan yahay si waafaqsan shuruucda dalka ay ka hawlgasho ama ay ka diiwaan gashan tahay; iyo
   h) aan lagu xukumin xubnaha maamulkeeda ama saraakiisheeda fal-dambiyeed kasta oo la xiriira habdhaqanka xirfadeed shantii sano ugu dambeysay kahor inta uu soo gudbin soo-jeedinta, ama aan horay looga reebin Tartan Qandaraas sababo la xiriira habraacyo maamul.

2. Kahor intaan la billaabin xulashada Soo-jeedinta aan La Dalban tyadoo loo marayo Habraaca Tooska ah ee Gorgortanka ama Habraaca Xulashada Halka IlI-kaliya ah, Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waxa ay hubaalin ku sameeneysaa Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay si ay u hubiso inay soo buuxinayso shuruudaha Hubaalinta ee ku xusan Qodobka 160-AI iyo shuruudaha faqradda (1) ee Qodobkan.

3. Marka laga hadlayo habraacyada xulashada ee tartanka furan ah, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waa in ay u sameysaa xaqiijinta hubaalinta si waafaqsan Qodobka 160-AI.

Qodobka 160-BM
Dib-u-eegista Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca Aan La Dalban

1. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay aqbasho Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca aan La dalban islamarkaana ay diyaariso Warbixinta Soo-jeedinta aan La Dalban oo ay u gudbiso Waaxda Farsamada si waafaqsan Qodobka 160-BK (3), Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca waxaa loo tixgelinayaa inay soo diyaarisay Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca.

2. Waaxda Farsamada waxa ay dib u eegis ku samayneysaa Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca aan La dalban iyo Warbixinta Soo-jeedinta aan La Dalban, waxa ayna tixgalin doontaa shuruudaha ku xusan Qodobbada 149 iyo 160-BL. Waaxda Farsamada waxa ay ku talin kartaaa in la diido Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca aan La dalban ee aan buuxinin shuruudaha ku xusan Qodobbada 149 iyo 160-BL.

Qodobka 160-BN
Talo-soo-jeedinnada Waaxda Farsamada ee Ku Aadan Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca Aan La Dalban

1. Kadib dib u eegista Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La dalban, Warbixinta Soo-jeedinta aan La Dalban iyo Natiijooyinka habka hubaalinta, Waaxda Farsamada waxa ay ogeysiis qoraal ah u direysaa Wasiirka iyadoo ka codsanaya in Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed uu dib u eegistii ugu dambeysay ku sameeyo Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca aan La dalban iyo dukumentiyada kaabayaasha ah.

2. Ogeysiiska Waaxda Farsamada waa inay ku jiraan:
   a) nuqul kamid ah Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La dalban;

b) nuqul kamid ah Warbixinta Soo-jeedinta aan La Dalban;
c) nuqul kamid ah natiijooyinka habka hubaalinta; iyo
d) warbixin kooban oo tilmaameysa talooyinka Waaxda Farsamada ee ku aaddan in la ansixiyo ama la diido Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La Dalban, iyadoo la sheegayo sababaha loo cuskaday talooyinkaas, si waafaqsan shuruudaha lagu xusay Qodobbada 160-BK iyo 160-BL.

3. Wasiirku waa in uu u gudbiyaa dhammaan ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada si waafaqsan Qodobkaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib u eegis ugu sameeyaan. Wasiirku ma qiimayn karo, go'aanna kuma gaari karo ogaysiisyada uu ka helay Waaxda Farsamada ee la xiriira Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La dalban kahor inta uusan u dirin Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay dib ugu eegaan, go'aana uga gaaraan.

Qodobka 160-BO
Dib-u-eegista Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca Aan La Dalban

1. Marka Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed loo soo gudbiyo Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La dalban si ay dib u eegis ugu sameyaan si waafaqsan Qodobka 160-BM, waxaa la dabbaqayaa faqradaha lagu xusay Qodobbada 151, 152 iyo 153 ee Sharcigan.

2. Kadib ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La-dalban, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay dhisi doonta Guddiga Mashruuca si waafaqsan Qodobka 132.

Qodobka 160-BP
Daraasadda Suurtagalnimada Mashruuca Aan La Dalban

1. Kadib marka la soo saaro Ansixinta Warbixinta Kooban ee Nuxurka Mashruuca ee Soo-jeedinta aan La dalban, Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca waxa ay samayneysaa qabanqaabada diyaarinta Daraasadda Suurtagalnimada, waxaana u bannaan inay diyaariso Daraasada Suurtagalnimada lafsad-ahaanteeda ama ay ka codsato inay soo diyaariso Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban, si waafaqsan Qodobka 160-B.

2. Marka Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban ay soo diyaarinayso Daraasadda Suurtagalnimada, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La

Dalban la geli doontaa Heshiiska Diyaarinta Mashruuca, kaas oo lagu caddeynayo arriimaha soo socda:

a) waajibaadka Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban ee ku aaddan diyaarinta Daraasadda Suurtagalnimada, oo ay ku jirto baaxadda Daraasadda Suurtagalnimada;
b) Jadwalka diyaarinta Daraasada Suurtagalnimada, taas oo Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban ay si gaar ah xaq ugu yeelanayso inay soo diyaariso mashruuca. Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban waxa ay heystaa ugu badnaan lix (6) bilood si ay u soo gudbiyo Daraasadda Suurta-galnimada, taas oo loo kordhin karo hal jeer oo ah lix (6) bilood oo dheeraad ah; iyo
c) magdhowga ay Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban ka helayso Qandaraas U-tartamaha ku Guuleystay Heshiiska Mashruuca, haddii ay dhacdo in mashruuca lagu soo xulo habraaca tartanka furan islamarkaana Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban aysan ku guulaysan Tartanka Qandaraaska.

3. Wasiirku waxa uu soo saari karaa hagayaasha ku haboon ee ku saabsan habka diyaarinta heshiisyada diyaarinta mashaariicda (Project Development Agreements).

4. Haddi Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban ay ku soo gudbin waayso Daraasadda Suurta-galnimada waqtiga loo cayimay gudaheed, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay kala dooraneysaa inay iska dhaafto mashruuca ama inay lafsada ahaanteeda diyaariso Daraasadda Suurtagalnimada.

5. Marka Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban ay soo diyaariyo Daraasadda Suurtagalnimada, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxa ay qiimeyneysaa Daraasadda kahor inta aysan u gudbin dib-u-eegis si ay u xaqiijiso in Daraasadda Suurtagalnimada, iyo Qorshaha Xulashada Mashruuca ay soo buuxiyaan shuruudaha loogu baahan yahay ee Sharcigan lagu dejiyay. Si waafaqsan Qodobka 144(2), Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada ayaa ah habka xulashada ee la isticmaalayo haddii aysan jirin sabab macquul ah oo looga leexdo si waafaqsan Sharcigan.

6. Daraasadda Suurtagalnimada waa inay ku jiraan arrimaha ku taxan Qodobka 160-B, waana in loo gudbiyaa Waaxda Farsamada iyo Gudiga Isku-dhafka Wasaaradeed si ay u ansixiyaan si waafaqsan Qodobbada 157 iyo 160-A.

Qodobka 160-BQ
Xulashada Tartanka Furan, Xulashada Tartanka Xaddidan, iyo Xulashada Halka Il-kaliya ah

1. Haddii mashruuca lagu soo xulanaayo mid kamid ah:
   a) Habraaca Tartanka Furan ee Qandaraasyada;
   b) Habraaca Tartanka Xaddidan ee Qandaraasyada, oo isticmaalkiisa loo ansixiyay si waafaqsan Qodobka 146; ama
   c) Habraaca Xulashada Halka Il-kaliya ah, oo isticmaalkiisa loo ansixiyay si waafaqsan Qodobka 145, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, oo ay wehliso Guddiga Mashruuca, waa inay soo diyaariyaan islamarkaana soo gudbiyaan Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska iyo Heshiiska Mashruuca si loo ansixiyo si waafaqsan Qodobka 160-D ilaa Qodobka 160-I. Dukumintiyadan waa inay qeexaan aqoonsiga Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban iyo habka Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban magdhow loogu siinayo dadaaladiisa haddii uusan ku guuleysan Tartanka Qandaraaska.

2. Kadib ansixinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska, Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban waa in lagu casuumaa inuu ka qeybgalo habraaca xulashada.

3. Inta ka hartay habraaca xulashada iyo bixinta qandaraaska waa in lagu wadaa si waafaqgsan Cutubka 7aad (Habraaca Tartanka Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah), Cutubka 8aad (Shuruudaha Guud ee Xulashada Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah) iyo Cutubka 9aad (Talaabooyinka Xiga Qiimeynta Tartanka Qandaraaska Kadib) ee Sharcigan.

Qodobka 160-BR
Habraaca Gorgortanka Tooska ah

1. Haddii mashruuca lagu soo xulanaayo Habraaca Tooska ee Gorgortanka, si waafaqsan Qodobka 145, Guddiga Mashruuca waa inuu diyaariyaa:
   a) Qabyo-qoraalka Heshiiska Mashruuca kaas oo waafaqsan Daraasadda Suurta-galnimada ee la ansixiyay iyo Cutubka 3aad (Mabaadi'da Guud iyo Qaab-dhismeedka Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah);
   b) Lifaaga Waajibaadyada Maaliyadeed ee loo baahan yahay sida ku cad Qodobka 160-D; iyo
   c) Shuruudaha lagu qiimeynayo natiijooyinka laga gorgortamay, kuwaas oo loogu talagalay in lagu hago gorgortanka islamarkaana lagu xaqiijiyo in mashruucu noqdo

mid xaqiijin karo mabaad'da U-qalmidda Lacagta Ku-baxaysa (Value for Money) Mashruuca iyo in La-awoodi Karo (Affordability) Mashruuca iyo sidoo kale inuu u wareejinayo khataraha cidda ku habboon iyo inuu yahay mid la fulin karo.

2. Heshiiska Mashruuca iyo Waajibaadyada Maaliyadeed waa in dib u eegis loogu sameeyo loona ansixiyo iyada oo la raacayo habraacyada lamidka ah kuwa Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska ee lagu xusay Cutubka 6aad (Diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraasyada Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah).

3. Iyadoo la raacayo habraaca ansixinta ee ku xusan Cutubka 6aad, Guddiga Mashruuca waxa uu masuul ka yahay wada-xaajoodyada iyo bixinta qandaraaska si waafaqsan Cutubka 9aad (Talaabooyinka Xiga Qiimeynta Tartanka Qandaraaska Kadib), oo ay ku jirto helitaanka ansixinta Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ee Warbixinta Ugu Dambeysa ee Khataraha Mashruuca, kahor saxiixista Heshtiska Mashruuca ee laga wada-xaajooday si waafaqsan Qodobka 160-BD.

4. Haddi Hay'adda Gaarka Looleeyahay ee soo gudbisay Soo-jeedinta aan La Dalban aysan Heshiiska Mashruuca kula gelin Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca muddo laba iyo toban (12) bilood gudahood ah, Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca waxaa u bannaan inay ka laabato mashruuca ama inay ku soo xulato cidda fulinaysa mashruuca habraaca tartanka furan. Haddii Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ay doorato inay tartan furan kusoo xulato cidda fulinaysa mashruuca, waa inay dib-u-soo gudbisaa Daraasadda Suurtagalnimada, oo ay la socoto Qorshaha Xulashada ee cusub iyo dukumintiyada kale ee loo baahan yahay, islamarkaana ay raacdo hannaanka caadiga ah ee xulashada mashaariicda kasoo billowda Hay'adaha Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashaariicda.

CUTUBKA 11AAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 160-BS
Diiwaannada Habraacyada Xulashada iyo Tartanka

1. Si loo horumariyo daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka, shirkad kasta oo ku lug leh tartanka qandaraaska mashruuca Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah, waa in ay kaydisaa diiwaan qoran ee dhammaan habraacyada lasoo maray, si waafaqsan Qodobka 31 ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

2. Diiwaannada waa inay heli karaan ayna baari karaan Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed, ama qofkasta oo si sharci ah ugu igmato ama hay'adda dowladeed ay khusayso.

3. Sarkaalka Idman ee Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ayaa mas'uul ka ah in uu diiwaannada ka dhigo kuwa la heli karo islamarkaana ay baari karto hay'adda codsanaysaa marka ay codsato.

4. Ku guuldarreysiga Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca inay soo gudbiso diiwaanka marka laga codsado waa dembi.

5. Hay'adda codsanaysa waxa ay baari kartaa diiwaannada waxa ayna u soo bandhigi kartaa nuqul kamid ah indha-indhaynteeda Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca.

6. **Xafiiska Hantidhawrka Guud waxa uu waajib ahaan u leeyahay in uu helo dhammaan diiwaannada, heshiisyada, daraasadaha, qiimaynta, xogta maaliyadeed iyo xogta hirgelinta Qandaraasyada Shaqa-wadaagga ah (PPP).**

Qodobka 160-BT
Diiwaannada Sida Gaarka ah loogu Baahanyahay inay Qoraalka Ahaadaan

1. Iyadoo aan la xadideyn hannaanka guud ee ku xusan Sharcigan ama qodobbo kamid ah Sharcigan, waxyaabaha soo socda waa inay marwalba ahaadaan kuwa qoraal ah:
   a) Ogeysiiska Guud ee Fursadaha Maalgashi;
   b) Caddeynta Muujineysa Rabitaanka;
   c) Dukumentiga Xulashada Hordhaca ah;
   d) Codsiga Soo-jeedinta; iyo
   e) Warbixinta Qiimaynta iyo lifaaqyada la socda.

Qodobka 160-BU
Ka-saaridda Tartanka Qandaraaska Usoo Tartamayaal

1. Habraaca faafaahsan ee looga saarayo U-tartamaha Qandaraas tartanka qandaraaska waa in lagu qeexaa Xeer-nidaamiye uu Wasiirku usoo saaray si waafaqsan Sharcigan.

2. U-tartame Qandaraas waxaa looga saarayaa ka qaybgalka tartanka sababaha soo socda:
   a) inuu bixiyo macluumaad beenabuur ah marka uu soo gudbinayo jawaabta ama Soo-jeedinta;
   b) inuu qorshe shirqool la dhisto tartame kale ama sarkaal Dowladeed si uu samayn ugu yeesho qayb kamid ah diyaarinta Dukumintiyada Tartanka Qandaraaska;
   c) inuu ka hor istaago tartamayaasha kale ka-qaybgalka Tartanka Qandaraaska;
   d) inuu ku lug yeesho habdhaqan la xiriira musuqmaasuq, khiyaano, qasbid, carqaladeyn, bixin xogo qarsoodi ah ama wax-is-daba-marin ku saabsan Soo-jeedinta/jawaabaha;

e) fulin la'aanta waajibaadyada qandaraas ee hoos yimaada Heshiiskii Mashruuca, kuwaas oo loo arko inay khatar ku yihiin geeddi-socodka fulinta qandaraaska, waase in (i) hawl-gudasho la'aanta aysan keenin duruufo ka baxsan awoodda tartamaha iyo (ii) in tartamaha ay khusayso loogu digay si waafaqsan habraaca digniinaha ee ku xusan Xeer-nidaamiyaha;
f) in lagu helay fal-dembiyeed la xiriira helitaanka ama isku dayga helitaanka qandaraas ama qandaraas-hoosaad;
g) xallin la'aanta ku aaddan waajibaadka cashuuraha kadib markuu qiimeeyay Xubin kamid ah Canshuuraha Dakhliga, ama inuu la baxsaday canshuur siday ahaataba; ama
h) in lagu helay fal-dambiyeed la xiriira ganacsi ama hawlo shaqo:

3. Shakhsiyaadka milkiilayaasha ka ah shirkadaha laga saaray tartanka qandaraaska iyo shirkad kasta oo kale oo ay aasaasaan tartan ka saarista kadib waxa ay ahaanayan kuwa ka xayiran ka qayb-qaadashada tartamada iyo hawlaha mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah illaa laga qaado xayiraadda.

Qodobka 160-BV
Shaacinta Danaha Gaarka ah

1. Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda Dawladda ee Masuulka Ka ah Mashruuca, Guddiga Mashruuca, Waaxda Farsamada, Guddiga Isku-dhafka Wasaaradeed ama qof kasta oo ay u magacaabeen hay'adahan jago la-taliye, waxaa waajib ku ah inuu shaaca ka qaado dan kasta uu ku leeyahay, si toos ah ama si dadban, mashruuc gaar ah ama tartan qandaraas oo ay ku lug leedahay hay'adda uu ka tirsan yahay ama hay'adda magacowday.

2. Shaac-qaadista danta gaarka ah waa in la sameeyaa kahor inta aysan hay'addu guda-galin hawlaha mashruuca.

3. Shaac-qaadista waa in lagu diwaan galiyo war-murtiyeedka shirka ee hay'adda ay khuseyso.

4. Xubinta danta gaarka ah leh kama qayb qaadan karto wax go'aan ah oo ku saabsan arrimaha mashruuca ee miiska saaran.

5. Xubinta ka tirsan hay'adaha kore ee jabisa qodobkan waxa ay galeysaa fal-dambiyeed la xiriira anshaxa, waxaana laga saarayaa hay'adda ay katirsantahay iyo/ama waxaa la saarayaa ganaax ama ciqaab kasta oo kale oo loo dabaqi karo si waafaqsan Sharcigan, Xeer-nidaamiyaashiisa iyo/ama Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

6. Haddii xubinta ogaato inay dan ku leedahay arrinka laga hadlayo inta lagu jiro shirka ama kadib marka la billaabo falangeynta arrintaasi, xubintu waa in ay si deg-deg ah shaaca uga qaadaa danta gaarka oo ay ka leedahay, walibana aanay ka qayb-qaadan habraac kale oo arrinkaas ku saabsan, waana in lagu qoraa war-murtiyeedka shirka.

7. Shardiga shaacinta danaha gaarka ah waxaa sidoo kale lagu dabqayaa wakiillada la soo igmaday.

Qodobka 160-BW
Xiriirka Qaybtan Lixaad la Leedahay Qaybaha Kale ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016

Haddii Qaybtani aysan isbeddel ku samayn, qodobbada Sharciga libka ee Qaranka, 2016, marka laga reebo Qaybtan Lixaad, waxaa lagu sii dabaqayaa xulashada iyo fulinta Qandaraasyada Mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah.

Qodobka 160-BX
Maareynta Maalgashiga Guud

1. Mabaadi'da Maareynta Maalgashiga Guud ee ku cad Xeer-nidaamiyaasha Maareynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-galka ah, ayaa sidoo kale lagu dabaqi doonaa mashaariicda Iskaashiga **Shaqa-wadaagga** ah. Arrinkaan waxa ka mid ah in mabaadi'dan la dabaqo marka la qiimeynayo mashaariicda, iyo waliba gaar ahaan marka la hubinayo in mashaariicdaasi ay yihiin kuwa La-awoodi-karo, sida uu dhigayo Sharcigan.

2. Dadaal kasta oo lagu horumarinayo ama lagu ballaarinayo nidaamka sharci ee maaraynta maalgashiyada guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in loo fuliyo si waafaqsan qodobada iyo mabaadi'da lagu qeexay Sharcigan.

Qodobka 160-BY
Hantidhawrka

1. **Iyada oo aan waxba loo dhimaynin Qodobka 170aad ee Sharciga libka ee Qaranka 2016, Hantidhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay in uu sameeyo hantidhawris ku saabsan taageero kasta oo Dawladdu siisay Mashaariicda Qandaraasyada Iskaashiga** Shaqa-**wadaagga ah ee la ansixiyay, iyada oo si sanadle ah loogu sameynayo Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'adaha kale ee Dawladda ee si toos ah ama si dadban ugu lug leh mashaariicdaas.**

2. **Xafiiska Hantidhowrka Guud marka uu fulinayo barista Qandaraasyada Dheef-wadaagga ah waxa uu raacayaa (Sharci Lr.14/2023), isla markaana waxa uu samayn karaa baaris hantidhawr maaliyadeed, u-hoggaansanaan sharci,**

waxqabad, fatash ama baaris gaar ah ku saabsan Mashaariicda Qandaraasyada Iskaashiga Shaqa-wadaagga ah, waqti kasta oo loo baahdo.

Qodobka 160-BZ
Baabi'inta iyo Beddelka Qaybta Lixaad (VI) ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016

1. Qodob kasta oo ka mid ah Qaybta Lixaad (VI) ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016, waa la baabi'iyay.

2. Qaybta Lixaad (VI) ee Sharciga libka ee Qaranka, 2016, waxaa lagu beddelay Sharcigan.

3. Sharcigan waxa loo tixgalinayaa inuu qayb ka yahay Sharciga libka ee Qaranka, 2016.

Qodobka 160-CA
Dhaqan-galka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqan-galayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

LIFAAQA 4AAD
QODOBBADA HESHITSYADA MASHAARIICDA ISKAASHIGA SHAQA-WADAAGGA AH (PROVISIONS OF PROJECT AGREEMENT)

WAAJIBAADYADA AASAASIGA AH EE LOO BAAHAN YAHAY IN LAGU QEEXO HESHIISKA MASHRUUCA WAXAY KA KOOBANYIHIIN KUWAAN SOO SOCDA:

1. Dabeecadda iyo baaxadda hawlaha iyo adeegyada ay dhinacyadu qabanayaan iyo shuruudaha fulintooda.

2. Xuquuqda Hay’adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca, Shirkadda Mashruuca iyo marka ay habboon tahay, Amaah-bixiyaha ee la xiriira mashruuca, oo ay ku jirto xuquuqda fara-gelinta mashruuca ee Amaah-bixiyeyaasha.

3. Tilmaanta hanti kasta oo uu ku darsanayo dhinac gaar ah mashruuca.

4. Tilmaamaha farsamo iyo natiijooyinka laga filan karo Heshiiska Mashruuca.

5. Halbeegyada waxqabad ee loo baahan yahay in lasoo buuxiyo si wafaaqsan Heshiiska Mashruuca.

6. Kharashaadka, tariifadaha ama khidmadaha kale ee lagu bixinayo dhaqangelinta mashruuca; iyo sidoo kale habka loo xisaabinaayo lacagahan iyo sida ay isku beddeli karaan waqti ka dib.

7. Nooca iyo baaxadda taageerada Dowladdu siinayso mashruuca.

8. Faafaahinta agabka ama tas-hiilaadka loo baahan yahay iyo mas'uuliyadaha ka dhalanaya.

9. Masuuliyadda helitaanka rugsadaha, shatiyada iyo oggolaanshiyaasha.

10. Hannaanka saami qaybsiga dakhliga ee Dawladda iyo Hay'adda Gaarka Loo-leeyahay.

11. Diyaarinta iyo soo gudbinta warbixinnada maaliyadeed iyo warbixinnada kale iyo habraaca fulinta hantidhowrista maaliyadeed ee la xiriira mashruuca.

12. Hababka tayo-dhowrka iyo xakameynta tayada, iyo sidoo kale kormeerka iyo la-socodka maamulka, maaliyadda iyo farsamada hawlaha mashruuca, ka faa'iidaysigiisa, iyo daryeelkiisa.

13. Cawaaqibka ka dhalanaya dhacdooyinka rabbaaniga ah ee ka baxsan awoodda dhinacyada.

14. Saameynta ama natiijooyinka ka dhalanaya isbeddelada sharciga, oo ay ku jiraan tallaabooyinka saamaynta taban ku yeelan kara shirkadda gaarka loo leeyahay ee fulinaysa mashruuca oo ay Dowladda qaado.

15. Xaaladaha uu dhinac ku soo gabagabeyn karo ama uga bixi karo heshiiska kahor dhamaadka muddada Heshiiska Mashruuca iyo cawaaqibka ka dhalanaya, oo ay ku jirto bixinta magdhowga iyo hababka loo xisaabinayo magdhowgaas, marka ay habboon tahay.

16. Lahaanshaha hantida mashruuca iyo habka wareejinta mashruuca marka uu dhammaado Heshiiska Mashruuca ama marka dhinac gaar ah ka baxo heshiiska.

17. Hababka xallinta khilaafaadka.

18. Dammaanaddaha waajibaad kasoo-bixista (performance securities) ee loo baahan yahay, iyo faafaahin ku saabsan giimahooda iyo hannnaaka lagu soo gudbinaayo ama lagu luminayo dammaanaddahaas.

19. Muddada uu soconayo Heshiiska Mashruuca.

20. Xilliyada sida degdegga ah ay Hay'adda Dawladda ee Masuulka ka ah Mashruuca ama Amaah-bixiyeyaasho usoo faragelin karaan mashruuca, kadib marka Shirkadda Mashruuca ay kasoo bixi wayso waajibaadkeeda.

21. Hannaanka shirkadda gaarka loo leeyahay ee dib-u-maalgelinta mashruuca (refinancing of project assets).

22. Habraaca kormeerka lagu qiimeynayo xaaladda hantida mashruuca ka hor inta heshiisku dhamaan ama la joojin.

23. Sharciga lagu maamulayo Heshiiska Mashruuca, ha ahaadaan shuruucda Soomaaliya ama shuruucda dalal kale oo ku habboon.

24. Shuruud kasta oo kale oo Wasiirku ku qeexay xeer-nidaamiye ama hagayaal.